# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Shuruucda, Fadhiyada iyo Hadal-qoraalka

### Kal-fadhigii 39aad Fadhigii 19aad

**Salaasa 15 April 2019**

**Quraanka: -** Md. Xaamud Cismaan Cigaal

**Gudoonka: -** Gudoomiye, Axmed Yaasiin-sh. Cali Ayaanle.

**Ajandaha Fadhiga: -** Doodda Wax-ka-baddelka Xeerka Ismaamulka G. iyo Degmooyinka.

**Md. Maxamed X. Yuusuf Waabeeye** **(11min 30sec)** wuxuu leeyahay xukumada waxa waajib ku ah waa inay qiimayn ku samayso darajooyinka degmooyinka "B iyo D" muddo aan ka badnay laba sanood. Waa qodobka 12aad ee Guddida, waayo is bedel oo lambar 5 ayaa ku qoran.

Waxa weeyaan degmooyinka la leeyahay xukumadu ha soo qiimayso waa degmooyin jiri jiray. Matalan marka laga hadlayo B waa degmo oo dalka ka tirsan oo waaweyn, marka laga hadlayo "C" waa 11 degmo. Shanta degmo ee "B" ah, waxa ka mid ah; Oodweyne, Saylac, Badhan, Ceel-afweyne iyo Buuhoodle.

Shantaa degmo ee "B" ah waxa qiimeeyey dawladihii ka horeeyey Somaliland, waana sdegmooyin jiri jiray. Dawladdii dambe Somaliland-na marka laga reebo Ceel-afweyn waxay magaalo madaxdii u magacawday Gobolo, Matalan Oodweyne (Gobolka Daad-madheedh), Saylac (Gobolka Salel), badhan. Markaa waxa weeyeen magaalooyinkaasi horay u jiri jireen oo horay u qiimaysnaayeen dawladihii Somaliland waxaabay u magaacaabeen magaalo madax, isla markaa Gobolada B waxa ku jiri jirtay Magaalada la yidhaa Gabiley, markaa magaaladan Gabiley meel lagu qiimayey oo "A"loga dhigay anigu garan maayo oo way ka mid ahayd, laakiin dawlada Somaliland waxay ka dhigtay Gobol oo magaalo madaxda Gobolka ayey tahay iyaduna hadda.

Markaa sabab imika ay dawldadu u qiimayso magaalooyinka waaweyn hadda ma jirto. Degmooyinka "B" iyo "C" ama waa in dib loo wada qiimeeyaa wixii la odhan jiray 'B" oo dhan iyo "C" oo dhan oo imika Gobolo ah oo ay ku ku jirto Gabiley, ama waaba in la iska daayaa Gobolaaba laga dhigee, xukumaduna waa in dib u qiimaynuun ku samaysaa "D" ama degmooyinka faraha badan ee ay Magacawday. Kuwaas waa in kala habayntoodii loo sameeyaa, laakiin degmooyin waaweyn oo "B" ah oo Gobolo loo magaacay, imika qiimayntooda maaha in lagu wareeriyo kharashka umaddan iyo dhaqaalaha umaddan oo la geliyo kolba inta meel la istaago la yidhaahdo imisa KM ayey isku jiraan. Waxaan leeyahay degmooyinka "D" ha la qiimeeyo wixii aan qaadi karayn ha laga qaado, laakiin 'B' iyo "C" waa degmooyin waaweyn oo iyagu dawladihii hore

ahaa oo imika magaalo madaxyo u ah Gobolo. Waxaan leeyahay taasi ma qabato qiimayna imika kuwaasi uma baahna.

**Qodobka 22[aad]** ee xeerkan ee Guddidu kaabista ku soo samaysay. Waxa qodobkan 22ad sheegay tirada xubnaha Golaha Deegaan waxay ku salaysan yihiin darajooyinka oo kala ah

Hargeisa A+. Anigu garan maayo qiimaynta ay guddidu u raacday markay tidhi A+ yaa qiimeeyey. Dabcan waynu ognahay waa magaalo Madaxdii waa Caasimaddii Somaliland ee Dastuurku sheegayey, laakiin A+ waxa qiimaysa Guddidi Qaran (National). Marka la leeyahay A+ waan in ay jiraan sababihii iyo wixii lagu qiimeeyey.

Waxa kale oo la yidh Degmooyinka Darajada A waa 11 xildhibaan, halka A+ ay tahay 15 xldhibaan. Xaga xildhibaanada in 15 laga dhigo Hargeisa waa sax. Degmooyinka A in 11 xildhibaan laga dhigo waan raacsanahay, laakiin A+ ma jirto wax la raaco ama Guddidu u cuskatay ama Guddidu Qaran oo samaysay qiimayntaas. Mida kale marka A la leeyahay waxa jiray degmooyin uu Ingiriis inaga tagay sida Boorama, Berbera, Burco, Laascaanood, Ceergaabo iyo Hargeisa. Lixdaas ayey Somaliland u bedelatay lixda Gobol ee waaweyn.

Lixdaas Ingiriis inagaga tagay darajooyina way lahaayeen, laakiin halkan Gabiley laga raaciyey Xeerkeebay ku jirtay horta. Waxa weeye A+ Guddidi heer qaran ah ayuunbaa qiimayn karta. Waa la ogyahay inay caasimadii tahay, laakiin maaha in halkan la isaga soo qoro A+. Mida kale A kale ee Gabiley degmo ayey ahayde yaa sheegi halka ay ka timid taasina waa taas.

Waxa kale oo jira marka laga hadlayo tirada xildhibaanada marka ay tahay 11 xildhibaan degmooyinka A sida Burco, Berbera, Boorama, Laascaanood, iyo Ceerigaabo, Gabiley maaha inay qaadato 11 xildhibaan. Anigu Gabiley kuma kacsani, laakiin waa in ay leefalkeeda ahaataa, markaa waxaan leeyahay 11 xildhibaan ee Burco leedahay ma yeelan karto Gabiley, imikaanu idiin sheegaynaa, xildhibaanaduna waana in aanay waxan qolo qolo ka so dhigin. Markaa Gabiley "B" ayey ahayde ilaa Wasaarada Arrimaha Guduhu qiimaynayso wixii B ahaan jiray waa "B". **Waxaan helay taageero (1 seconded) ii qor.**

Waxa intaas ii raaca **Qodobka 28aad** oo ka hadlaysa "Dharsanaanta Xubinta Golaha Deegaanka" marka laga hadlaayo qodobka 28aad waxa uu sheegayaa wax ka bedelka ay Guddidu soo samaysay waxay yidhaadeen, Duqa degmada iyo ku xigeenkiisa ayuunbaa yeelan kara xasaanad. Xildhibaano la wada doortay magaraanyo sida midna

xasaanad ku yeelano midna aanu ku yeelanayn macquul illama aha. Waa xildhibaanada Golaha Baarlamaanka oo la yidhaa Shir-guddoonka oo kaliya ayaa xasaanad yeelanaya, in kasta oo ay teenu dastuuri tahay, haddana qofka la dooratay waa inuu lahaadaa xasaanad (Immunity) waayo dad ayaa u codeeyey oo doortay.**Waxaan soo jeedinayaa in xasaanada wada lahaadaan xildhibaanadu.**

**Waxaan anigu soo jeedinayaa in xubnaha aan fulinta ahayni (Executive) kalfadhiyada uun ay yimaadaan, laakiin xaasaanad qof kiyuu loo galay oo loo codeeyey oo xildhibaani waa inuu lahaadaa xasaanadii doorashada.**

Marka laga hadlayo **Qodobka 29aad** oo odhanayaa "Waayida iyo banaanaashaha Xubinimada" Qodobkaas 29aad farqadiisa 3aad oo odhanaysa "Markuu helo warqad qoraal ah oo ku xusan farqada 2aad ee Qodobkan wuxuu u gudbinayaa Wasaarada Arrimaha Gudaha, isaga oo ka dalbanaya Wasaarada in Guddi heer Qaran ah oo baadha ceedaymaha xubinta Golaha. Guddidaas heerka Qaran ah ma qorna cidda magacaabaysaa iyo inta ay ka kooban yihiin. Waan in lagu cadeeya xeerkan Guddida heerka Qaran waxa magaacabayaa, Matalan wasiirka Arrimaha Guddaha oo kale.
Marka laga hadlayo haddii doorashada Golaha deegaanka ahi ku qabsoomi waydo xiligeedii, Golihii hore ayaa xilka siihaynaya waxaana qiimaynaya Golaha Guurtida si meel banaan u soo bixin (Vacuum) maadaama oo aanu dastuur sheegayn, wixii kordhin waxa iska leh Golaha Guurida waanan ku raacsanahay taas Guddida.

**Qodobka 89aad**: Nidaamka Qorshaynta Dakhliga. Halkan waxa ku qoran Darajada "A" waxa la siinayaa tirada "6" Hargeisa iyo Burco. Tirada "4.5" waxa la siinayaa Boorama, Laascaanood. Tirada "4" waxa la siinayaa Berbera, Ceerigaabo iyo Gabiley. Haddii Burco iyo Hargeisa laga dhigay mid "6" kuwa kale ha laga dhigo "4.5" Gabiley ha laga dhigo "4". Degmooyinka "B" waxa loo qoondeeyey si kala jaad jaad ah oo Oodweyne oo kale waxa la yidhi "2.5" Saylac oo kale "2" ayaa la yidhi, Buuhoodle "1", Ceel-afweyn "2" ayaa la yidhi. **Waxaan leeyahay mid "3" ha laga dhigo ileen waa degmooyin "B**" ah oo wakhti dhaw la qaatee.

Marka laga hadlayo degmooyinka derajada "C" waxaad moodaa in qaarna "1" la yidhi qaar '1.5" la yidhi, waxaan leeyahay iyaga ha la siiyo "1.5" marka laga hadlayo 12.5% cashuuraha ahaa oo marka hore jideeyey Xeer Lr. 12. Degmooyinka "D" ah inta qiimayn lagu samaynayo inay waxoodii helaan weeye oo "0.5" ha laga siiyaan odhan lahaa. Waa idin salaamayaa.

**Guddoomiye:** Wuu mahadsan xildhibaan Maxamed Yuusuf Waabeeye, ha la is dhagaysto. Waxaan codsanayaa markuu xildhibaanku doodiidisa la dhamaysto inaanu fadhiga ka bixin, waxa laga yaabaa in xildhibaan ka dambeeyaa rayiga kaga

wanaagsanaado oo isaga laftiisuu uu second gareeyo, markaa aynu is wada dhagaysano. Waxaan ku soo dhaweynayaa;

**Md. Axmed Barkhad Obsiiye** **(13min 22sec)** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Shir-guddoonka, Xildhibaanada, Saxaafada dhammaantiin waxaan idinku salaamayaa salaanta Islaamka Asalaamu Calaykum Warax matulahi Wa barakaatu.

Horta xeerku waa xeer aad u muhiim ah, waana xeerarka la inagooga baahnaa inaynu horeba u samayno. Markaa anigoo guddo galaya xeerka, markaan soo qaato Qodobka 12aad sida ay u qorantaan u daayey oo ah "**Muddo Saddex sanood ah**" in lagu qiimeeyo waa siduu ugu qornaa xeerka.

**Qodobka 15aad;** waxaan ka saaray **farqada 2aad**, waxaan farqadan 2aad, uga saaray oo u raray ciwaanka hore oo odhanaya "iyada oo laga duulayo" markaa tan dembe waan ka saaray taa hore ayaan sidan idhi oo waxaan ka dhigay farqad kaliya oo waxaa idhi, Iyada oo laga duulayo Qodobka 110aad, Qodobka 111aad, Qodobka 112aad ee dastuurka Qaranka ee dagmooyinka Darajada "A" iyo "B" waxay ka masuul yihiin bannaanshaha adeegyada horumarineed ee dhammaan qaybaha dhulka ay degmooyinku ka kooban yihiin **"sida"** halkaa ku daray A iyo B oo halkaa kaga xidhiidhiyey oo waxaan ka saaray farqada 2aad.

**Qodobka 18aad;** waxaan ka saaray **farqada 6aad** oo waxaan u raray farqada 1aad ayaan ka dhigay ciwaanka halka odhanaysa "Guddoomiyaha Gobolku uu xidhiidhinayaa Xukumada dhexe iyo Degmooyinka Gobolka oo hoos yimaada Wasaarada Arrimaha Gudaha. Waxaan ka saaray "Waajibaad iyo Xilkasnimada uu yahay "waxaan ka saaray **farqada 6aad** intaas. Markaa taas ayaan ka dhigay farqada 1aad, waxaan is bedelaya **farqadaha** 1aad, 2aad, 3aad, 4aad, 5aad, 7aad iyo 8aad.

Waxa kale oo aan ka saaray **farqada 12aad** oo odhaynaysa "Guddoomiyaha ayaa saxeexaya kharashka isuduwayaasha" markaa waxa weeyaan isuduwayaal kastaa waxa uu hoos yimaadaa wasaarada oo ma saxeexo Guddoomiyaha Gobolka waanan ka saaray.

**Qodobka 22aad** Xubnayaasha Golaha Deegaanka oo aan ka dhigaynay Darajada A 15 xidhibaan, Darajada B 11 xildhibaan, Darajada C 7 xildhibaan ah. Waxaasi wax soconaya maaha waana khalad. Waxaan idhi anigu 25-kii xidhibaan Hargeisa waan u daayey, B waxaan u daayey 17 xildhibaan. Waxa weeyaan waxa inagaga tagtay dawladii Somalia, markaa waxa meesha imanaysa inay noqoto in aynu hanan kari weyno oo degmooyinkeedii waddankiiba aynu hoos u dhignay, markaa waa la ina qiimaynayaa oo qiimaynta la ina qiimaynayo ayey ka mid tahay, waayo maanta iyada

Hargeisa ay tahay caasimadii ay 25 inan ay hanan kari waydo waa hoos u dhac. Arrintani waxay noqonaysaa arrin faashila oo dawladnimadeena hoos u dhigta markaa **waxaan soo jeedinayaa Golaha Deegaan loo daayo sidoodii hore.**

Degmada Gabiley waxa kaga tagtay Dawaldii hore ee Somalia, sababtay uga tagtay maxay ahayd. Sideedii Gobol ee barigii hore jiray "A" baa laga dhigay ka bacdi iyadaa ku dartay laba degmo midi Gabiley ayey ahayd midna Afgooye ayey ahayd, waxaan loogu daray ila dhaqaale awgeed, markaa inagu "A" kamaynaan dhigine waxaa ka dhigtay dawladii hore ee Somalia.

**Qodobka 28aad;** Dhawrsanaanta xubinta Golaha deegaan. Waxaan leeyahay dhawrsanaanta xubnuhu waa isku mid oo laga dhigi maayo in laba nin uun xasaaanad yeeshaan kuwa kalena aanay yeelan oo umadda ayaa soo wada dooratay oo waxa weeyaan Guddoomiyaha iyagaa iska dhex doortay markaa waa xildhibaan uun. **Waxaan soo jeedinayaa dhawrsanaanta xasaanada ay wada yeeshaan dhammaan xildhibaanadu.**

Golaha deegaan xildhibaanada la dhimmi maayee waxa loo daynayaa sidii hore. Waayo sababta loogu deynayaa waxa weeye dadka xoolaha yaqaan Xoolaheena waxa cunta shillin, shillintu waxay leedahay qaybo Jidhin, Gabaaray, Fara dheer, garangoor markaa intan yar jidjinka ahi markay gafane gaadho way is daadataa oo dhabanada ayey ka daadataa, laakiin ta aan daadani waata garangoorka ah ee ugu weyn. Haddii kii ugu weynaana aan sii naaxinana dee waa khalad in la naaxiyo maaha ninkaasi maba dhargayo dee oo Guddoomiyaha iyo Guddoomiye ku xigeenku maba dhargayaan.

**Qodobka 33aad;** waxaan ku daray oo aan ku raacsanahay Guddida haddii doorasho dhici weydo Golihi hore ayaa xilka sii haynaya, ilaa laga soo dooranayo Gole cusub.

**Qodobka 89aad;** Guddidu waxay ku dartay farqadan waa xaaraan way kala jajabiyeen, waxay sameeyeen jaajuus**.** Waxa inoogu yaalay waxa soo qiimaynaysa Wasaarada Arrimaha Guddaha oo la tashanaysa Wasaarada maaliyadda iyo Xisaabiyaha Guud, markaa Guddideenu in aynu iyaga kala qaybino oo kala jajabino oo darajooyin u samayno maaha. Markaa tusaale ahaan markay Burco ka dhigeen **"6"** Booramana ay ka dhigeen "**4.5"** waxaan garan laayahay halkay ku kala kaxeeyeen.

**Waxaan soo jeedinayaa** degmooyinka "A" waa inay isku mid noqdaan. Matalan Sanaag oo kale waa Gobolka ugu baaxad weyn haddan hoos ayaa loo dhigay. Waxa kale oo aan leeyahay degmooyinka "B" waa in ay isku mid noqdaan. Degmooyinka "C" isku mid noqdaan. Inagu weynaan qaybo u kala samayn, waxaan leeyahay yaa qiimayeey, waxaan leeyahay aynu wasaarada u dayno.

Imika Saylac iyo Oodweyne maxay ku kala duwan yihiin, waliba saylac waa deked oo waxa ka soo baxa dhaqaale, laakiin Oodweyne ayaa laga saraysiiyey. Waxaan ka saaray dhammaan qaybaha "Darajooyinka ay Guddidu samaysay" waanad salaaman tihiin Asalaamu Calaykum Warax Matulahi Wa Barakaatu.

**Md Axmed Maxamed Nuur** **(18min 24sec)** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Waan salaamayaa Shir-guddoonka, Mudanayaasha, Bahda saxaafada iyo Marti sharaf haddii ay fadhido. Dhammaantiin waxaan idinku salaamayaa Asalaamu Calaykum WA Raxamatulahi Tacaalaa WA Barakaatu. Mudanayaal horta xeerkan ina horyaalaa waa xeer aad iyo aad muhiim u ah oo loo baahna in marka hore la guddo galo.

Waxaan ka hadlayaa wax ka bedelka iyo Kaabista ay soo sameeyeen Guddida Arrimaha Guddaha iyo Difaacu.

**Qodobka 11aad** Guddidu waxay tidh waa in lagu soo sameeyaa qiimaynta "Muddo laba sanno ah" waxaan qabaa oo aan leeyahay si xeerkani hore inoogu dhaqangalo, anigu waan ka soo horjeedaa labada sanno oo **waxaan soo jeedinayaa** in laga dhigo**"16 bilood"** si haddii kharash loo helo lagu dardargelinayo oo shaqaalaha la siinayo.

**Qodobka 21aad**waxa uu ka hadlayaa degmooyinka iyaga oo ka duulaya siyaasada xukumada ee Maamul daadejinta. Wasaarada iyo hay'adaha ka hawlgala ay waajib ku tahay inay dhaadhiciyaan miisaaniyada, oo Awoodaas heer degmo miisaaniyadoodana ka qayb noqdaan Miisaaniyada Golaha deegaan ee Degmooyinka, iyada oo ay wada shaqayn la leeyihiin Wasaaradaha iyo Xafiisyada.

Waxa halkaas inooga cad Wasaaradaha iyo hay'adaha arrinka la leeyahay daadajiya oo miisaaniyadaha daadejiya, marka horeba wax Miisaaniyad hagaagsan ah oo Gobolada u gudbin jireen may jirin. Kharashaadka iyo miisaaniyadda la siiyo wasaaradaha iyo hay'daha waxay inta badan ku baxdaa xafisyada wasaaradaha guddahooda, Gobolada iyo degmooyinkuna way ku dulmanaayeen. Mar haddii imika la leeyahay ha la daadejiyo horta waa Ilaahay mahadii, waxa halkaas laga akhrisan doonaa bal waxay ugu talo galeen inay kaga qayb galaan hawlahooda ka socda degmooyinka iyo Gobolada.

Mida labaad waxa la yidhi ha loo dhaadhiciyo Gobolada iyo degmooyinka. Degmooyinkana waxa la wada hoos geeyey Golayaasha deegaanka ee degmada. Waxaan filayaa sababta loo hoos geeyey waxa weeye in ay daboolaan baahiyaadka ku yimaada Wasaaradaha ka hawlgala degmooyinka ee darajada "A" iyo "B" inay daboolaan iyago gaab ah ee bannaanaada ayaan taana u arkaa.

Matalan degmooyinkii “A” ahaa ee halkana “A” ugu qoran horta A+ anigu ma ogali, degmooyinku isku wada darajo ayey ahaayeen, Kuwa “B” isku darajo ayey ahaayeen, kuwa “A” isku darajo ayey ahaayeen. Waxa weeye haddii ay caasimad tahay waa caadi ee laakiin tii “A”ahi ha ku hawlgasho “A”, tii “B” ahi B-deedii ha ku hawlgasho.

Waxay u jeedadaydu tahay marka la leeyahay maamulkii ha la daadejiyo, waxa qodobku sheegayaa in Wasaarada iyo Hay’adaha ee ka hawlgala Degmooyinka in Miisaaniyadaha la daadejinayo waxaana toos uga muuqato Miisaaniyadaha Dawladaha Hoose.

Anigu degmooyinka laba ayaan u kala qaadayaa. Degmooyinka “A” waxaan qabaa waa degmooyin uu dhaqaale aad iyo aad u badani ku soo hoydo. Haddii ay xil iska saaraan Wasaarada iyo Hay’adaha Miisaaniyadooda loogu daray wixii ka dhinma way buuxin karaan ayaan qabaa. Degmooyinka “B” waynu ka wada warqabnaa ayaan filayaa oo iyaga la ildaran hawlahoodii, marka kuwaa kale loogu shubana wax allaale waxay ku kordhin kartaa ma jirtee waxa waajib ah, Wasaaradaha iyo hay’adaha ka hawlgala degmooyinku, shaqaalahoodu ka hawlogalo in dhaqaale ku filan loogu shubo dawladaha hoose.

Maanta ma filaayo in Degmada “B” ah wada xalin karaan baahiyaadka ka jira degmada, markaa Wasaaradaha iyo Hay’adaha ayna is odhan qola kale ayaa la idin hoos geeyey. Waa in haddii Wasaarado hanan karri weydo hawsheeda halkaa ku ranbasaan in laga wada xisaabtamaa fiican waayo xaqiiqda ayeynu isku sheegaynaa. Waxa la yidhi qoondada Wasaaradaha ha lagu shubo dawladaha hoose, iyada oo meel kasta uu nin masuul ahi u joogo.

Si haddaba wixii loo soo diray wax ka ogaado isticmaalkeedana wax ka ogaado waa in sub-head gooniya si loo ogaado waxa Wasaarad waliba degmadaas ku soo shubtay, si mad madawga iyo dareenku meesha uga baxo taas intaas ayaan kaga hadlayaa.

Golayaasha Degmooyinki way tiro badnaayeen marka run la doonayo way farabadanyihiin oo degmooyinkuu way is dhaamaane haddii aad u baahato Maayirka iyo Ku xigeenkiisa heli maysis oo xafiisyadii way ka maqan yihiin, waxa Meesha jooga subax kasta dad farabadan oo iyaga doonayaa, runtii Hargeisa aad ayey ugu farabadan yihiin dadku, waxa haboon in la yareeyo, wasaarada arrimaha Gudahana waxaan leeyahay waa in aad kormeertaa shaqada ka socota Dawlada hoose ee Hargeisa.

**Waxaan Guddida** ku taageersanahay dhimida tirada Golaha deegaanka ee kala ah in Hargeisa laga dhigo 15, halka Degmooyinka kale ee A-da ah laga dhigo 11 xildhibaan.

Darajada B-da horta degmada Oodweyne waa “B” oo 1963 ayaa degmo loo magaacay iyada iyo Gabiley. Gabiley maanta “A” ayey ku xisaabtamaysaa aniga oo xumaan iyo xaasidnimo mid aan u hayaa aanay jirin waxaan leeyahay waa in B-deedii laga dhigaa oo marka guddida qiimaynu tagto ee meeshii B-da ahay haddii ay ka dhigayso “C” iyo Haddii meeshii “A” ahayd ay ka dhigayso “B” guddidaasbaa lala sugi. Markaa haddii aanu jirin sharci aynu Gabiley “A” kaga dhignay aanu jirin, ana waxaan taaganahay Oodweyne waa “A”.Markaa waxaan leeyahay bahalada mar ha la soo wada qiimeeyo.

Mudanayaal markaynu ka hadlayno awooda Golaha Deegaanka, waxa Duqa Magaalada la hoos geeyey wax allaale wixii ka soconayey degmada, waxaana meesha jira Matalan halka maamulka degmooyinka duqa awooodii oo dhan ayaa la siiyey, haddii ay tii dawlada hoose tahay, haddii ay ta dawlada dhexe tahay waxa loo dhiibay duqa. Mudanayaal Matalan degmooyinka B-da ah waxa loo magacaabay Guddoomiye iyo ku xigeenkiisii iyo Xoghayihii Degmada iyo taliye Qaybeed, waxa allaale iyo wixii oo dhana waxa la hoos geeyey Duqa. Xitaa marka arrimo nabadgelyo timaado Duqa ayaa matalaaya oo Badhaasbkan meesha la keenay xeerka kuma cadda wax allaale wax hawl ah oo meesha u yaala.

Markaa waxaan leeyahay Qodobkaasi wuxuu u baahan yahay in dib loogu noqdo, haddii kale waxa dhici doona is qabsi maamul, markaa intii dadka timuhu isugu xidhmi lahaa dee bahalkii imkaynu gacanta ku haynaaye in jiho loo kala sameeyo ayaa haboon. Bal marka duqii hawshiisii xeerka uu ku wato oo badhasaabkii cusbaa ee la soo bedelay oo u arkaayo sida uu u shaqaynayo badhasaabkuu Burco dee waxa uu ku xisaabtamayaa inta uu Badhasaabka Burco ku xisaabtamayo. Markaa maamul qasbayaa intaan xeerku inaga bixin aynu maamul u kala samayno.

Badhasaabka Gobolka ayaa ka masuul ah Guddida nabadgelyada, halka degmooyinka darajada “B” ah uu Duqa degmadu ka masuul yahay, xeerkani wuxuu u baahan yahay in dib loo habeeyo oo badhasaabku inta uu soo tooso haddana seexan maayo oo mushaharuun qaadan maayee.

**Qodobka 28aad:** Dhawrsanaanta Xubinta Golaha. Golaha deegaanku waa gole la soo doortay sideena oo guddidu waxbay ku soo dartay. Haddii ay 25 ahaayeen iyo haddii ay ka yaraadaan waa isku wada mid. Waxaan ka eegay dastuurka meel ay kaga taalana ma jirto dastuurka, waana inaga oo nidhaa Shir-guddoonka nidhaa iyaga oo kaliya ayaa yeelanaya waa mid aan soconayn. Waxaan leeyahay waan aynu iska deyno waxa ceebta inoo soo jiidaya. Waliba waxa la yidhi waxa labadooda xilka ka qaadayaa Madaxweynaha, oo waayo madaxweyuhu wax kasta ma isagaa ka dambeeya.

**Waxaan leeyahay Guddoomiyaha iyo Guddoomiye ku xigeenka waxa doortay xubanaha iyagaana ka qaadi kara oo hore ayey u dhacday inta Gole deegaan doortay Maayir inta ay haddana ka qaadeen mid kale doortay, markaa waxaan leeyahay yeynaan Madaxweynaha wax kasta la doonan.**

**Waxaan soo jeedinayaa** in Golaha deegaanku dhanka Xasaanada ay isku wada mid noqdaan. Intaas ayaan kaga tagayaa Salaamu Calaykum WA Raxamatulahi WA Barakaatu.

Goddoomiyaha: Wuu mahadsan yahay xildhibaanku, waxaan ku soo dhawaynayaa

**Md Siciid Cartan Cismaan (23min 50sec):** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Wabihii nastaciinu calaa maruu dunyaa WA diin, amaa bacad.

Horta xeerkan inna horyaala ee Kaabista qaybina ay ka timid xaga xukumada. Xeerkani sidiisa saddex jiho ayuu ka kala yimid. Jiho waxay ahayd Golaha Mooshin ayaa la keenay, mooshinkaasi waxa uu ku jihaysnaa waxa la arkay dhibaatadii maayirada ka timid oo la yidhi ha la rido oo 2/3 ha lagu riddo. Dalkan dhibaato farabadan ayey u gaysatay digtaatooriyadna way ka dhalatay. Iyaga taas ka dhiidhiya ayaa xubno Golaha ka mid ahi waxay ku keeneen Mooshin in 2/3 laga guuro oo laga dhigo kala badh iyo haldheeri (Absolutely Majority) in laga dhigo.

Mooshinkaas markii la guddo gali lahaa, horta xeerkan ilaa intii uu socday waa la dhex socday oo muddo sided bilood ah ayuu socday oo intaasba waa la dhex socday. Horta mooshinkii Golaha waa la keenay si waafiyaa looga dooda. Mooshinka doodiisii waxaa ka dhashay laba qodob, labadaas qodob ee ka dhashay waxay ahaayeen 1. "In aan loo baahnayn tirada badan ee Golaha deegaanka oo aanu dalku qaadi karin". Waxa kale oo ka dashay 2. "magacan Xildhibaan waxa qaadan kara oo kaliya "Baarlamanka" xasaanad markay noqotana waxa soo raacaysa fulinta, waar dalkani ma qaadi karo 350 xildhibaan, markaa in xildhibaan lagu bedelo "Councilor" xasaanadna la siin ayaa doodii ka dhalatay.

Halkaas markay maraysay halkii looga codayn lahaa ayaa la yidhi xeerbaa xukumadu ku keenaysaa aynu la sugno waxay qaadatay sided bilood. Bahalku saddexdaas jiho ayuu ka kala yimid. **Waxaan taageersanahay in tirada xildhibaanada la dhimo "3 Seconded"**

Waxa kale oo aan soo dhawaynayaa in Xasaanad aanay la ahayn Xubin Gole deegaana waxa laakiin aan leeyahay, sabab Maayirka iyo maayir ku xigeenka loo siiyaa oo kuwa kale loogu diidaa waan qayrul sharci. Sidaas markay tahay waa la soo wada doortay,

mar haddii aynu garanay in xasaanadii laga qaado oo aanay macquul ahayn 350 nin oo xildhibaano sheeganayaa ay  xasaanad sheegtaan in xasaanadii laga wada daayo, ka dayn iska daaye ilaa Madaxweynaha ayaaba la sii wada waana qalad. Sidaa awgeed xasaanadaasi walana qayrul sharci ayey ahayd, imikana xubin Gole deegaan weeyaan.

Wali bay ahayd in ninka Maayirka ahi awooda oo dhan gacanta ku hayey, maantana hadaynu ugu sii biirino kuwan deeyaan la dooran ee ha la iska daayo. Waxay noqonaysaa in ka maayirka ahi xidh xidho kuwii lala soo doortay oo markii haddii aynaan qaadin Karin 350 xasaanad waxaan qabaa in xasaanada laga daayo.

Waxa kale oo aan qabaa qodobkii Goluhu ka dooday ee la isku raacay ee ahaa 2/3 in guddidu ku soo celiso xaq uma laha, waayo waxay ku ciyaartay qodobkii “seconded” helay ee laga dooday.
 Waxaan soo jeedinayaa horena Goluhu isugu raacay in 2/3 laga dhigo hal dheeri (Absolutly Majority) waayo waxa qodobkani maayirkii ka dhigay Dictatorship oo maayirku wuxuu haysanayaa 4 ama 5 sanno. Bal Hargeisa siday u eegtahay eega waddo ma hayn, maayirku wuxuu u baahan yahay 5 xubnood oo kale 5 sanno wuu iska haysanayaa, waxaan leeyahay guddidu way ku xad gubudtay qodobkaas isaga ah.

Qodobkan kale ee isna xil ka qaadista ah ee **Qodobka 6aad** waxay cadaynaysaa habka lagaga qaadayo ninka maayirka ah oo marka hore Maayirka ayaa warqad loo qorayaa haddii uu qaban waayo Guddoomiyaha Gobolka ayaa loo qorayaa, marka dambana ka ugu dadweynbaa la yidhi. Inta kale waa caadi waan taageerayaa, laakiin qodobka ka ugu da’da weyn, ka ugu da’da weyn qoluun ayuu la safanyahay oo da’da la iskuma raacsanee waa in la yidhaa maxkamada Gobolka.

Qodobka kale ee aan ka hadlayaa waa qodobka diyaarinta Miisaaniyada oo ah halkay u dhimatay. Qodobkan farqada 4aad waxay sheegaysaa Goluhu markuu ansixiyo Miisaaniyada waxa loo gudbinayaa Wasaarada Arrimaha Gudaha. Wasaarada arrimaha Guduhuna waxay u gudbinaysaa Wasaarada maaliyadda. Wasaarada maaliyaduna waxay ku daraysaa Miiaaniyadda Guud ee Qaranka si loogu ansixiyo. Waxa loo booday xisaab xidhkii, waxaan leeyahay xisaab xidhka ha u boodinee waa in meesha dawladaha hoose ka baaba’een aynu abaarnaa oo ah Maaraynta iyo Maamulka ee Dawladaha hoose. Waa in la faafiyaa oo la yidhaa sidan iyo sidan.

Miisaaniyadda waxa weeye nimanka Maayirada ah ee dawladaha hoose joogaa qaabka shirkadaha ayey u shaqeeyaan oo wax allaale wax dabraana majiro. Miisaaniyadu waxay ka kooban tahay dakhli iyo kharash. Dakhligii waabay qabanayaan oo Banka waabay dhigaan, laakiin laba saxeex ayuun buu ku baxaa waa ka maayirka iyo Xoghayaha cid allaale cid ay Accountibility ay u yihiin ma jirto. Waxaan doono

markaan lunsado waxuunbaan waa fajinayaa habka (Procedure) wax allale wixii la iiga baahnaa ileen cid kale oo saxeex ku lihi ma jirtee.

Haddaba qodobka 92aad ee xisaab xidhka Miisaaniyada waxaan u dhaxaysiinayaa qodob la yidhaahdo: Maaraynta maamulka Miisaaniyadda Dawladaha Hoose. Waa ta lagula soconayo ee muujinayaa isku dheelitirnaanta (Check and Balance" ee lagu ogaanayo Miisaniyadani siday u baxday ayaan ku darayaa waxaan ka dhigay **Qodobka 91aad.**

**Talo soo jeedinayaa**

Waxaan Golaha u soo jeedinayaa qaabka loogu dhaqmi jiray Miisaaniyad sanadeedka Dawladaha Hoose intii ka horaysay 1991. Nimaadkaas oo loogu ilaalin jiray Miisaaniyad sanadeedka.

- Dawladaha hoose dalkan JSL waa in ay wixii dhukumenti ah ka daabacdaan Madbacada Qaranka.
- Waa in dhammaan dukumentiga ka diwaan geliyaan Hanti-dhawraha Guud iyo Xisaabiyaha Guud ee Qaranka.
- Dakhli kasta oo ay soo xarayso dawladaha hoose waa in lagu shubaa khasnada dawlada dhexe (Bangiga).
- Kharash kasta oo ay Dawladaha hoose bixiyaan waa in loo gudbiyaa Xisaabiyaha degmada ama Gobolka (Check and Balance).
- Xisaabiyaha Dawlada dhexe waa in uu ilaaliyo Miisaaniyada sanadlaha ah dakhliga iyo kharashka isaga oo waafajinaya Miisaaniyada.
- Dawladaha hoose waa in ay xisaab xidhka u gudbiso Wasaarada arrimaha Gudaha.

Habkani waa habka lagu xakamayn karo wax allaale wixii musuq maasuq ah ee jira ama lagu heli karo hab miisaaniyadeed caafimaad qaba oo lagaga gam'i karo. Haddii kale wuxuun bay ahaanaysaa shirkadihii awalba socon jiray Waxaan qabaa anigu qodobkaasi in lagu soo daro haddii Qarankan dan rabo ama miisaaniyadi inay saxanto hab maamulka lacageed ee qaladaadka ku jira Dawladaha Hoose in la saxo la doonayo. Waan ka baxay.

**Guddoomiye:** Waxaan ku soo dhawaynayaa:

**Md. Cabdiraxman Cisamaan Caalin** **(01:04-Hr 04sec)**: Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Guddoomiye xeerkani waa mid muhiim u ah qaab-dhismeedka maamulka Gobolada iyo degmooyinka dalkeena. Waa xeerarkii u horeeyey ee Golayaasha Qaranku hore u ansixiyeen oo maanta dib u eegis inoogu yaala. Muddo dheer marka laga soo bilaabo

2007 ilaa iyo maanta xeerkaasi waxa uu ku jiray tijaabo. Tijaabadii iyo khibradii aynu ka dhaxalnay heer degmo iyo heer Gobol waa mid qaranka ceeb ku ah.

**Waxa muhiim ah in aynu ku qabaqno oo ku bedelno si aynu uga soo saarno, si looga baxo iska horimaadka faraha badan ee jira.**

**Qodobka 6aad** oo ka hadlaya qaab dhismeedka dalka waxaad moodaa sida guddidu u soo jeedisay inay ka wanaagsan tahay siday Xukumadu u soo jeedisay oo saddex Qodob ah. Qaab-dhismeeda dalka Jamhuuriyadda Somaliland u qaybsamaa Gobolo iyo degmooyin waa cadddaan waana dastuuri.

Caasimada dalka Jamhuuriyadda Somaliland waa Hargeisa waxayna yeelanaysaa xeer u gaar ah. Gobolkii hore loo odhan jiray Gobolka Waqooyi-galbeed waxa loo bedelay **"Gobolka Maroodi-jeex" waxaan odhan lahaa kaas sidiisa ha loo qaato,** waayo mwaxaad moodaa guddida si fudud ayey u soo qaadatay, waxaan leeyahay taas ayaa muhiim ah.

**Qodobka 7aad waxaan soo jeedinayaa sidiisa ha loo qaato. Waayo qiimayna Gobol iyo degmo laguma magacaabi karo si faahfaahsan ayuu sheegayaa.**

**Qodobka 8aad;** inagu xeerka Gobolada iyo degmooyinka ayeynu soo saarnay, Wasaaradu waxay xeerkan ka soo saaraysaa xeer-nidaamiye, marka ay diyaariso waxay u gudbinaysaa Golaha Wasiirada oo anixinaya Golaha Wakiiladuna shaqo kuma laha. Waa in sidaas loo dhigaa oo qiimaynta iyo waxa looga baahan yahay waa in wasiirku ku soo saaraa xeer-nidaamiye oo aanay u soo gudbin sida halkan ku taala Golaha Wakiilada iyo Golaha Guurtida ee ay Golaha Wasiirada u gudbiyaan oo sidaas ku dhamaystaan**. "Waxaan soo jeedinayaa Qodobka 8aad sidaas ha loo qaato"**

**Qodobka 9aad;** Gobolada Somaliland waxay u qayb samaan lix Gobol, in kasta oo Gobolka Hargaysi dastuurka uu ku yaalo, laakiin maadaama oo Hargeisa caasimada tahay taas Gobolka Maroodi-jeex ayeynu u qaadanaynaa. **Markaa waxaan leeyahay sidaas Xukumadu u soo jeedisay qodobka 9aad ayuu sax ku yahay sidiisa ha loo qaato.**

**Qodobka 11aad,** wuxuu ka hadlayaa xuduudaha Gobolada iyo Degmooyinka. Marka hore meel iska horimaad ayaad ku jiroo guddidu 12 bilood ayey tidhi. Kuma yaalee waxa ku yaala "Saddex sanno" iyaguna waxay soo jeediyeen "Laba sanno". Markaa laba ha loo kala dhigo midi waa qiimaynta Gobolada iyo Degmooyinka A, B iyo C oo qaladka Guddidu samaysay 12 bilood inoogu sheegay, laakiin maaha labadaba ta B iyo ta kale 12 bilood ayey inoogu sheegeen, xukumadu "**saddex sanno ayey soo jeedisay"** guddiduna laba sanno ayey soo jeedisay. Waxaan taageersanahay ha la qaato ta

guddida ee **"labad sanno ah".**Waayo waa in qiimayn lagu sameeyo A, B iyo C oo marka aan qiimayn lagu samayn oo xukumadu soo jeedisay.**Waxaan leeyahay qiimaynta A,B iyo C labadaas sanadood ee Guddidu soo jeedisay ha lagu soo dhamaystiro, haddii lagu dhamayn waayo sidooda ha ahaadaan.**

Qodobkan waxa kale oo aan doonayo inaan taabto waa ta "D" farqada 5aad oo ay soo qoreen guddidu. Laga soo bilaabo 1993 ama intii xeerkan la sameeyey degmooyinka "D" ahi way jireen doorashana ma galaan Gole deegaana wuu ku qoran yahay dadkuna way iska jecel yihiin inla yidhaa reerkiina degmo ayaa loo magacaabay, iyada oo farqadan shuruudo iyo macnaawiyaad suurto-gal ah lagu magacaabo. Mid kaliya oo degmooyinka "D" qiimayn lagu soo saaray ma jirtee waa **"Political District".** Waxaan odhan lahaa aynu tijaabino, marka horena waxa ku taalay dawladaa keenaysa Qiimaynta haddii ay tahay A, B, iyo C. markaa waxaan leeyahay aynu u qabano mudadaas guddidu u qabatay in qiimaynta lagu keeno,laakiin aynu raacino **xarafka a) Haddii wasaaradu ku guulaysan weydo qiimaynta degmooyinka mudddadaas laba sanood ah, dhismaha Guddida "D" waa in ay ka baxdo meesha.**Waxa oo aynu xeerka ku daraynaa haddii guddidu ku soo qiimayn weydo muddadaas laba sanno ah, degmoyinka "D" sub-district ayey ahaanayaan.**Qodobka 11aad** inoo kala doora labadaas soo jeedimood oo aynu qaadano ta ah **"sub-district"**

**Qodobka 12aad,** Qiimaynta darajo bedelida 12 bilood kuma jiraane waa labo sanadood. Xukumada waxa waajib ku ah in ay dib u qiimayn ku samayso darajooyinka A, B iyo C muddo aan ka badnayn laba sanood oo ka bilaaban dhaqan-galka Kaabis iyo Wax ka bedelka Xeerka una soo gudbiso Golaha Wakiilada. Horta waa in Golaha Wasiirada loo gudbiyaa, qaab-dhismeedka yeynaa qaldin. **Halkaas Waxaan ku darayaa una soo gudbiso Golaha Wakiilada.**

**Qodobada 13aad iyo 14aad sidooda ayaan u taageeray in loo qaato guddiduna aanay ku soo samaynin wax is bedel ah.**

**Qodobada 15aad,** markaynu dastuurka eegno farqadiisa 110aad, 111aad, 112aad dastuurku wuxuu sheegayaa degmooyinka dalka ee aynu naqaan waa A, B iyo C **oo** guddidu si waangan u soo dhigtay in adeegyada aasaasiga ah ee waxbarashada, Caafimaad iyo beeraha in degmadu la wareegto. **Waxaan soo jeedinayaa in taas Guddidu ku dartay la qaato.** Anigu farqad 5aad oo aan leeyahay xaga dambe ha lagaga darro oo noqonaysa **"Guud ahaan Xukumada gaar ahaan Wasaarada Arrimaha Guddaha waxa waajib ku ah in degmooyinka la barro wax si ay xilkooda iyo waajibaadkooda ula wareegaan".**

**Qodobka 15aad, farqada 4aad** waxa weeyaan masuuliyada degmooyinka darajada C, laba hore wuxuu ka dhigay A iyo B. darajada C wuxuu yidhi ee adeegyada ku xusan farqada 2aad ee qodobkan waxay ku xidhnaanaysaa awooda maul iyo maaliyadeed ee degmooyinkaasi hadba heerka ay hanan karaan, waa "Optional" oo haddii ay awood u leeyihiina way galayaan haddii aanay awood u lahayna ma galayaan si waafaqsan siyaasada maamulka. Waan in wasaarada Arrimuhu Guduhu qiimayso in ay hanan karto iyo in kale oo ay qiimayn keentaa.

Qodobka 16aad, ilaalintii xeerkaa la sameeyey dastuurkuna uu dhigayo ee qodobada 111aad, 112aad iyo 113aad ay jiraan Gole maamul oo gobol, halkan qaab –dhismeedka ayuunbaa la inoogu soo qoray, maxaynu u awoodi la nahay in aynu hawlgelino golaha maamul ee Gobolka, maxaa looga baqayaa waa in la dhaqan geliyaa oo la abuuraa, waa in doorasho loo diyaar gareeyaa sida dastuurku sheegayo. Waa in la doorto Guddoomiyaha Gobolka ku xigeenkiisa la doorto sida maayirka loo doorto

Qodobka 18aad ee xeerkan Guddidu waxay soo jeedisay saddex qodob oo halkana way ku jiraan oo waxa weeyaan qodobka 12aad, 13aad iyo 14aad. Markaa ma garanayo sababta ay u soo qoreen oo sida Guddidu u soo qortay iyo sida xukumadu u soo qortay. **Markaa waxaan leeyahay qodobadan sidooda ha loo qaato**.

**Qodobka 19aad,** waa xilkan Guddoomiyaha iyo Guddoomiye ku xigeenka waxaan odhan lahaa waxa si aad ah u cad. **Waxaan soo jeedinayaa sidaas xukumadu u soo dhigtay in loo qaato.**

**Qodobka 20aad waan ka booday isna sidiisa ayaan u qaatay.**

**Qodobka 21aad,** xidhiidhka laamaha dawlada dhexe ee heer degmo iyo heer Gobol. Waxa lagu sameeyey dib u habayn oo lagu daray **"hirgelinta xafiiska laamaha dawlada dhexe ee kuwaas oo maamul ahaan iyo miisaaniyad ahaan hoos imanayaa Maamulka Golaha deegaanka ee heer degmo"waxaan taageersanahay soo jeedinta Guddidu samaysay.**

Siday u soo habeeyeen waa laba farqadood oo ay soo habeeyeen "Wasaaradaha iyo Hay'adaha dhexe ee bixiya adeegyada horumarka dhaqaale iyo bulshadu waxay shaqooyinkooda u dhaadhicinayaa ilaa heer degmo oo ay ka samaysanayaan xafiisyo oo ay shaqaalahoodii gaysanayaan iyo wixii la mid ah, si loo hirgeliyo dhaadhicinta awoodaha ku xusan farqada 1aad. **Waxaan taageersanahay afarta Farqadood ee Qodobka 21aad oo aad moodo in guddidu waxba aanay ku darin oo ay u soo qaadatay sidi xukumadu u soo dhigtay.**

**Qodobka 22aad,** waxa weeyaan Golayaasha degmooyinka. Markii hore guddidu si ayey soo jeedisay in kasta oo aynu u baahan nahay, laakiin marka aynu wax bedelayno waa in aynu sababaynu, guddida sababayn badan oo ay samaysay ayaa ku jirta. Markii hore waxaynu is nidhi uun Hargeisa 25 siiya, kuwa kale ee A-da ahna 21 siiya maynu sababaynin, degmooyinka B ahna siiya 17 kuwa C ahna siiya 13. In kasta oo ay u baahan tahay in aynu sababaynu waxaynu dhimayno.

Anigu waxaan soo jeedinayaa Hargeisa aniga oo odhanayn A+ oo markii hore ayey A ahayde waxaan siinayaa 17 xubnood. Inta kale waxaan ku raacsanahay siday Guddidu soo jeedisay ee ahayd A; 11 xubnood, B; 9 xubnood iyo C; 7 xubnood, laakiin waxaan Hargeisa 17 xubnood uga dhigay waxa ku nool qayb ka mid ah Umadda Somaliland oo kursigu wuxuu tagi doonaa 20,000.

Guddidu kamay soo hadal, laakiin waxay tidhi oo ay soo jeedisay halka "**Mudanayaal"** ha loo qaato "**Councilors"** xeerka meel kasta oo ay mudanayaal ku taalo loo qaato "Councilors" oo haddii aynu magacii bedelnay meel kastaa in bedesho.

**Qodobka 23aad,** oo aanay Guddidu ka so hadal waxaan ku arkay farqada 3aad markaad eegto **"Golayaasha deegaanku waxay ku iman doonaan tartan doorashooyin ee nidaamka saddexda xisbi Qaran".** Laba qaab ayaa Golaha deegaan iyo Golaha Wakiiladu u soo kala baxaan. Golaha Deegaanku Ururo ayuu ku soo baxaa oo Xeer Lr. 20 iyo Xeer Lr. 14 oo labaduba waajibin jireen iyo kaniba. Malaha waxa niyadeena ku soo jirta in aan Ururada la furin. Anigu waxaan odhan lahaa sidii nidaamku awalba ahaan jiray ee ahayd in ururo ku soo baxaan oo la furo ururada oo ah aasaaska Dimiquraadiyada Somaliland in loo daayo oo aanay xisbiyadu noqon wax xidhan**. Golaha deegaan ha ku soo baxaan oo ay doorashada ku galayaan ha noqdo sidii ay awalba ku soo bixi jireen. Oo farqadaas ha laga saaro**

**Qodobka 24aad,** oo ah mudda xilka Golaha waxaan odhan lahaa waxa aad u cad qaabka ay xukumadu u soo jeedisay inaynu u qaadano, laakiin xarafaha A, F. in kasta oo xarafka F ay ku qoran tahay siday guddidu soo jeedisay halkan way ku taalaa. **Markaa waxaan leeyahay sidaas xukumada ha loo qaato.**

**Dhawrsanaanta Xubnaha.** Anigu waxaan qabaa qodobkaas sidi rag horeba ka dhawaajiyey, **"xubnaha Golaha deegaan ee darajooyinka kala duwan sifo kaliya oo isku mid ah ayaa lagu soo doortay, mid wax gaar ah lihi kuma jiro. Waxaan odhan lahaa xasaanadoodu waa taas".** Waxa jira is dhex yaac hawlaha dambiyo iyo cabashooyin aad looga cawday, markaa taas iyada halkaas ayaan kaga tagayaa.

Farqada 5aad ee Guddidu is bedelka ku samaysay waxaan odhan lahaa sideeda ha loo qaato oo waa isku mid, laakiin waxaan xaga dambe kaga sii daraya farqada 5aad ee ay is bedelka ku sameeyeen **"Haddii Duqa iyo ku xigeenkiisa lagu soo eedeeyo lunsi hanti Qaran Hanti, xil gudasho la'aan, fal lidi ku ah Qaranimada Somaliland xasaanad ka qaadistooda waxa qoraya Madaxweynaha Jahmuuriyadda Somaliland, iyada oo loo raacayo habka Golaha Wasiirada loo raaco".** Anigu waxaan odhan lahaa habka ha la iska dayo oo ha loo raaco xeer hoosaadkooda.

**Qodobka 25aad, sidiisa ayaan u daayey.**

**Qodobka 26aad,** mudanuhu marka la doorto wuxuu bil gudaheed ku diwaangelinayaa Hantida uu leeyahay mood iyo noolba.**"Waxa soo jeedinayaa waxa weeyaan intaa la dooran waa in ay koomiishanka ka diwaangeliyaan hantidooda".** Waxaan odhan lahaa inta aan la dooran "councilors" ee ay ku jiraan Olalaha, waan in farqada 1aad ee qodobkan lagu qoro.

**Qodobka 17aad,** oo aanay Guddidu ka hadal farqada 1aad **"Golaha deegaanku wuxuu yeelanayaa xeer-hoosaad la xidhiidha hab dhaqanka iyo dhaqanka laga rabo mudanaha iyo qaab raaca hawlahooda"** waxaan ku daray **"Qaab-raac Hawlahooda".** Dhammaan wixii xeerkani aanu qorayn ee shaqadood, fadhiyadooda iyo hab dhaqankooda waa in xeer-hoosaadkooda ku daraan.

**Qodobka 28aad, oo isna aanay guddidu ka soo hadal oo ah dhawrsanaanta Xubnaha, waxaan leeyahay sidiisa ha lagu qaato.**

**Qodobka 29aad,** oo ah waayida iyo baaannaanshaha xubnaha Golaha, waxa weeyaan xeerku laba wax ma wada waajibiyee marna wuu waayaa xilka marna wuu baneeyaa, markuu xilka waayo meeshu way bannaanaataa, markaa labada hab (Procedure) wuu qorayaa waana waayida iyo bannaanaanshaha, **markaa ha lagu darro.**

**Farqada 2aad** oo Guddidu soo jeedisay waxa ku taala **"Haddii ay dhacdo in lagu kacay mid ka mid ah shuruudaha ku xusan farqada 1aad ee qodobkan, ugu yaraan 1/3 xubnaha Goluhu waxay u gudbinayaa qoraal ay ku saxeexan yihiin cadday maheeda"** waxa ku taala **"Guddoomiyaha Gobolka", anigu waxaan ku bedelayaa "Wasiirka Wasaarada Arrimaha Guddaha".** Guddoomiyaha Gobolka fariinta ayuunbaa la siimarinyaa, laakiin waxaan leeyahay maadaama oo Wasiirku Guddida usaarayo isaga toos ha loogu geeyo warqada, guddida Wasiirku saarayaana maaha mid heer Qaran ah ee Waa Heer wasaaradeed.

**Anigu waxaan idhi Qodobada 30aad iyo 31aad sidaas ayey ku fiican yihiin ee ha loo daayo. Waayo wax yari ayaa ku jiraayo xisbina ma badelan karo xubin Golaha deegaanka ka mid ah, haddii aanay ku sifoobin shuruudaha ku cad qodobka 29aad waan sax.**

**Qodobka 32aad,** halka **"Mudanuhu"** waxaanku bedelay **"Councilor" farqada** 1aad: **mudanuhu wuu iska casili karaa, isaga oo istiqaalad qoraal sababaysan ah u gudbinaya Duqa degmada, waxaana ansixinaya Duqa degmada, ka dib markuu ogolaansho ka helo Golaha deegaanka. Waxaan leeyahay waa in ogolaansho cod ku yimaadaa Golaha kala badhkii iyo hal dheeri (Absolutly majority"**

Waxaan eegay **farqadiisa 2aad**: xubinta istaqaalada dhiibtay ee Goluhu ka aqbalay, waxa Duqa degmadu qoraal toos u soo gudbinayaa Goddoomiyaha Gobolka oo u gudbin doona Wasiirka. **Waxaan soo jeedinayaa in Guddoomiyaha Gobolka meesha laga saaro oo si toos ah loogu gudbiyo Wasiirka.**

**Qodobka 33aad,** oo ah haddii Goleyaasha deegaanku ku qabsoomi weydo xiligeedii, Golihii hore ayaa xilka sii haynaya inta laga dooranayo Gole cusub. Halkaas waxaan leeyahay waa mushkilad imika inna daba taagan oo Golihii Deegaanka barrigii Jiciir, Daahir Riyaalana toddobadoo sanadood lama kordhinin, laakiin may ahayn mid iska horimaanaysa (Contradiction), maanta se muran ayaa ka soo baxay. Waxa muranka keenay, meel kalena kuma taalo in Golaha deegaan loo kordhiyo oo Guurtidu u kordhiso ee barrigii dhawayto ee Xukumadii hore ee Mudane Siilaanyo hogaaminayey ayaa Golaha Wakiilada markii loo kordhinayey ayey soo raacday oo iyaga xilgaa wakhtigoodii dhammaaday. Taas ayaan keentay, markaa iyaduna sharci weeye, laakiin imika ciddii xilka loo kordhiyey laguma darrin. **Anigu waxaan odhan lahaa qodobkani waa qodob muhiim, in kasta oo aan mabdi'iyan Golaha la qabo in la iska sii fadhiyo aad si uun muddo kordhin ogolaanayso waa mushkilad taagane aynu kaga baxnee in qaabkaas guddidu u soo dhigtay looga gudbo ayaan odhan lahaa.**

**Qodobka 34aad** oo siday xukumadu ku keentay ah oo aanay guddidu ka hadal oo ah Muddada kala guurka ee u dhaxaysa taariikhda Golihii hore lakala diray inta laga soo dooranayo, waxa xilka sii haynayaa Xoghayaha fulinta. Markaa waxay ku soo beegaysaa imika kol haddii aynu samaynay habkan ah (procedure) kordhinta ah. In kasta oo la leeyahay qodobkani waa dastuuri dee waxyaabo badan oo aynaan fulin oo dastuuri ah ayaa jira, markaa waxaan leeyahay bal horta sidaas ha iskaga sii qornaado oo waxa jirta mar qodobkani haboon yahay inta Golaha kale la wareegayo bannaantaa jiraysa, in uu xilkaas guto ayaa waajibaad ah, laakiin imika xil uu sii haynayaa ma jirto. Waxa uu ka mid noqonayaa qodobada kale ee dastuuriga ee ka Golaha maamula ee Gobolada.

**Qodobada 35aad, 36aad iyo 37aad ee aanay guddidu ka hadal sidaasaan kaga gudbay.** **Qodobka 38aad** ee xeerkan afar guddi hoosaad oo u dhiganta sidan guddidu soo jeedisay, markaa saddex guddi-hoosaad ee xukumadu soo gudbisay ayuunba ta guddida ku yaala. Waxaanu qorayaa Golaha deegaan ee darajada **A** iyo **B** waxay yeelanayaan saddex guddi hoosaad sidaa xeerku sheegay, markaa waxba kuma kala duwana ayaan leeyahay.

**Qodobka 39aad anigu sidiisa ayaan kaga gudbay.**

**Qodobka 40aad;** oo guddidu is bedel ku soo samaysay oo ay yidhaahdeen Xarafaha **C** iyo **D** iyo **N** iyo **O** intuba si isku mid ay ayey xeerkan iyo ta guddidaba ugu jirtaa. Markaa anigu halkay wax ka bedeleen garan maayo ee sidooda ayaan u qaatay afartaa xarafba.

**Qodobka 41aad anigu sidiisa ayaan u qaatay.**

**Qodobka 42aad** Guddidu waxay inoo sheeegtay inay is bedel ku samaysay **xarafaha B iyo D,** labada dhinacna xarafaha B iyo D isku si ayey u qoran yihiin oo wax farqiya oo u dhexeeyaa ma jiro.**Markaa waxaan leeyahay sidooda ha lagu qaato maadaama oo aan wax farqiyi u dhaxayn.**

**Qodobka 44aad** ee ay Guddidu tidhi is bedel ayaan ku sameeyey iyo kay xukumado keentay wax is bedel ah oo u dhexeeyaa ma jirto. Waxay **farqada 1aad** iyo **2aad** ayaan bedelnay, mana jiro waan isla akhriyoo wax is bedel ah oo u dhexeeya.

**Qodobka 45aad wuxuu u baahan yahay in lala akhriyo qodobka 19aad. Waxaan leeyahay labadan qodob ee 19aad iyo 45aad isku wax ayey ka hadlayaa oo mid ha la iskaga dhigo inta la isla akhriyo, si aanu u abuurin iska hor imaad (Contradiction).**

**Qodobka 46aad isna waxa uu u baahan yahay in lala akhiro qodobka 43aad oo isna qodobkan ah oo ka hadlayaa waajibaad guddi hoosaadyada Golahan Deegaanka in lala akhriyo si la isku waafajiyo.**

**Qodobka 46aad anigu sidiisa ayaan u qaatay.**
**Qodobka 47aad anigu sidiisa ayaan u gudbay.**
**Qodobka 48aad sidiisa ayaan uga gudbay.**

**Qodobka 49aad** waxay ku kala gadisan yihiin laba meelood. Mid wuxuu qorayaan da'da 35 jir, midna 30 jir ayuu qorayaa. Sanadaha waayo aragnimada ayaa mid waxa

qorayaal afar sanno (4) midna wuxuu qorayaa saddex sanno (3). **Anigu waxaan qaatay da'daa 35 jirka**ah in lagu darro oo sidaas guddidu u soo jeedisay 35 jir laga dhigo. **Halka khibradana laga dhigo afartaa sanno ee guddidu soo jeedisay.**

**Qodobka 59,** waxa guddidu sheegtay in Wakaalada Biyaha iyo shaqaalaha dawlada hoose waxay hoos tagayaan Wasaarada arrimaha Guddaha oo u samaynaysa xeer-nimdaamiye u gaar ah, **waxaan la akhriyey qodobka 38aad waan ka waayey.**

**Qodobka 51aad** sidiisa ayaan ku qaatay. Qodobka 51aad farqadiisa 1aad oo aanay guddidu ka hadal xarfaha A iyo B kalfadhiyada Golaha deegaanku wuxuu qabsoomayaa labadii biloodba (2bilood) hal mar, waaa deg deg **waxaan leeyahay anigu ha laga dhigo kalfadhiga in la qabto saddexdii bilood mar (3 bilood),** waxay noqonaysa in sanadkii ay fadhiistaan 4 jeer.

**Farqada 4aad** ee isla Qodobkan shirka aan caadiga ahayn sababaha qabashadiisu waa inay ku cad yihiin qoraal haddii uu madaxweynaha yahay, haddii uu maayirka yahay iyo haddii 1/3 yihiin (saddex meelood hal meel). Intaan ajadaha la gelin waa in ay cad yihiin asbaabta loo qabanayo.

**Farqada 5aad**"way ka doodi karaa Goluhu haddii wax ajandaha ka baxsan guddida fulinta ama Xukumado soo jeediso". Haddii soo jeedintaasi ka dhalato waxaan ahayn wixii fadhiga loo qabtay, waa inay dood ku timaadaa dabeena la galiyaa ajandaha.

**Qodobka 51aad** ee xeerkan Guddidu may ka hadal, waxaanse ku daray **farqada 1aad xarafka (B) Ku xigeenkiisa markuu ka maqan yahay degmada waa cidda la wakiishay lagu qoraa ileen Guddoomiyihii iyo ku xigeenkiisa way maqan yihiine.**

**Qodobka 53aad sidiisa ayaan ku dhaafay.**
**Qodobka 54aad sidiisa ayaan ku dhaafay.**

**Qodobka 55aad farqadiisa 2aad "Go'aamada shirku waxay ku kala badh lagu daray tirada xubnaha fadhiya, shirkaas oo noqonaya (Absolutly Majority)"** markaa iyada wax badan maan bedelin.

**Qodobka 56aad sidiisa ayaan ku dhaafay.**
**Qodobka 57aad sidiisa ayaan ku dhaafay**
**Qodobka 58aad sidiisa ayaan ku dhaafay.**
**Qodobka 59aad sidiisa ayaan ku dhaafay**

**Qodobka 60aad** habka xeer dejinta xeer-hoosaadyada farqada 2aad oo ah **"Xeer-hoosaad kasta oo la dejiyo waa in dadweynaha loo bandhigaa, iyada oo lagu faafinayo, faafinta rasmiga ah ee dawlada".** Cidda faafinaysaa waa in lagu qoraa.

**Qodobka 61aad;** Daabacaada iyo Kaydinta xeer-hoosaadyada. Golaha Deegaanka waxa ku waajib ah inay daabacaan xeer-hoosaadyada, kuna soo saaraan faafinta rasmiga ah**.** Waxa kale oo waajib ah oo **farqada 2aad ah "Xafidaada iyo Keydinta xeer-hoosaadyada, lana siiyo degmo kasta iyo hay'adaha dawliga ah"** markaa iyagu waabay haystaane waa in lagu cadeeyaa meelaha lagu keydinayo.

**Qodobka 62aad** farqada 2aad oo ah**"Shir-guddoonku wuxuu xaq u leeyahay inuu mudanaha ku kaca arrimaha ku xusan farqada 1aad Xarfahiisa B, C iyo D inuu digniin qoraal ah siiyo"** markaa waxaan leeyahay halkaas ha lagu badelo **"Digniin Afka ah".** Waxaan leeyahay haddii guddoomiyaha oo shirka wada xubin ka dhexgasho oo ay ku celceliso waxaan leeyahay marka digniin afka ah ha la siiyo, marka xigana digniin qoraal ah.
**Qodobka 63aad sidiisa ayaan ku dhaafay.**

**Qodobka 65aad farqada 4aad "Xeerarka ay soo saaraan Golayaasha degaanku ee uu ku saxeexan yahay Guddoomiyaha degmadu, waan la saaraa faafinta rasmiga ah lana faafiyaa".** Xeerar maahee waa xeer-nidaamiyaal "rugulations".

**Qodobka 66aad** oo ah doorashooyinka Guddoomiyaha degmada iyo Duqa Dawlada hoose. Horta doorasho ayaa dhacda ee doorashooyin ma wada dhacaan, **markaa waxaan odhan lahaa "Doorashooyin"** ha lagu bedelo **"Doorasho" oo ha lagu saxo halkaas.**

**Qodobka 67aad farqadaas 3aad "Marka laba musharax ama ka badan la soo jeediyo ama ay isugu tagaan inay doortaan Duqa ama ku xigeenkiisa, habka doorashadu waxay noqonaysaaa Gacan taaga".** Waxaanay ku ansaxaysaa cod hal dheeri ah (Absolutly Majority). Waan in lagu saxo cod hal dheeri oo inta fadhida ah.Haddii golaha inta joogaa gacanta taagto waxay noqonaysaa (Simple Majority).

**Qodobka 68aad sidiisa ayaan ku dhaafay.**

**Qodobka 69aad sidiisa ayaan ku dhaafay.** In kastoo qodobka 69aad Guddida iyo qodobka 69aad ee xukumadu isku mid maaha. Qodobka 69aad dhanka Guddida waxa ku taala magacaabida Agaasimayaasha waaxyaha iyo Madax qaybaha, laakiin qodobka 69aad ee Xukumada waxa ku taala Gudbinta Waxqabadka Duqa iyo ku

xigeenkiisa.**Markaa halkas isk horimaad ayaa ku jira waa in la soo saaraa siduu ku yimid.**

**Qodobka 70aad** oon guddidu ka hadal waxa weeyaa xil ka qaadista Duqa iyo ku xigeenkiisa. Anigu sidaas ayaan kaga gudbay ay ugu qoran tahay.

**Qodocka 71aad waxa weeyaan qaab-dhismeedka maamulka dawlada hoose iyo degmooyinka xilkooda waa inay ku caddahay xeer-hoosaadka waa in lagu daraa, markaa meesha lagaga darayo idinkaa yaqaana.**

**Qodobka 72aad sidiisa ayaan kaga gudbay. Waayo wuxuu ka hadlayaa waaxyihii.**

**Qodobka 73aad** ee xeerkan waxaan u malaynayaa si ayey u wada qoran yihiin wax allale waxa ku kala duwan yihiina ma jirto waad isla akhriyi kartaan, waana Shan farqadood. Waxaan u malaynayaa halkan waxa ku jirta farqad dheeraad ah oo ta lixaad ah oon aan ta xukumada ku qornayn. Markaa taa Guddida ayaan qaatay sababtana way sheegeen.

**Qodobka 73aad** inaga oo ka gudubnay ayaa Guddidu waxay ku noqotay **qodobka 65aad** ee awooda sharci dejinta oo ah qodobka 60aad ka ahaa, laakiin halkan Xukumada waxa ugu jira Qodobka 74aad. Markaa taas waan fahmi waayey.

**Qodobka 74aad sidiisaan kaga gudbay.**

**Qodobka 75aad oo ah arrimaha farsamada iyo adeegayada bulshada**. Waxa ku taala Wakaalada Biyaha ee degmada. Golaha deegaanku wuxuu xaq u leeyahay kormeer iyo la tashi Madaxda wakaalada Biyaha, iyada oo mar walba daryeelka iyo arrimaha bulshada, waxaanay hoos imanaysaa wakaalada Biyaha. Markaa waxay iska horimaad ku tahay dastuurka iyo adeegyada bulshada ee degmadu la wareegtay ee aynu caddaynay **Qodobka 15aad** ee biyaha iyo caafimaad ayuu Qodobkani is horimaad ku keenayaa.

**Waxaan soo jeedinayaa in qodobka gabigiisaba meesha laga saaro, waayo halkaas ayeynu ku caddaynay cidda ay hoos imanayaan adeegyadaaasi caafimaad, Biyaha, Waxbarshada, Beeraha iyo Xoolaha.**

**Qodobka 76aad oo aanay Guddidu ka hadal sidiisa ayaan kaga tagay.**
**Qodobka 77aad sidiisaan kaga tahay.**
**Qodobka 78aad sidiisaan kaga tahay.**
**Qodobka 79aad sidiisaan kaga tahay.**
**Qodobka 80aad sidiisaan kaga tahay.**

**Qodobka 81aad sidiisaan kaga tahay.**
**Qodobka 82aad sidiisaan kaga tahay.**
**Qodobka 83aad sidiisaan kaga tahay.**
**Qodobka 84aad sidiisaan kaga tahay.**
**Qodobka 85aad sidiisaan kaga tahay.**

**Qodobka 86aad** Guddida qaadatay waxa ku yaala **khidmada adeegyada Golaha degmada,** laakiin **qodobka 86aad** ee xukumadu inoo soo gudbisay wuu iska horimaanayaa. Waxa weeyaan hay'adaha maxaliga ah, markaa qodobkaas khilaafkiisa ma galayo.

**Qodobka 87aad oo qodobka ku xiga ah waxa weeyaan khidmada adeegyada Golaha Oo waxa lala mideeyey qodobka 86aad oo ka hadlaya khidmada.**
**Qodobka 88aad** waxa weeyaan dib u habaynta cashuuraha, qodobkaan waxay u habeeyeen oo u dhignaa sida,**"xeer-hoosaad tacrifada ku xusan farqada 2aad ee Qodobkan waxa uu dhaqan galayaa marka Wasiirku Arrimaha Gudduhu ansixiyo, faafinta rasmiga ahna ku soo saaro"** iyo Wasiirka Wasaarada Arrimaha Guddaha ayaa awood u leh oo **farqada 4aad**oo ah **"Ogolaanshana saxeexa diidmada iyo dib u celinta soo jeedimaha wax ka bedelka tacrifadaha". Markaa anigu waxaan qaatay ta Guddida.**

**Waxay u bedeleen tacrifadaha ku xusan qodobkan waxa uu dhaqangalayaa marka Golaha Wakiiladu ansixiyo. Markaa labadaas qodob eey qaateen oo labadaba Golaha Wakiiladu awood u leeyahay ayaan anigu taageeray.**

**Qodobka 87aad:** Haddii aan ku yar noqdo waxa la yidhaahdo dakhliga Golayaasha degmadu, waxa uu ka kooban yahay**:** 1. Cashuuraha degmada (Revune district council), 2. Dakhliga ay degmooyinku soo saaraan ee ku xusan farqada 1aad ee Qodobkan, waxa uu ka kooban yahay. 3. Kabka ay dawlada dhexe siiso. 4. Deeqaha iyo mucaawinooyinka. 5. Deymaha ay qaataan.

Haddaba laba arrimoodba waxa la yidhaahdo (Intergovernmental system transifere) waa kabka oo 12% kabka ay dawlada dhexe soo saarto oo la kabo oo Guddidu soo jeedin inooga samaysay, midna waxa weeyaan 10%. Anigu cabdilahi ayaaban toos u weydiiyee degmooyinka kastamada leh, ama aan lahayn ee qaar wax meel looga soo qaado oo ay ka mid yihiin Gabiley, Berbera, Hargeisa, Ceerigaabo, Baki, Saylac iyo dhawr kaloo ku gudda jira 10% gaar ah oo ay iyagu qaataan oo ah dakhli maalmeedka soo gala kastamka, oo markaa ay ka qaataan 10%.

Talabaad waxaan odhan lahaa kabkana way ku jiraan, iyaga oo percentage qaataa cashuurahoodii kalena way qaataan. Markaa degmooyinkaasi waa saddex eef. Waxaan odhan lahaa degmooyinkaas waa in laga saaro kabka dhexe oo ay ku koobnaandaan koomiishankaas ay qaataan iyo cashuurtaa gaarka ah ee ay urursadaan.

**Waxaan leeyahay degmooyinkaas kor ku xusani waa inay ka baxaan kabka dhexe ee ay ka qaataan dawlada dhexe.**

Waxaan leeyahay wixii A ah waa inuu kabkoodi siman yahay, in kasta oo Hargeisa ay ka badan tahay kabkan la siinayo. Waxa muhiim ah in degmooyinka B isku mid tahay, Degmooyinka C isku mid tahay iyo D oo dhana isku mid noqotaa. Waxaan odhan lahaa kabkaas sidaan ha laga dhigo si caddaalada loo ilaaliyo, iyada oo aan laga tagayn duruufaha gaarka ah, waxaan leeyahay yaan Hargeisa Kabka laga jarin waayo intaas way ka baaxad weyn tahay.

Qodobka 88aad iyo qodobka 89aad, iyagana waan ka hadloo waan ka gudbay, Degmooyinka qaata Kabka Hargeisa 51%, Burco 41%, markaa anigaa sidaas ayaan soo jeediyey in kabka la simo, marka Hargeisa laga reebo.

**Qodobka 90aad soo** jeedinta Guddida iyo siday xukumadu ku keentay waxba kuma kala duwana oo waa isku mid waanan isku akhriyey waan isku mid.

**Qodobka 93aad** waa kala wareejinta Madaxda dhexdooda. Waxa la samayn karaa lixdii biloodba ama sanadka dhaammaankiisa waxaan ansixintiisa iska leh Golaha deegaanka ee degmada, ka dib markaay sidaas u soo gudbiyaan xubnaha Giuddida fulinta ee degmada, waxaana loo gudbinayaa Wasiirka Arrimaha Guddaha. Waxaan dhan-gal ay noqonaysaa marka Wasiirku Ansixiyo. **Waxaan qaatay soo jeedinta qodobka 93aad.**

Qodobka 94aad soo jeedimaha ay Guddidu soo jeedisay oo ah "A, D, E iyo F" waxay isku mid yihiin Qodobka 94aad ee ka xukumadu keentay. Waxaan odhan lahaa aynu caykeedaa kaga gudubno.

**Qodobka 96aad iyo Qodobka 97aad siday xukumadu soo jeedisay ayaan taageeray.**

**Qodobka 98aad,** Guddidu waxay yidhaahdeen waxaan samaynay 1, 2, 3, 4 afar qodob. Afarta qodob ee xukumadu soo samaysayna waa isku mid, iyada sidaas ayaan odhan lahaa ha lagu qaato.

**Qodobka 102aad oo Guddidu ka hadashay qodobkaas waxa lagu kordhiyey, laba farqadood oo cusub oo noqonaya 6aad iyo 7aad. Farqada 6aad** waxay u dhigmaysaa**"Dawlada hoose waxay heshiisyada iyo Qandaraasyada un galayaan si madax bannaan, isla markaan waafaqsan xeerka Qandaraasyada Qaranka". Farqada 7aad** waxay u dhigmaysaa **"Dawlada hoose waxay Guddida Qandaraasyada la kaashanayaa qabashada Qandaraasyada iyo habka la xidhiidha baahinta Qandaraasyada". Anigu waxaan idhi dawladaha hoose ma Guddidi Qanadaraasyo bay yeelanayaan.** Markaa haddii uu xeerku sheegayo waan ku raacay Guddida labadaas farqadood ee ay soo jeedisay.

Guddida Qanadaaryada heer Gobol, iyaga sidooda ayaan ku taageeray oo ka dambeeya Qodobka 101aad. **Qodobka 103aad** ee Guddidu soo jeedisay iyo Qodobka 103aad ee xukumadu waa isku mid.

**Qodobka 105 aad** Guddidu waxay yidhaadeen qodobkaas farqadii hore waxay ahayd sidaas **"Ansixinta iyo Ogolaanshaha naqshada degmada iyo wax ka bedelka" waxa** loo habeeyey**"soo gudbinta Guddida Qaran ee naqshada Guud iyo codsiyada ku saabsan dib u habaynta naqshada Magaalooyinka, degmada iyo bedelkeeda, waxa loo codsanayaa si qaafaqsan xeerka maamulka iyo dhulka"** waxaan raacsanahay sidaas Guddidu soo jeedisay, waayo xeerkaasbaa loo raacayaa.

Qodobka 106aad ee Guddidu soo jeedisay iyo Qodobka 106aad ee xukumadu waa isku mid. Qodobka 107aad ee Guddidu inoo keentay waxa weeyaan Awoodaha Golaha Wakiilada. Qodobka 107aad ee xukumadu inoo keentayna waxa weeyaan "baabiinta ama laalida"

Guddidu waxay awood u leedahay, markaa halkaa waa guddida haddii aydaan u jeedin Guddiyada Golaha Wakiilada. Waxay awood u leeyihiin, dabagalka iyo la socodka hawlada degmooyinka ay awood u leeyihiin, iyaga oo u yeedhi kara waxna ka waydiin kara hawlaha iyo waajibaadka ummadda u hayaan iyaga oo cuskanaya qodobka 4aad ee dastuurka. Qodobkaas waan la qaatay Guddida.

**Qodobka 108aad** ee xeerkan u dambeeya, waxa weeyaan waxa la sixi doonaa laba qodob ee midna Guddida yahay midna xukumada yahay waa qodob soo biiree isku saxa,

Qodobka laalista iyo baabiinta waxa aad u faahfaahsan kaa guddidu soo saartay, oo sheegaya inta xeer een shaqaynayn marka xeerkani soo baxo. Mudanayaal aad iyo aad ayaad u salaaman tihiin. Aslaamu Calaykum Warax Ma tulaahi Wa Barakaatu.

## Kal-fadhigii 39aad Fadhigiiii 20aad

**Salaasa, 16, April 2019**

**Quraanka: -** Md. Xaamud Cismaan Cigaal

**Gudoonka: -** Gudoomiye Baashe Maxamed Faarax

**Ajandaha Fadhiga:-** Doodda Xeerka Ismaamulka G. iyo degmooyinka Maalintii 2aad

**Md. Faarax Maxamuud Cabdille** **"26min 53sec"** **ASC,** marka hore mudane iyo Gudoomiyayaal, xeerkani waa xeer aad u muhiim ah wadanka, waxaan qabaa xeerkani sida uu inoogu yimi ama la inoogu dhiibay xildhibaanada Golaha waa hab qaldan oo aan ahayn habkii inooga iman jiray xukuumada Golaha loogu Qaybin jiray, sida aan maalintii horana halkan aan ka sheegay sababta oo ah hadii ay xukuumada xeer wax ka soo baddelayso ama madaxweynuhu soo badelayo ama soo jeedinayo in wax laga badelo waxaa uu halkan inoogu iman jiray, waxaanu lahaan jiray habraac ah in qodobka uu madaxweynuhu soo jeedinayo oo uu odhan jiray qodobkii noocaa u ahaa waa in sidaa loo badelaa iyada oo uu sababtana sheegayo.

Halkan waxaa la noogu keenay xeerkii oo xaraf halaga badello ama hala wada badello oo la isku soo guray oo aan kala cadeyn, sidaa awgeed waxaan qabaa in hadii aanu dhameyn ama aanu ahayn hab-raacii hore ee aynu wax u qori jirnay wax ka xun yihiin oo markii shirgudoon ahaan la idiin keenayna maydaan kala saarin.

sharcina sharci dhaqan gal ah oo yaala ayuu ahaa, sharcina soo jeedin ayuu ahaa markaa waxaay nagu kaliftay in aanu saddex buug is dhinac-sidno oo kala ahaa mid xukuumadu wax ka soo beddashay, mid gudidu wax ka soo badeshay iyo mid hore oo dhaqan gal ahaa.

Markaa waxaa ka shirgudoon ahaan idiin taala hawl culus oo ah wixii ay xidhibaanadu soo jeedinayeen iyo saddexdaa buug ee is dhinac socda taasi waa midaan idiin soo jeedinayo.

Anigu markaa waxaan is dul-taagay qodobo aan meelo badan ka keenay, waxaan taageersanahay qodobada xeerkan ee ay gudidu ku soo dareen ee ka hadlaya magaca xeerka ujeedada xeerka, mabaadiida xeerka, adeegsiga xeerka oo ay sidaa xukuumadu soo jeedisay waan ku waafaqsanahay.

Guddidu waxa soo Jeedisay **Qodobka 107aad** oo ka hadlaya awooda Guddiyada baarlamaanka kaana waan ku waafaqsanahay oo waa Dastuuri xeerka inta ay soo kordhiyeen ee qodobo waaweyn ahi waa intaa.

**Qodobada aan is dul-taagay waxaa ka mid ah Qodobka 9aad** oo waxaan ku daray **F/4aad** oo odhanaysa in liiska lagu daro goboladii ay madaxweynayaashii magacaabeen oo la yidhaa **Gobolka Daadmadheedh, Gobolka Buuhoodle, Gobolka Xaysimo, Gobolka Saraar, Gobolka Badhan, Gobolka Salal, Gobolka bali-gubadle, ama Hawd** oo gobolada caynkaas ah waa in lagu daraa dhamaantood.

Xukuumadu waxay inoo soo gudbisay in degmooyinka "**D"** aan la qiimayn oo ay madaxweynayaashu magacaabeen oo ay liiska ku jiraan, markaa wax u diidaya in goboladana lagu soo qoro liiska waxaan soo jeedinyaa in lagu kordhiyo qiimaynta iyo ansixintoodu ha danbaysee.

**Qodobka 10aad F/2aad waxaan ku raacsanahay sida ay Guddidu soo jeedisay ayaan ku raacsanahay** liiska Gobolada '**D'** waan ku waafaqsanahay in dhamaantoodba lagu daro liiska.

**Qodobka 22aad ee ka hadlaya tirada xildhibaanada Golaha deegaanka: -** oo ay xukuumada iyo Guddiduba ay dhimeen anigu waxaan qabaa in sidoodii hore loo daayo *(2-mudane ayaa taageeray)* halkaa waanigii markii hore ka hadlayay oo xukuumadu ma sababayn sababta loo dhimayo manay cadeyn, guddida lafteeda sababayntooda kuma qancin sidaa awgeed waxaan soo jeedinayaa in sidoodii hore loo daayo.

**Qodobka kale ee ka hadlaya Darajooyinka: -** waxay xukuumadu soo jeedisay in 3sano lagu soo qiimeeyo Darajooyinka iyo xuduudaha iyo waxooda oo dhan, halka ay guddidu soo jeedisay in lagu qiimeeyo 2sano oo ay wasaaradda iyo xukuumadu ku soo kala xadeeyaan 2sano **waxaan taageersanahay ta guddida waanan kaga soo horjeeda ta xukuumada.**

waxaa kale oo aan qabaa in umadan loo cadaalad sameeyo oo kitaab ayaynu gacanta u saarnay, markaa 6-dii Gobol ee ingiriisku waa in ay isku darajo ahaadaan waa sax waayo distoorka ayaaba isku darajo ka dhigay, waxaa kale oo aan qabaa in intii ka sokaysay ee ay madaxweynayaashii kale magacaabeen intii Somaliland jirtay ee gobolada laga dhigay magaalo madax-yadoodu waa in ay isku darajo ahaadaan oo ay noqdaan "**B" inta la qiimaynayo.** waxaa kale oo aan qabaa in aan la odhan "A+" ee waa in wixii A ahaa A-noqdaan Wixii B ahaana B-noqdaan.

**Qodobka 28aad ee xeerkii horana ka ahaa 24aad ee ka hadlaya dhawrsanaanta Xubinta Golaha deegaanka** waxaan u daynayaa sidii hore ee ay ahaayeen oo xasaanad ka qadi maayo, sidoo kale waxaan ka saaray F/5aad.

**Sixitaan Siciid Cartan: -** Xukuumadu Ma keenin in xasaanada laga qaadee waxay ka dhalatay doodii mudanayaasha ee mooshinkii la keenay.

Ta kale ee ka hadlaysa Duqa iyo ku xigeenka ayaad gaar uga saarteen anigu ma garanayo meesha ay ka keenayaane waa in xildhibaanadu xasaanadooda yeeshaan dhamaantood.

**Qodobka 33aad f/3aad ee ay ku dareen: -** Qodobkaa waan ku raacsanahay Guddida oo waxa golahani soo jeediyo guurtiduna ku raacdo madaxweynuhuna uu ansixiyo waa sharci oo hadii mudadoodii dhamaato madaxweynuhuna uu soo jeediyo waa sharci in loo kordhiyaa, xilkan hada ka dhamaaday waxaa u kordhiyay guurtida oo waxay ahayd in aan sharciga ilaalino, waxaanay ahayd in doorashadooda la qabto ama wadadii markii hore loo raacay loo raaco ayay ahayd, waxaanan qabaa in ay xilgudasho la'aan tahay sidaasi.

**Qodobka 34aad** waxaan ka saarayaa erayga ah "**Hadii La waayo"** sharciga meelna kagama jirtee waa in laga saaraa.

**Qodobka 49aad waxaan ku taageersanahay sida ay xukuumadu inoogu soo gudbisay** waayo wasiirka arrimaha Gudaha ayaa magacaabaya isaga ayaana xilka ka qaadayo xilka intaa in lagu soo koobo ayaan soo jeedinayaa.

**Qodobka 70aad oo ka hadlaya Xilka Qaadista Duqa iyo ku xigeenkiisa** oo ahaa kii mooshinka lagu keenay ee uu xildhibaan siciid sheegayay, waxaan leeyahay waa in 1/3 ay soo jeediyaan xilka qaadistiisa, xilkana laga qaado kala badh iyo hal tirada golaha ***(6 mudane ayaa taageeray)***

**Qodobka 98aad** xukuumadu wax ayay ka beddeshay guddiduna wax ayay ka bedeshay waxaanan ku raacsanahay ta guddida waxaana qabaa in sida soo socota laga dhigo in kabka 12.5% la siiyo Dawladaha hoose oo sida guddidu soo jeedisay loo qaybiyo laba arrimood ayaan ka badelayaa oo kala ah oo marka hore kastamadu waxay qaataan 10%, taa ay qabanayaana umada ayay ka dhaxaysaaye waa in si siman umada loogu qaybiyo hadii aan cadaalad doonayno.

Waxanan u qeybin lahaa sidan:-

**A----------------------------- 4%**

**B-------------------------------2.5**

**C------------------------------1.5%**

**D-------------------------------0.5%** ***(4 mudane waxaa taageeray)***

4.5 ayaa halkaa hadashay sida ay qoladii hore soo jeediyeen waxay u reebeen Wasaarada Arrimaha Gudaha,

Ugu danbeyn waxaan soo jeedinayaa qodobada helay taageerada waa in xeerka lagu soo daro wasalaamu calaykum waraxmatulaahi wa barakaatuhu.

**Gudoomiye Baashe: -** waxaan xildhibaanada u sheegayaa in ay dooda ku taageeraan si loo ogaado inta xildhibaan ee taageertay.

**Md. Maxamuud Dhunkaal Guutaale** **"30min 12sec"** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, Anigu xeerkani sidaa raga hore sheegeen waxa uu ka kooban yahay afar qaybood oo kala ah Mooshinkii, xeerkii hore, xeerkii xukuumadu wax ka soo beddeshay iyo kan guddidu wax ka soo bedeshay intaa oo dhan ayaa isugu yimi xeerkan wax-ka-baddelidiisa, markaa anig qayb ayaan tuuray oo aanan waxba ka soo qaadin taas oo ah soo jeedinta Guddida waxaanan soo qaatay xeerkii xukuumada iyo xeerkii hore waayo waa labada rasmiga ah.

**Qodobka 9aad ee ah xeerka ay xukuumadu inoo soo gudbisay** oo sheegay in Jamhuuriyada Somaliland ay ka koobantahay 14-gobol oo ay 6 kamid ahi ansax yihiin Gobolka Maroodijeex. Gobolka Togdheer, Gobolka Sanaag, Gobolka Awdal, Gobolka Sool iyo Gobolka Saaxil. Sideeda aan la ansixina waa Gabiley, Salel, Hawd, Daad-madheedh, Buuhoodle, Saraar, Xaysimo iyo Badhan, markaa ama ha ansax-sanaadeen ama yaanay ansax-sanaane waa in dhamaantood ku cadyihiin halkan maadaama oo xeerkan loogu yeedho xeerka Ismaamulka Gobolada iyo Degmooyinka,

Sidoo kale waxaa halka ku qoran Degmooyinka Somaliland ee Ansaxsani waa 23-degmo iyo 77-degmo oo aan ansax sanyn 100-kaa Degmaba halkan ayay ku qoran yihiin, iyada oo sideeda Gobol ee aan la ansixin ay sugayaan qiimeynta xeerkan ku cad ee xukuumada laga sugaayo in ay soo sameyso ee aynu mudadana u qabanay oo xeerkana loogu soo daray in ay mudo 3sano ah ku soo qiimayso oo marka la dhameeyo qaarna gobol ay noqonayaan qaarna ay noqonayaan degmooyinkoodii hore, ***markaa waxaan soo jeedinayaa in ay dhamaan ku cadaadaan Goboladii iyo Degmooyinkii la ansixiyay iyo kuwa aan la ansixinba xeerkan.*** Waayo waxkhtigii ina cigaal wey ku jireen dhamaan wixii ka danbeeyay waa laga saaray u jeedaduna waa qalad ayaan u arkaa. (***1 mudane ayaa ku taageeray).***

Maadaama oo digreeto madaxweyne lagu magacaabay oo uu maamulkii maanta ka wada shaqeynayo oo ay badhasaabo leeyihiin oo badhasaabka Xaysimo iyo ka Hargeisaad maanta isku makaan yihiin oo aanay waxay ku kala duwan yihiin aanu jirin oo mid waliba calanka Somaliland gaadhigiisa uu ku xidhan yahay waxaanan soo jeedinayaa in sidooda loo daayo.

Waxa kale oo aan doodayda ku darsanayaa kor u qaadida iyo dhimista darajooyinka gobolada iyo degmooyinka waxaa iska leh Xukuumada, waxaanan doonayaa in aan kaga faa'iideeyo doodan maanta safarkii ugu danbeeyay ee madaxweynaha markii uu marayay Degmada Caynaba "B" iyada oo markii hore ahayd "C" waanan ugu mahad naqayaa madaxweynaha laakiin waan in uu soo gudbiyaa golayaasha qaranka si ay u ansixiyaan.

Degmooyinku Darajooyin ayay kala leeyihiin darajooyinkaa oo 4-ah waxaana hada ku soo korodhay darajo 5aad oo la yidhaa **"A+"** wax sharciga inoogu qoran oo la yidhaa **A+-na** ma jirto, waayo Degmooyinka waa weyn dhamaantood waxaa ugu qoran in ay yihiin "**A"** oo ka siman yihiin Demooyinku.

**Qodobka 22aad** ee Tirada Xildhibaanada Golaha Deegaanka lagu yareynaayo waxaan leeyahay ***soo jeedintii xukuumada aynu u dayno*** ayaan soo jeedinayaa.

**Qodobka 24aad Dhawrsanaanta Xubnaha Golaha Deegaanka;** *qodobkaana waxaan ku taageersanahay sidii ay xukuumadu u soo gudbisay* xasaanada qaar waa mid Dastuuri ah ayna ka mid tahay xasaanada Baarlamaanka, Xasaanada Xukuumada iyo Garsoorka, waxaa kale oo jira Hay'ado aynu xeer ugu sameynay Xasaamad, waxaa kale oo jira Komishano, Hay'ado aynu ugu qornay xasaanad.

Golaha deegaankana waxaan qabaa in ay ka mid yihiin kuwa aynu xasaanada siinay oo barigii dhaweyd ee doorashadii Golayaasha Deegaanka in markii loo ogolaaday in uu tartamo la yidhi lama baadhi karo waayo waxay leeyihiin Xasaanad oo xeerka loogu qoray, sidaa darteed maanta isaga oo xildhibaan ah oo maanta rag halkan fadhiya uu ka cod badan yahay la yidhaa xasaanad ma laha waa wax aan garanayo maaha.

Xasaanada xildhibaanada Golaha Deegaanka anigu waan xadidayaa oo waxaan leeyahay shaqadoodu iyo awoodoodu waxay ku eegtahay Degmadaa laga soo doortay mana aha gole qaran mana aha gole Gobol ee waa gole degaan Markaa ***xasaanadooda waxaan ku ekaynayaa deegaankaa laga soo doortay.***

Waxa kale oo jira gole Gobol oo aan wali la dooran, laakiin magacaabid ayay ku joogaan, tusaale ayaan idin siinayaa badhasaabka gobolku marka uu ka baxo xuduudii gobolkii uu ka ahaa badhasaabka waa la laabaa calanka gaadhigiisa ku xidhan waayo awoodiisa iyo xilkiisu waxaa uu ku eegyahay gobalkaa uu badhasaabka ka yahay.

Sidaa awgeed waxaan leeyahay Golaha Deegaanku ha yeeshaan xasaanad xasaana-dooduna ha ku ekaato degmadaa laga soo doortay maadaama oo hadii ay danbi galaan, danbigaa laga soo eegayo degmadii laga soo doortay taasna sidaa ayaan soo jeedinayaa.

**Qodobka 33aad ee ah kala dirida Golayaasha Deegaanka;** Dastuurka iyo xeerkanba waxaa ugu taala waa la kala diri karaa inta aanu mudo xileed koodu dhamaan sida ku cad **qodobka 11aad ee dastuurka faqadiisa 8aad,** waxaa kale oo lagu kala diri karaa marka ay timaado xaaladaha xeerkan Faqradihiisa A,B,C, iyo D ee xeerka ay xukuumadu inoo soo gudbisay.

Sida uu dastuurku dhigayo marka la kala diro Golaha Deegaanka waxaa xilka sii haynaya Xog-haya Dawlada Hoose, xog-haya Gobolka iyo xubnaha kale laamaha dawlada dhexe ***sida ay xukuumadu halka ku soo qortayna ee ay yidhaahdeen hadii la waayo, lama waayi karo waayo degmo aan lahayn xog-haye fulineedba ma jiro markaa waxaans oo jeedinayaa in laga saaro kalmadaa. Waxaa kale oo aan halkaa ku daray hadii la kala diro golaha deegaanka waa in ay xukuumadu qabataa doorashada golahaa la kala diray kuna qabataa mudo 6(lix bilood) gudohood ah. Waxaan xilka sii haynaya xog-haya fulinta dawladda hoose.***

***sidoo kale hadii eedaas uu ku qanci waayo wasiirka arrimaha guduhu waxaa sii haynaya xilkaa golihii hore ee deegaanka, waxaa kale oo aan ku sii daray hadii ay***

***doorashadiisu qabsoomi weydo mudadoodiina dhamaato waxaa xilka sii haynaya xog-haya fulinta dawlada hoose ilaa inta laga soo dooranayo gole cusub oo beddela.***

Waxaanan leeyahay waxaa loo kordhinayaa muddo lagu soo doorto gole baddela golahan waxaana muddo kordhintaa sameynaya Golaha Guurtida.

**Qodobka 49aad Magacaabida Iyo Xil Ka Qaadista Xoghayaha Fulinta** xog-haya fulintu waa sarkaal ka tirsan wasaarada arrimaha gudaha oo xil ka qaadistiisa iyo magacaabidiisaba iska leh, waxaana xeerka ku taala waxaa soo eedaynaya golaha deegaanka ee dagmadaa uu ka tirsan yahay, waana ninka uga masuulka ah dawladii dhexe oo dhan nimankana waa gole deegaan waana la si qaban karaa laba awoodood ayaana meesha taala, markaa halkaa waxaan ***soo jeedinayaa in aanay soo eedayn waxaanan leeyahay sida uu badhsaabkuba uu warbixinta uga soo diro gobolka xog-haya fulintuna waa in ii la mid noqda, waxaanan soo jeedinayaa in xog-haya fulinta ee dawladda hoose, ka gobolka iyo badhasaabkuba waa in shaqaale rasmi ah ka noqdaan wasaarada arrimaha Gudaha oo aanay noqon qof suuqa laga keenay.***

**Qodobka 70aad Xilka qaadista Duqa iyo ku xigeenkiisa;** waxaana xilka ka qaadi kara cidii doorатay oo kaliya waayo iyaga ayaa xilkan u dhiibtay, sidaa awgeed xilka qaadista maayarka iyo ku xigeenkiisa waxaa is leh golaha deegaanka ee doortay, waxaa kale ee xilka laga qaadi karaa eedaha kuyaala xeerkan marka uu galo tirada laga qaadayaana waa tirada golahaa deegaanka oo kala badh iyo hal ah ***( 4 mudane ayaa taageeray) waayo gole yaasha qaranka oo dhan ayaa sidaa ah markaa ma garanayo sabab loo yidhaa 2/3 meesha ma taalo.***

Waxaan leeyahay yaynaan rag is haya golaha sharci kaga dhigin, waana in ay golayaashu isku mid noqdaan

**Qodobka 89aad** ee ka hadlaya 10% lacagtaa dulmi badan ayaa ku jira oo uu sababteeda leeyahay xeerka midaynta cashuuruhu, waxaanan leeyahay waa in xeerkaa la soo celiyaa oo golahan la keenaa sidani xaq maahee oo nin aan waxba soo saarin oo kastam fadhiyaa uu hadana ina yidhaa aniga ayaa qaadanaya kabkii, markaa nin walba wixiisu ha badnaadeen ama ha u yaraadeene waa in xeerkaa la soo celiyaa ***(7 mudane ayaa taageeray).***

Qodobka labaad ee ii raacaa waxa uu yahay lacagta 10% ah iyo lacagta kabka ah waa in aanay isku qaadan degmooyinka qaataa ee waa in mid ahaan qaataan ***(5 mudane ayaa taageeray)***

waxaa kale oo aan ku darayaa cashuuraha gaar ahaaneed ee ay dawladda hoose qaado waxaa ka mid ah liisamada iyo cashuuro ay gaar ah oo u dheer kuwan kale, Gaba- gabadii waxaan leeyahay shirgudoon Doodaha Xildhibaanada ee Golaha sidii hore u dhacday doodihii 34aad iyo 35aad oo aan doodihii xildhibaanada aan wax alle wax laga soo qaatay aanay jirin oo la yidhi waxaad u codaysaan soo jeedintii Guddida iyo soo jeedintii xukuumada, waxaan leeyahay waa in la tixgaliyaa dooda mudanayaasha waayo guddidu waxay ka mid tahay xildhibaanada soo jeedin ayay leedahay waxay dheer

yihiina ma jirto oo hadii lagu raaco ayuun baa la raaci karaa hadii aan la raacin mudnaan kama laha xildhibaanada ***(5 mudane ayaa taageeray).***

**Md: Baar Siciid Faarax: - "17min 18sec" Bismilaahi** Raxmaani Raxiim, waxaan salaamayaa Golaha, Saxaafada iyo Martidaba SCW.

Waxaan soo qaadanayaa Xeerkan Saddex Qodob kolay aad baa looga hadlay Saddexdan Qodob, Qodobka u horeeyaa waxa weeye **Qodobka 28AAD** ee ku saabsan Xasaanada Golaha Deegaanka waxaa loo doortaa sida loo doorto Golaha Wakiilada iyo Madaxweynaha waa gole sharciya oo magacoodii ayaaba Gole ah, Qodobkan odhanaya xasaanad malaha tirada golaha degaanku marka laga reebo Duqa iyo Ku-Xgeenkiisa hadana is burinayoo leh hebel baa xilka ka qaadaya hadii denbi lagu helo qodobkaas waxaan u malaynayaa mooyi sidii uu arrinkaasi u yimide wax suurta gelaya maaha.

Sabab Nin la doortay xasaanad uu u waayo ama dadka shacabka ah uu uga duwanaan waayo waa arrin aan la fahmayn anigu waxaan leeyahay waa farsamo xumo waa in xasaanadii loo daayaa xubnaha golaha degaanka nin aan xasaanad lahayn iyo nin xasaanad leh xil iskama qaadi karaan.

Ma Nin aan xasaanad lahayn baa Nin xasaanad leh odhan kara denbi baad gashay soo xidhi maayo siday u suurto gashaa, markaas qodobkaas waa lagu gafay tootali meesha halaga saaro ayaan soo jeedinayaa. ***(1mudane ayaa ku taageeray)***

Qodobka kale ee aan isna soo qaadanayo waxa weeye Qodobka Darajooyinka Derajooyinka Degmooyinka waxaa jira degmooyinka "C" ah Ingiriiskiina Degmo ahaa Laasqoray baa kamid ah, Gar-adagbaa kamid ah maantana waxay la derajo yihiin tuulo shalay la magacaabay oo afar cariish ku yaalaan Miyaan wax laga xishoodo waxaasi ahayn.

Afar cariish tuulo ay ku yaaliin iyo kuwo aanayba ku oolin ma doonayo inaan magacaabo laakiin kuwo maalin dhawayd la magaacabay oo afar cariish ah xitaa hal cariish aanay ku oolin bay la darajo yihiin maanta Ingiriiskiina waxay ahaayeen degmooyin jira.

**Soo Jeedin:-** waa in arrinkaas dib loo eego oo Goluhu Dib uga fiirsado intaan la ansixin xeerkan dalkana waxay ku tahay Irhaamo ama meel ka dhac in meel cariish ku yaalo iyo ama degmo 50,60 ama 70 sanadood jirtay inay isku derajo ahaadaan ama isku dhaqaale ahaadaan waa arrin aad iyo aad looga naxo.

Tirade Golaha Degaanka ama Derajooyinka Degmada anigu wixii A" A baan ka dhigayaa Wixii B" ahna B baan ka dhigayaa wixii C' C baan ka dhigayaa wixii D" D baan ka dhigayaa isku tirona waanka dhigayaa isku Derajona waanka dhigayaa.

Balaas waanka saaray meesha sababtoo ah Waqooyi Galbeed ama M/Jeex waxay la mid tahay Degmooyin A' ah degmo ahaan ayay lamid tahay markaa A" baan ka dhigayaa.

Soo Jeedin: - waxaan soo jeedinayaa degmooyinka A"da ah dhamaantood in golahooda degaanka laga dhigo 15 Xubnood oo la is wada leekay siiyo Degmooyinka "B"da ahna in

dhamaantood iyagana la siiyo 13 Xubnood Degmooyinka C" da ahna la siiyo 9 Xubnood Degmooyinka D"da ahna 7 Xubnood la siiyo.

Waxaan dib ugu noqonayaa Qodobka derajooyinka waxaa ku qoran waxaa lagu qeybiyay dhulka Fog ah laba degmo ama saddex degmo ama afar degmo ama shan degmo oo 10km isku jira iyo degmo leh 300km dhulkeedu yahay oo weliba xad ku taala sababta ay tan 10km isku jirtaa ay uga darajo weynaato garan maayo, anigu waxaan leeyahay xeerkan gudi kale halagu celiyo waayo xeerkan lagama fiirsan mida labaad dadkan Guddida ku jiraa horta dhulka mawada yaqaan?.

Qaar baan haleeya arag yaa qiimeeyay waxan xukuumadi ma qiimeyn dadku kala garan maayaan dhulka hadii aniga laygu yidhaahdo boorame soo qiimee miyaan garanayaa maya ma garanayo miyaan qiyaasaa waa in dadku kala yaqaan dhulka.

Anaa Guddida qaba kharashkeeda waana Casuumayaa anaa kaxaynaya kharashkeedana anaa qabee aan soo tuso gobolada bari iyo degmooyinkeeda markaasaan xeerkan hagaajinaynaa wixii kharash ahna anaa qaba.

Waanka baxay ASC.

**Md. Xuseen Axmed Caydiid "24min 19sec"**Bismiliaahi, Gudoomiye iyo Mudanayaasha marka hore waan idin salaamayaa, waxaan ku horeynayaa **Qodobka 1aad**ee Xeerka wax ka badelka ay Xukuumadu soo jeedisay, sida hortay loo sheegay waa xeer dhan oo la soo dhameystiray oo aanay kala muuqan Qodobkay soo badeshay iyo qodobadii hore siday u qornaayeen oo aan kala cadayn ahna Xeer dhan, Magaca Xeerka Waxaa ku qoran oo loo badelay Xeerka Wax ka badelka iyo Kaabista Ismamulka Gobolada iyo Degmooyinka, magacii hore ee Ismaamulka Gobolka iyo Degmooyinka waa laga guuray oo magacaa cusub baa ku qoran, waxaan qabaa marka Kaabis iyo Wax ka badel la soo jeediyo Xeerkii Guud magacisii ma badasho, kaabista iyo wax ka badelkaasina Xeerkii bay gashaa oo sida loo soo dhigo iyo sida loo ansixiyo, Marka waxaan leeyahay halka magacii hore ee Xeerka Ismaamulka Gobolada iyo Degmooyinka oo hadii la doono wax ka badelka iyo kaabista ha la raaciyo markaa.

**Qodobka 6aad** ee Qaab-dhismeed Dalka **Farqadiisa 3aad** Gobolkii hore loo odhan jiray Waqooyi Galbeed wuxu isu-badelayaa Gobolka Maroodi-jeex, waxa barakit la galiyay marood-jeex, marka lama galiyo waxaa barakit la galiyaa waxa la faah-faahinayo ee hadii la doono laga tagi karo oo hadiiba laga tago aanay waxba u badelin macnihii, iminka hadii kalmada laga saaro wuu isbadelayaa macnihii, **marka barakitkaas ha laga saaro.**

**Qodobka 9aad Farqadiisa 2aad** oo u qoran "Gobolkiiba waxa uu u qaybsamaa Degmooyin darajadoodu kala yihiin **A, B, C iyo D,** markaynu sidaas u qorno waxaynu waajibnaynaa in Gobolkasta yeesho afartaas derajo, Gobolka Togdheer ma laha Degmo C ah, Gobolka Sool ma laha Degmo B ah, Gobolka Saaxil ma laha Degmo B ah, hadana waxaynu waajibinay in afartaas derajo Gobol walba yeesho, waxay ahayd in loo dhigo oo ay tahay **"Gobolkiiba wuxuu u qaybsami karaa darajooyin kala ah A iyo B, C ama D"** waa

optional oo Degmada A saddexda xigaya tii la waayo ee laga dalacaa xeerka waxba u dhimi mayso waa in sidaas laga dhiga farqadaas.

**Qodobka 12aad**ee Qiimeyn iyo Darejo ka badelid degmo farqada 2aad ee Gudiddu wax ka badeshay waxa lagu qoray Farqada 5aad marka halkaana inay farqada 2aad tahay ha laga dhigo.

**Qodobka 16aad**Qodobkani waa inuu waajibo inuu Gole Gobol ku yimaado doorasho sida uu waajibnayo Dastuurku**, Farqada 3aad Xaraf (E)** Madaxa Laamaha, eraygaa laamaha waa in lagu badalaa **"Waaxaha"**markay Gobol tahay sida Waaxaha Wasaaradaha, markay heer degmo tahayna waa laamaha.

**Qodobka 22aadee Golayaasha Deegaanka** halka Xubnihii Golayaasha Deegaanka ee Mudayaashu hore uga hadleen anigu waxaan soo jeedinayaa hadii la yidhi ee A+ ma jirin waxaa jirtay in Hargeysa ka Xubno badnayd Degmooyinka A ah oo 25 bay ahayd, marka waxaan soo jeedinaya in halka ***25 Xubnood ee Hargeysa 21 Xubnood laga dhigo, degmadii 21 xubnood lahaydna in 15 xubnood laga dhigo, tii 17 xubnood lahaydna in 11 xubnood laga dhigo, tii 13 xubnood lahaydna in 9 xubnood laga dhigo, tan u hoosaysa ee D ah in 7 xubnood laga dhigo.***Halkaasna sida xukuumadu u soo sameysay baan inta dambe ku raacsanahay, labada hore ee 25 iyo 21 in 21 iyo 15 laga dhigo ayaan soo jeedinayaan.

Mudanayaal 18 sanadood baa laga jooga markii dastuurka aftida loo qaaday, ilaa maalintaasna waxa ina sugayay Golayaal Gobol inay abuurmaan, mudadaas Gole Gobol baa inoo sameysnaa laakin waxa laga gaabiyay in Gole Gobol la doorto, Xeer baana tilmaamaya in labadooduba doorasho ku yimaadaan, **Qodobka 11aad**ee Dastuurka **Farqadiisa 1aad** waxay leedahay Gobolada iyo Degmooyinku waxay yeelanayaan Golayaal sharc-dejineed oo ka kooban Xeer-hoosaadyo (bylaws) aan ka hor imanayn Xeerarka Dalka, **farqadiisa 2aad** waxay leedahay tirada Gole kasta ee Gobol ama Degmo shuruudaha lagu dooranayo iyo nidaamka doorashada Xeer ayaa tilmaamaya, markaa anigu waxaan qabaa Xeerkan ina horyaala inuu yahay Xeerarka ay tahay inay tilmaamaan Golayaashaa Gobolada ee meesha ka maqan.

Xukuumadu **Qodobka 28aad** waxay u dhigtay inta laga soo dooranayo Golayaal Gobol ayay ka bilawday, dedaalkii ahaa in Gole Gobol la doorto ee qaabka loo dooranayo la sheego oo tiradiisa la sheego waa laga gaabiyay oo meesha wuu ka maqan yahay, waxaan leeyahay marka inta la qoro oo ay qabsoomi waydo ayaa la odhanayaa inta laga soo dooranaye waa inaynu dedaalkii la nimaadno marka hore oo tirada Gole gobol lagu cadeeyo Xeerkii, sidaa darteed, waxaan soo jeedinayaa in la galiyo Gole Gobol oo laga dhigo sidan***"Gobolka Maroodi-jeex 15 xubnood Gobolada kale ee A ahna la siiyo min 11 xubnood, Goboladii la soo kordhiyayna min 9 xubnood laga dhigo"*** oo Xeerka aynu sidaas u dhigno.

Doorashada Golayaal Goboladuna noqdo qaabka Doorashada Golaha Wakiilada oo loo codsado, waayo Golaha Wakiiladu wuxuu ahaan jiray heer Gobol, Gole Gobolna wuxuu noqonayaa heer Gobol, marka Xeerkaas Golaha Wakiilada ayaa applicable ku noqonaya in Golaayasha Gobolada lagu soo doorto, oo shardi ahaan halkii Golaha Wakiilada loo qabto Gole Gobol, halkii xubin Gole Wakiilna loo qaato xubin Gole Gobol.

**Qodobka 32aad Farqadiisa 1aad** oo ah sidan*"Mudanuhu wuxuu iska casili karaa xilka isagoo istiqaalad sababaysan u gudbinaya duqa degmada waxaana ansixinaya duqa degmada ka dib markuu ogolaanasho ka helo Golaha deegaan"*anigu halka waxaan soo jeedinayaa inuu Goluhu ansixiyo ee aanu duqa degmadu ansixin istiqaaladaas ee Golihii ay ka tirsanayd aqbalo iyadoo noqonaysa "**Mudanuhu wuxuu iska casili karaa xilka xubinimada Golaha Deegaanka isagoo warqada istiqaalad qoraal ah oo sababaysan u gudbinaya si goluhu uga ogolaado istiqaalada kala badh iyo hal tirada xubnaha"** marka sidaas in loo badelo ayaan soo jeedinayaa.

**Qodobka 33aad**ee kala dirida Golaha **Qodobka 111aad** ee Dastuurka **farqadiisa 4aad** Xarafka (B) ayaa waxay u qoran tahay iyadoon ka hadlay Gole Gobol iyo degmo labadiiba sidaan hore u sheegayna xeerkan Golihii Gobolku wuu ka maqan yahay waxaana fiican in ahmiyad la siiyo Xeerkan oo sida kan degmada ahmiyad loo siiyay kala dirida Golayaasha waxay farqadaas dastuurku leedahay *"Gole gobol ama degmo waa la kala diri karaa isagoon muddadiisa dhammaysan"* Xaalada ay ku iman karto ama qaabka loo kala diri karo Xeer ayaa tilmaamaya, **sidaa darteed waxaan soo jeedinayaa in Qodobkaas lagu daro farqad cusub oo odhanaysa "waxaa loo aqoonsanayaa in Gole gobol ama degmo kala dirmay marka wakhtigiisii dhamaado iyadoon la soo dooran golihii badali lahaa"** sida xaaladan aynu iminka ku suganahay ee aan gole cusub-na la soo dooran golihii horena mudadiisii dhamaatay waxaan qabaa inuu sharciyan kala dirmo golayaashani oo dee muda xileedkiisii baa dhamaaday, mar hadii mandateskii dhamaaday oo aan loo kordhin golihii badeli lahaana aan la dooran sharciyan wuu kala dirmay Golayaashaasi.

Wax ka badelka iyo kaabista Xukuumadu ay soo jeedisay **Qodobka 34aad**waxay ku tilmaantay mudadda kala guurka *"mudadda kala guurka ee u dhaxaysa taariikhda golihii hore la kala diray ilaa* inta laga soo dooranayo gole cusub waxaa xilka sii haynaya xoghayihii fulinta ee Degmada" taasi waa qodob dastuuriya oo **Qodobka 111aad**ee dastuurka **farqadiisa 9aad** ayaa tilmaamaysa marka wakhtigii dhamaado inay xilka sii haynayo xoghayaha fulinta ee heer gobol haduu gobol yahay, ama heer degmo haday degmo tahay iyo madaxda laamaha ama waaaxyaha inta laga soo dooranayo gole cusub, hadaba marka qodobkaas dastuuriga ahi meesha yaalo **waxaa farqada gudiddu soo kordhisay ee odhanaysa *"Haddii doorashada Golaha Deegaanadu ku qabsoomi weydo xiligeedii, Golaha hore ayaa xilka sii haynaya inta laga soo dooranayo Gole cusub"***waxayna ka hor imanaysa farqada 9aad ee Qodobka 111aad ee Dastuurka. Marka golaha waxaan ku

baraarujinayaa inaynu Dastuurka ixtiraamno oo waafajino Qodobadan aynu Xeerka ku qorayno dastuurka sida farqadaas ah yaa xilka sii haynaya markay doorashadu dhici weydo golihiina mudaddii ka dhamaato.

**Qodobka 44aad** eeXeerka ay xukuumadu soo gudbisay ee awooodda Gudoomiyaha ama duqa magaalada waxaa runtii la siiyay awooddo badan oo xoghayaha fulinta ama gudidda fulinta ee uu ka midka yahay yeelan lahaayeen ama gudi hoosaadyadu yeelan lahaayeen ayaa isaga (duqa) lagu siiyay qodobkaas, tusaale ahaan **farqada 2aad xubinta (c) wuxuu maamulayaa shaqaalaha dawlada hoose isla markaana ku dabagalayaa hawl-gudashadoodda,** waa shaqadii Xoghayaha fulinta inuu shaqaalaha ku dabagalo oo shaqadoodda ilaaliyo oo ku kormeero waxa leh xoghayaha fulinta ee maaha duqa shaqadiisii.

**Xubinta (S) wuxuu fuliyaa go'aamada Golaha deegaanka,** dee go'aamadaas Golaha deegaanka waxa fuliya xoghayaha degmada, taasina waa farqad kale oo xoghayaha fulintu leeyahay, (Q**) wuxuu diyaariyaa qorshaha horumarineed ee degmada,** qorshaha horumarineed ee degmada kaligii diyaarin maayo duqu gudidda fulintay ku soo diyaarinayaan dabadeedhana golaha ku keenayaan, halkaa shaqadii Gudidda fulinta ayaa la siiyay **(r) wuxuu soo jeediyaa miisaaniyada dawladda hoose**, Iyana kaligii ayaa la siiyay kaligiina soo jeedin maayee gudidda fulinta ayaa soo hor dhigaysa golaha. Wuxuu **soo jeediyaa isla markaana Golaha horkeenaa qorshayaasha iyo xeer-hoosaadyada,** halkaana kaligii ma lahee Gudidda fulintaa la leh, marka waxaan jeedinayaa in Qodobkaas 44aad dib loogu noqdo oo waxyaabaha awoodda duqa degmada ka baxsan laga saaro oo la siiyo cidii awooddaas lahayd.

**Qodobka 24aad** Xasaanada runtii qodobkaas mudanayaashii hore ayaan la qabaa maadaama goluhu yahay gole la soo doortay oo karaamadii umada huwan sidaa daraadeed xasaanada gole ahaan u wada yeeshaan ee aan qaarna la siin qaarna loo diidin.

**Qodobka 70aad** ee Xil ka qaadista Duqa iyo ku xigeenkiisa waxaan isna ku raacsanahay sida la soo jeediyay oo **kala badh iyo hal** oo simple majority-na laga badiyo two third aan waligii la gaadhayna laga yareeyo oo ay noqoto **absolute majority,** markaynu duqii saddex meeloodow laba meelood la siiyay xil ka qaadistiisii xasaanadiina kaligii la siiyay isla markaana xubnihii kale laga qaaday dee waxaynu abuuraynaa xaalada iminka taagan tu ka sii daran, maanta waxaynu ognahay gole deegaan oo la badelayaaba inaanu jirin, marka shaqadii si ay u noqoto mid la wada leeyahay oo mudanayaashu ixtiraamkii ay lahaayeen u wada helaan oo gudooomiyuhu uu dheeraado gudoominta (chairing) iyo waxa lagu heshiiyo meel marintiisa, waxaan soo jeedinayaa in xil qaadistu fududaato oo kala badh iyo hal noqoto xasaanaduna aanay kaligii noqone xubnuhu wada yeeshaan.

**Qodobka 89aad** qoondaynta kabkaee Gudiddu soo jeedisay waxaa ku jira khaladaad (error) marka la tirinayo degmooyinka marka halka percent-gii la isugaynayay khalad baa galaya marka hal degmo la jeer qoranto, waxaan soo jeedinaya sidii horeba loo yidhi

percentage-ka kastamada degmooyinka qaata in aanay kabkan waxba ka qaadan, waxaa jira degmooyin JPLGga qaata isla markaana ka dad badan oo cashuurta ay gurnayaan ka badan tahay degmooyinka B,C iyo Dda, marka waxaan soo jeedinayaa si wixii u noqoto in umada la isasa soo gaadhsiiyo oo horumarkii isusoo gaadho oo magaalooyinkii waawaynaa ee miisaaniyadoodu markii horeba ka badnayd ee isla markaana kastamada wax ka qaadan jiray isla markaana JPLGga ka qaadanayeen ee intaas oo dhan qaba iyo kuwa aan qabin ee gabigoodiiba magaalo ahaanba uba bislayn inay cashuur badan qaadan halka dalku isa soo gaadhi maayo, marka si dalku isu soo gaadho Degmooyinka D iyo C ha loo badiyo kabka *(3 xildhibaan baa ku raacay)*

**Qodobka 33aad** baan dib ugu noqonayaa oo aan soo jeedinayaa in lagu daro **farqad 3aad** oo odhanaysa **"waxa loo aqoonsanayaa Gole Gobol ama Gole Degmo uu kala dirmay marka muda xileedkiisii dhamaado iyadoo aan gole cusub la soo dooran golihii badeli lahaa"** waa xaaladda iminka taagan oo sharciyan iska caynkaasa oo uu mandate-kii meesha ka baxay. Inahaas baan kaga baxayaa Waad-mahadsan tihiin WSC.

**Md: Cabdi Maxamed Jaamac** ("2Min 40Sec") Bismilaahi Raxmaani Raxiim, waana wakhti danbe anigu qodob qodob ayaan is dul taagayaa qodobka ugu horeeya ee aan galayaa waxaa weeye meesha ay ku qoran tahay degmada waxaa soo jeedinayaa in sideedii loo daayo oo la yidhaa dawlada-hoose waxaa jira degmooyin badanoo hadaan idhaahdo degmo hebel degmo hebel, Degmada Hoosena aynu degmo u bixino waxay noqonaysaa arrin aan wada degmo uun aynu wada nidhaahno.

Markaa dawladii hoose haloo daayo sideedii caasimada hargaysa Degmo odhan kari mayno iyana caasimada hargaysa ma odhan karno waa degmo aduunku caasimad ayuu wada leeyahay teena degmo ma odhan karo markaa waxaan odhan lahaa M/jeex Caasimada hargaysa sideedii haloo daayo.

**Qodobka 3aad** Xasaanada waxaan odhan lahaa Nin weyn oo dad soo doortay oo degmo yimid xasaanada halaga qaado aniga waxay ila tahay ma haagaagsana xasaanada waxaan odhan lahaa haloo daayo ninka deegaanka laga soo doortay waa qof lasoo doortaye.

Dada waxaan odhan lahaa berigii dhawayd ee dada aan xusnay, waanagii nidhi hala naaquso oo dhalinyarta hasoo galeen dhalinyartii soo wada gashay waxa ay wada noqotay Maansha Allaah waxaan odhan lahaa Da'dii aan kordhino aanka dhigno 30 ilaa 35 sano weliba 30 baan anigu odhan lahaa.

Goboladu 6 uun bay ahaayeen, Boorame, Hargaysa, Burco, Berbera,Ceerigaabo iyo Laascaanood Gobol kale oo saaid ahna weli halkan lama keenin wax A"ah wax A la yidhaahdo uun waa lixdaas Gobol mid todobaad ma jiro taasna taasaan odhan lahaa.

Ka Qaadista xilka Duqa, waxaan odhan lahaa haldheeri hala yidhaahdo hadii layidhaahdo Majoorati weligeed heli maayo inta kale uun buu lacag siinayaa inta uu lacagta siiyo iyo inta kale uun baa is leekaanaya waxaan odhan lahaa hal dheeri halagu rido duqa magaalada ASC.

**Md. Xuseen Maxamed Cige** **"8min 01sec"** Anigu waxaan ka hadlayaa laba Qodob oo gaagaaban ayuun baan ka hadlayaa hadii alle ka dhigo, marka hore waan ka xumahay habkan cusub ee xeerkan la inoogu soo dhigay marka hore ee aan sidii hore ee loo dhigi jiray aan ahayn ee xukuumadu ay wax soo jacburisay waxanan ku raacsanahay xildhibaanadii iga horeeyay.

Arrimaha dawladaha hoose ee ku saabsan Doorashada iyo xil ka qaadista, sida la sheegay ee la yidhi gudoomiyaha iyo ku xigeenka mooyaane xasaanad yaanay yeelan, taasi waxaan qabaa in ay nasiib daro weyni halkaa jirto oo ninkii codka badan ku soo baxay iyo kii codka yar ku soo baxay uu maayor noqdo kii codka yar ku soo baxay walibana la yidhi xasaanad ma lihid taasi maaha mid shaqaynaysa.

Sidoo kale nin dadweyne doortay hadii aynu nidhaa xasaanad ma leh waa dib u socod ayaan leeyahay ***waxaanan soo jeedinayaa in xildhibaanada golaha deegaanku xasaanada wada yeeshaan oo aan qaar gooni ah la siin xasaanad,*** hadii ay danbi galaana waxaa xilka iyo xasaanadaba looga qaadaya habkii awalba looga qaadayay oo ahayd ***kala badh iyo hal,*** waxaanan qabaa hadii dan laga leeyahay danta laga leeyahay maanta ooli mayso ee waa in aan dhignaa sharci u shaqeeya dadkan iyo dalkanba boqolaalka sano ee soo socda.

halka qiimeynta gobolada iy degmooyinka anigu garan maayo sida loo qiimeeyay oo waxay gudidu soo qortay "A+" dee "A-" inay soo qorto ayay ahayd, waxaan leeyahay meeshu iskuul maaha siyaasad wax galana maaha ***waxaanan soo jeedinayaa in degmooyinka iyo gobolada dalka si siman loogu dhaqmo oo kuwii hore ee jiray 6-da ahaa iyo kuwa cusub ee aan la ansixin waa in "A" laga wada dhigaa ama 13ka gobolba A laga wada dhigaa*** ama waa in 6-dii hore loo daayaa "A" inta inta kale la ansixinayo ama "B" loo daayo.

Sida aan ku arkaayay halka waxaa la yidhi togdheer oo kale waa in 17 la siiyaa hargeisa-na laga badiyaa markaa maxaa lagu qiimeeyay? Ma dadku siday u kala badan yihiin baa mise wax soo saarka ayaa lagu qiimeeyay muxuu yahay qiimeheedu, markaa waxaan leeyahay caasimada 1aad hadii ay sareyso waa in ay caasimada 2aadna ku xigtaa oo ay ka saraysaa kuwa kale sida ay hadaba tahay.

Waxaa kale oo aan leeyahay arrinka la leeyahay ayaan xildhibaano loogu yeedhin anigu waxaan ***qabaa in loogu yeedhi xildhibaano aan waxba laga baddelin.*** Tan kale ee ka hadlaysa gobolada iyo degmooyinka manaafacaadka waa in laga sinaadaa ayaan leeyahay oo ay qolo waliba Grade keeda wax ku qaadataa oo waliba sidii mudanayashi horeba sheegeen loo badiyaa kuwa "C" iyo "D" ah ***(2 mudane ayaa taageeray)*** WC.

**Md. Maxamuud Axmed Obsiiye:-** "18Min 38Sec" Xildhibaanada Golaha Wakiilada, Saxaafada iyo Marti-Sharafta waxaan idinku Salaamayaa Salaanta Islaamka Asalaamu Calaykum waraxmatulaahi Wabarakaatu.

Runtii aad baan u faraxsanahay maalmahanba farxad weynbaa ina haysay sababtoo ah, waxaad maanta moodaa inuu Goluhu uu shaqadiisii kusoo noqday oo si fiican u shaqaynayo Maalmahan.

Ahmiyada Xeerka ha noqoto, ama siyaabo farabadan baan u arki karnaa aad bayna Guddidu ugu Mahadsan yihiin, Guddida waxaan ugu mahad naqayaa intii ay Xukuumadu ka tagtay inay kaabeen oo ahaa inay sababeeyeen Qodob walba oo xukuumadu ay badeshay iyo kuwo ay iyaguna ay ku darsadeen is bedelka ay sameeyeen aad bay ugu mahadsan yihiin.

Xukuumaduna runtii waxa weeye xeerkan ay soo bandhigtay waa xeer dhameystiran kaabis haku jiro laakiin qodobadiisa oo dhan waa ay isku soo gurtay xeerkii hore iyo xeerkan danbeba way is raacisay markaa waa xeer sidaa inaan ku aqoonsano weeye oo mucadal ah, sidii Xildhibaanadii iga horeeyay ay sheegeen xeerkan waxaa xeerkan inuu sidiisii ahaado Xeerka Ismaamulka Degmooyinka iyo Gobolada oo yeeshay kaabis iyo waxka bedel xeer 23/2018 in sidaa loo dhigo xildhibaankii soo jeediyay waanku raacsanahay.

Li'anoow waa sidaa qawaaniinta caalamka oo dhan waa sidaa hadii is badel ku dhaco qaanuunka magaciisa lama badelee waxaa lagu daraa kaabis iyo wax ka bedel markaas taas waanku raacsanahay aad baan ugu raacsanahay xildhibaanada soo jeediyay in qodobkaasi ama magacaasi uu sidiisii ahaado runtii qodobada ugu muhiimsan hadaan soo qaadno Dawlada Hoose waa qayb kamid ah, Xukuumada maaha qayb madax banana sidaa darteed waa inaan wixii shuruuc ah ama haku saabsanaato maaliyad ama haku saabsanaato bulsho ama haku saabsanaato dhaqan waa in la tixgeliyaa xeerkaas dalka oo dhan oo ay noqotaa mid ka mid ah shaqooyinka ay qabato.

Sidaa darteed waxaa jira xaga Maaliyada marka aanu ka eegno xeerar farabadan oo aanu saxnay qodobo jirayna oo halkan si kale loo dhigay tilmaamaya qodobo si kale aan ana u taabtaa jira waxaa ugu muhiimsan Qodobka 108,oo ka ugu danbeeya ah baabi'in ama laalid marka la yidhaahdo waxbaa la baabiinayaa ama waxbaa la laalayaa waxaa la laalayaa xeerkaas la soo jeediyay ee kaabis iyo waxka badel lagu sameeyay waxay xukuumadu soo gudbisay inay laashay xeerkaas isaga ah 23/2002 xeerka is maamulka gobolada iyo degmooyinka iyo xeerka la yidhaahdo midaynta cashuuraha.

Midaynta cashuuraha siday xildhibaanadii iga horeeyay ay u sheegeen waxaan aaminsanahay inuu xeer dhaqan galay inuu yahay loo baahan yahay hadii waxka bedel lagu sameynayo ama kaabis iyo wax ka badel lagu samaynayo in golaha la keeno waayo goluhuu kasoo baxay xukuumadu soo jeedin uun bay leedahay inay soo jeediso waxaa taas sii raaca guddida laftigeedu waxaad moodaa inuu tararaxay xeerar farabadan ayuu soo dhigay uu leeyahay oo kasoo horjeeda xeerkan waxa weeye waa waxba kama jiraan.

Oo xeerkii biyahay soo qaateen, oo xeerkii xanaanada, xoolaha xeerkii fayo dhawrka ilaa tobaneeyo xeer bay yiraahdeen wixii ku jira ee ka soo horjeedaa waa waxba kama jiraan waxaa waajiba inay cagsiga ay noqoto oo ay tiraahdo xeerkaas soo baxay ama baa dhaqaale ha jideeyeen ama arrimo kale ha jideeyeene inuu xeerkani u hogaansamo xeerarkii kale ee Golaha Wakiiladu ansixiyay sida saxda ahi waa sidaa ee maaha cagsiga in la yidhaah xeerkani wuxuu burinayaa xeerar hore waxaa weeye in taas laga fiirsado anigu kuma raacsani Guddida Xukuumadana kuma raacsani inay xeerkaas midaynta cashuuraha in uu xeerani baabi'in karo intaasi waxa weeye waa intaan soo jeediyay waa qodobka 1aad qodobka 108aad.

**Qodobka 22aad** soo jeeedinta guddidu anigu waanka tegayaa waxaana taageerayaa soo jeedinta xukuumada sababtoo ah tirada ay cayimeen ee xildhibaanada Golaha Wakiilada waxaan ku haystaa in tiradan marka la kordhinayo ama la dhimayo loo adeegsado sababo keenaysa kordhinta ama dhimista markaa mar hadaanay wax cusubi aanay jirin.

**Soo jeedin:-** waxaan anigu soo jeedinayaa in sideedii ay ahaadaan tirada xildhibaanada Gobolada iyo Degmooyinka oo ay noqot 25 degmada hargaysa marka la leeyahay hargaysa waa caasimad oo hadana caasimadii laga saaray maroodi jeex oo degmo ay u noqonayso dulmi baa ugu jira iyadaa ugu tiro badan gobolada dalka degmooyinkooda iyadaa ugu tiro badan.

Hadana la siiyo sidaa ay guddidu soo jeediyeen 15 sidaa ay soo jeediyeen xukuumaduna 17 anigu waxaan u arkaa inaanay ahayn wax macquul ah waa in xeerkii caasimada hadii la baajiyay ama la ansixin waayay ama la keeni waayay, waajib waxaa ah inay sideedii ay ku socoto 25 kii xildhibaan waxay ku salaysnaayeen tirada degmada hargaysa iyo doorasho hadii la sameeyo meesha ugu badan weeye.

Sidaas darteed anigu waxaan leeyahay sideedii hore ha ahaadeen oo yaan waxba laga bedelin 17, 15 ba kuma raacsani sidii hore ay u dhignayd ayay u dhignaanaysaa.

**Sidoo kale waxaan jeedinayaa in** xasaanada siday xildhibaanadii hore ay u sheegeen xasaanada xildhibaanada Golaha Degaanku inuu dhamaantood ay wada yeeshaan oo aanay laba keliya wada yeelan inta kalena ay waayaan xasaanada sababihii ay xildhibaanadu sheegeen darteed markaa halkaas waxaan ku taageersanahay xildhinaabadii iga horeeyay ee soo jeediyay inay xasaanada wadaagaan dhamaantood waayo gudoomiyaha iyo ku xigeenka iyagaaa doortay laakiin xasaanada wuxu ku helay xubinadii iyo doorashadii la soo doortay.

Markaas qodobkaasina waa **Qodobka 28aad** farqadiisa 5aad ee bedelka guddida iyadana taas waanka soo horjeedaa waxa weeye waxay yidhaahdeen is badelkaa ay ku sameeyeen ma waafaqsanin is badelkaa ay xukuumadu soo jeedisay baan ku raacsanahay.

**Qodobka 33aad** guddidu waxay ku soo daray farqadii 3aad oo cusub waxa uu yidhi hadii doorashada Golayaasha Degmooyinku ku qabsoomi weydo, xiligeedii Golihii hore ayaa xilka sii haynaya inta laga dooranayo golo cusub, waxaan u arkaa gacan-maroojis aan loo baahnayn runtii waayo.

**Qodobka dastuuriga** ah ee 111aad waxa uu sheegayaa in la kala diri karo Qodobka 111aad farqadiisa 3aad inuu Madaxweynuhu uu kala diri karo maadaama oo uu kala diri karo iyaga oo xilka haya, iyaga oo xilka ka maqan dee waxa weeye (Mimaa Qawla) baa la yidhaahdaa marka xeerarka la eegayo waa ay ku haboontahay iyada laftigeedu looma baahna xeerkan Qodobka 1aad: in Qodobkaas lagu soo daro sababtoo ah **Qodobka 2aad**: waxa uu ka hadlayaa kala dirid ee kama hadlayo doorasho.

Markaa waxa qodobkan waxa loo keenay waxaad moodaa inayna meesheedii haboonayd aanay joogin sidaas darteed waxaan leeyahay sida qodobkaas 5aad ee guddidu soo jeedisay in meesha laga saaro ayay ku haboontahay sida xildhibaankii horeba uu sheegay ee ah aanu ku raacnayba waxaa jira qodobo Muhiim ah oo meesha Nuxurkii Maaliyadeed ay meesha ku jirto Maadaaba oo ay Dawlada Hoose ay kamid tahay waxyaabihii ugu muhiimsanaa ay tixgeliso ay tahay xeerarkii BFM ee golahani uu ansixiyay ee Nidaaminayay Maamulka Maaliyadeed.

waxaa jira **Qodobka 48aad** xilka Xoghayaha Fulinta marka aad fiiriso xarafkiisa B" wuxuu leeyahay Hubinta iyo Saxeexida Foojarada, Jeegaga, Kharash bixinta iyo Gelida Saxeexa Codsiyada iyo kharashyada caadiga ah ee hawlaha socodsiinta maamulka markaa halkaas waxa weeye kharashka, Foojarka iyo Saxeexidiisa waa in loo raacaa xeerarka maamulka Maaliyadeed ee Qaranka waayo xeerar baa yaala waa in xeerarkaas la fuliyaa markaa in iyana qodobkaas lagu daro iyada oo la tixgelinayo xeerka maamulka Maaliyadeed iyada oo la raacayo.

**Qodobka 72aad** Waa waaxyaha Degmooyinka A"Xilka Waaxda Maamulka iyo Maaliyada waxaa la yiri Dalabka Daabacaada, Kaydina, Qaybinta Buugaagta Lacagta qabashada iyo Cashuuraha, Shidaalka iyo Bakhaarada waxaas oo dhan waa xil uu leeyahay Maamulka Waaxdu waxaa laga tegay in Hanti-dhawra guud uu waxaas oo dhan uu ka Masuul yahay fasax laga helo ama Rusqad laga helo marka ogolaansho laga helo Hanti-dhawraha Guud.

Hanti-dhawra Guud waa kan Waraaqaha iyo Rasiidh-yada waxaas oo dhan isagu bixinaya iyagu ma Daabacayaan oo keliya waxay daabacaan oo iyagu ay u madax banaan yihiin maaha kaydinta iyo waxay kaydinayaan waa wax Hanti-dhawrka ka yimid.

**Qodobka 88aad** Waa qodob aad muhiim u ah oo aad moodo inaan si fiican aan loo dhigin waxa weeye dib u Hubinta cashuuraha.

**Qodobka 2aad** Gole kasta oo Deegaan waxa uu madax banaan yahay, inay Xadidaan Tacriifadaha, kordhiyaan, Dhimaan ama ay waxka bedelaan, waa xilkii uu siiyay Dastuurku Golaha Wakiilada.

**Qodobka 54** Wasaaradda ayuu siiyay awooda wasaaraddu waxay leedahay soo jeedin laakiin ansixinta waxaa iska leh Golaha Wakiiladda halkaasna waa qodob Dastuurka ka soo horjeeda in dastuurka la raacaa haboon.

**Qodobka 91aad** Farqadiisa 2aad waa dib u eegista Miisaaniyada Dib loo eegayo

**Qodobka 1aad** waxa uu leeyahay Dakhliga Korodhka waxaa lagu jiheynayaa Horumarinta Mashaariicda oo keliya, waa sax ha lagu jiheeyo horumarinta mashaariicda laakiin wixii soo kordha ee la gelinayo mashaariic waxay u baahan tahay oo aan Miisaaniyadii ku xadidnayn,waxay u baahan tahay siduu sharcigu iyo xeerarkii Maaliyadeed sheegayaan oo Miisaaniyad dheerada ay ansixiyaan Golaha Wakiiladu.

Markaa waxaa lagama maarmaan ah inay wasaaradda maaliyada ay ku noqoto, oo ay codsadaan in la geliyo mashaariic iyadoon aan Supplementary Budget Low ku keenin Golaha waxay noqonaysaa sharci daro markaa waa inay wasaaradda maaliyada ku celisaa wasaarada maaliyaduna Golaha ay u keentaa.

**Qodobka 92aad** xafarkiisa C" xisaab xidhka Golaha Degmada Ciwaankiisu wuxuu sheegayaa Xisaabiyaha Guud oo leh hubinta iyo sixida Shuruucda Xisaabaadka Xisaabiyaha Guud marka uu helo Xisaab xidhka Golaha Degmada ee bilaha, Saddex bilood-ka iyo Sanad-laha waxa uu hubinayaa sixitaan iyo in xisaab xidhku uu waafaqsan yahay shuruucda iyo xeerarka xisaabaadka qaranka waa inuu waafaqsanaadaa.

**Qodobka 94aad** waxa weeye wasaarada Arrimaha Gudaha ayaa u dejinaysa Golaha Degaanka xeer Nidaamiye u gaar ah Xisaabaadka golaha degaanka oo ah, in raaco xisaabaadka Guud ee qaranka oo ku cad xeer 75" BFM.

**Qodobka 39aad** farqadiisa 4aad Xubintiisa A" waayo hadii kale waxaa imanaya iska hor imaadaan Xukuumada Dhexe iyo Dawladihii Hoose ayaa nin waliba hadii uu Jihaynayso gaarkiis lama rabo waa in uuu dalku ama xukuumadu ay wada socotaa.

Qodob dastuuriya ayaa isagana halkan la jebiyay waa,

**Qodobka 99aad** waxaa qoran Wasaarada Arrimaha Guduhu ayaa awood u leh kormeerka iyo baadhista Dastuurkiina waxa uu leeyahay, baadhistu uguma jirto baadhista hantida waxaa iska leh Xisaabiyaha Guud ee Qaranka.

Xisaabiyaha Guud ee Qaranku wuxuu baadhayaa Xisaabaadka Dawlada Hoose sida ku cad Xeerka Maamulka iyo Maaliyada ee qodobkiisu yahay sidan, mana jiro sharci dejinta markaad fiiriso xeer baadhista u ogolaanaya Wasaarada Arrimaha Guddaha.

Dastuurka **Qodobkiisa 105aad** waa awooda Dawlada Dhexe ayuu dastuurku uu siinayaa baadhista, baadhista malaha Wasaarada Arrimaha Guduhu waxay leedahay kormeer oo keliya laakiin baadhis kuma laha.

Runtii waxaa muhiim ah oo aynu eegayno qodobada ugu muhiimsan, waxa weeye inaanay shuruucda dalka aanay ka hor iman weliba shuruucda maaliyadeed iyo Cashuur Qaadista waxaa ku jirta qodob cashuurta waxaa qaadi karta dawlada hoose waa ay qaadi kartaa cashuuraha loo jideeyay inay qaado waxaa kamid ah cashuuraha iminka ganacsiga ama liisamada ganacsiga iyadaa hore u qaadi jirtay dawladii dhexe maanta ka qayb gashay oo iyadiina cashuur qaadatay oo laba cashuur ayaa lagu waajibiyay muwaadinkii ganacsiga ku jiray taasina waa qayral sharci inay xukuumadu ay ka noqoto

labadaas cashuurood ee laga qaadayo ninka ganacsadaha ah ee meel yar furtay si uu hawl maalmeedkiisii uu uga soo saaro.

Waxaan jacelahay oo aan ku soo gaba-gabaynayaa in la dhawro marka xeerka la ansixinayo la eego xeerarkii kale iyo wixii ka hor imanaya si uuna uga hor iman dastuurka dalka iyo xeerarkii dhaqan galay ee Golaha Wakiiladu ansixiyay.

Wabilaahi Tawfiiq".

## Kal-fadhigii 39aad fadhigii 21aad

**Sabti, 20, April 2019**

**Quraanka: -** Md. Xaamud Cismaan Cigaal

**Gudoonka: -** Gudoomiye, Baashe Maxamed Faarax.

**Ajandaha Fadhiga:-** Doodda Xeerka Ismaamulka G. iyo degmooyinka, maalintii 3aad.

**Md: Ibraahin Axmed Reygal :-** **"18Min 38Sec"** dhamaantiin waad salaamantihiin, maalmahan waxaan ku jirnay dooda xeerka 23aad ee Ismaamulka Gobolada iyo demooyinka, waxaan jeclahay in aan ka qaato qaybtayda waxaanan ku bilaabayaa sida tan;

Xeerkan waxaa uu ahaa magiciisu oo la odhanjiray ilaa hadana uu yahay Xeerka Ismaamulka Gobolada iyo Degmooyinka XL. 23/2002, intii uu golahani jiray waa markii labaad ee Golahan la keeno iyada oo hal marna wax-ka-baddel lagu sameeyay sidan ay gudidu ku soo qortay waxaan soo jeedinayaa in aan magiciisa laga rarin ee magiciisii hore loo saay ***(5 mudane ayaa taageeray).***

Gudoomiye, sida ku qaran xeerka ayaa sheegaysa in uu yahay kaabista iyo wax-ka-baddelka xeerka 23aad sidaas ayaa lagu soo qoray, markaa gudoomiye Gole ahaan, Gudi ahaan iyo Xukumaadaba wax ayaynu isla toosinaynaa.

Qodobka 9aad Gobolada iyo magaalo madax kastaa waa "A" ayaa ku taalay waxaana loo beddelay gobolkastaa waxa uu u qaybsamayaa "A", "B", "C" iyo "D" taasna waxaan soo jeedinayaa in sidoodii hore loo Daayo, ee ahayd magaalo madax kastaa waa "A"***(4 mudane ayaa taageeray).***

Gobolada la leeyahay waa 6 anigu uma arko in ay lix yihin ee waa 14-gobol oo magaalo madaxyadooduna ay yihiin "A" ***(4 mudane ayaa taageeray).*** 14sano ayaa laga jooga

maalintii aan ku taliyay in 14gobol laga dhigo 6dii ingiriiska ka tagay iyo 15 degmo lixdaa gobol oo kala ahaa:-

1. Saylac
2. Gabiley
3. Bali-gubadle
4. oodweyne
5. Caynabo
6. Buuhoodle
7. Badhan iyo
8. Taleex.

Waxaan leeyahay kalmada sharci maaha waxaan leeyahay waa danbi ee waxaan leeyahay waatan ku hortaalee gudbi Gudoomiye.

Waxaa kale oo aan degmooyinka ka u qalma in "A" laga dhigo

1. Ceelaayo "A"
2. Laasa-Sural "A"
3. Laas-Ciidle "A" iyo
4. Tog-wajaale "A"

Sidaa awgeed waxaan soo geedinayaa in aan wadanka ku ansixino 14gobol iyada oo la ansixinayo ku aan wali ansxa ahayn oo aan sheegayo sababaha loo ansixinayo oo ah

1. Maamul-daadajin.
2. Dhaale, iyada oo aanu dhaqaaluhu ahayn cashuuraha la guro oo kaliya ee uu yahay khayraadka Dabiciga ah oo ay ka mid yihiin xoolaha, Beeraha kaluunka, beeyada iyo macdananaha hada soo burqanaya oo uu ka mid yahay badroolku, dhawaalaha waxaa ka kow ah xoolaha Nool, waxaana ku xigaya biyaha, kaluunka iyo bada aynu ilawnay.

Waxaa kale oo aan wax ka beddelay Gobolada Macagyadooda oo aanka dhigay sidan soo socota;

**Gobolka Sanaan** waxaan u Baddelay **Gobolka Daalo**

**Gobolka Badhan** waxaan u baddelay **Go**bolka **Cal-Madaw**

**Gobolka Maroodi-jeex** waxaan u baddelay **Gobolka Caasimada**

**Gobolka Buuhoodle** waxaan u baddelay **Gobolka Hawd Bari**

**Magaalada Bullo-Xaar** Ha loo Baddelo **Gegmahada Al-mis**

Sidoo kale waxaan soo jeedinayaa in Gobol ama Degmo lagu magacaabi karaa;

1. Dhaqaalaha
2. Dadka tiradiisa
3. Baaxada Dhulka
4. Istaraatijiyada

5. Khayraadka dabiiciga ah; sida Biyaha, Kaluunka, Xoolaha Nool, macdanta iyo biyaha.

Sidoo kale waxaan soo jeedinayaa in kabka la siiyo Degmooyinka loo badiyo Degmooyinka "D" ah waad mahadsantihiin.

**Md: Maxamed Xuseen X. Ciise: -** "18Min 38Sec" Bismilaahi Raxmaani Raxiin, mudanayaal xeerkani waa xeer aad u muhiim ah oo aan is leeyahay waxaa ka xoogan kaliya Dastuurka oo kaliya waayo waxa uu ka hadlayaa dhamaan wadanka oo dhan on badana waa laga dooday in lagu cel-celiyaana minco weyn ma samaynayso.

mudanayaal guud ahaa soo jeedin ayaynu leenahay waxaan kale oo aynu leenahay in wixii xukuumada inaga yimaada aynu waxna ku raaci karno waxna aynu ku diidno, markaa hadii aan gudo galo xeerka sida caadada ah ama xeerarka badankooduba yihiin qodobka 1aad waxaa laga dhigaa eray bixinta xeerka, markaa waxaan leeyahay ***qodobkaa 1aad waa in laga dhigaa Ery-bixinta Xeerka qodobka 2aadna waa in laga dhigaa magaca Xeerka waxaanan ku raacsanahay mudanayaashii soo jeediyay in uu ahaado Xeerka Magiciisu Xeerka ISMAAMULKA GOBOLASA IYO DEGMOOYINKA waxana hadii loo baahdo lagu qurxin karaa kaabistii 2aad.***

**Qodobka 4aad** ee ka hadlaya darajooyinka waxaan leeyahay yayna Xildhibaanadu ku habsaamin waayo waxaa qiimaynteeda cadeeayay Dastuurka waxaana qiimaynteeda leh xukuumada iyada oo inoo soo gudbinaysa, markaa ayaynu leenahay in aan wax-ka-beddelo oo degmooyinkii lixdankii (60kii) oo ay qaana ka farcamayeen kuwaas oo wali qaar ka mid ahi yihiin "C" oo ay ka mid tahay Degmada Sheek waana loo baahan yahay in laga dhigo "B" waayo dhaqaale ku filan wey leedahay, waana la odhan karaa degmooyinka noocaa ah ha la kordhiyo.

Anigu xeerkan oo ah xeer balaadhan waxaan u qaybiyay laba qaybood hadii aan ka bilaabo **Qodobka 22aad** tirada Golaha Deegaan waxaan ku raacsanahay sida ay guddidu u soo jeedisay waana sida ugu macquulsan ayaan leeyahay.

**Qodobka 33aad** oo in badan ayay xildhibaanadu ka hadleen qodobkan oo intiisaba badan ka hadlaayay kala dirida xubnaha golaha deegaan iyada oo uu dastuurkeenu sid cad u qeexay sida loo kala dirayo golayaasha deegaanka, xeerkuna wuu cadeeyay, laakiin waxaa dooda la soo dhex galiyay golihii deegaanka ee hada shaqaynayay ayuu wakhtigii ka dhamaaday, iyada oo ay gudiduna soo jeedisay haduu uu golaha deegaanka waxkhtigu ka dhamaado waxaa go'aan ka gaadhaya Golaga Guurtdida xukuumaduna ha soo jeediso.

Anigu waxaan odhan lahaa maadaama oo xiligoodii uu dhamaaday xiligii loo kordhin laahan uu dhaafay oo ay hada iska joogaan ***waxaan soo jeedinayaa in go'aanka xukuumada loo daayo*** waayo dastuurku waxa uu leeyahay golayaasha deegaanku waa qayb ka mid ah xukuumada markaa waa in iyada loo daayo ama ha kala dirto ama Guurtida ha u soo gudbiyaane, sidoo kale mudada kala guurkuna waxaa iyana leh xukuumadee ha loo daayo.

**Qodobka 70aad ee xilka qaadirta Maayirka;** waxaan taageersanay in xilka laga qaado 50+1 duqa iyo ku xigeenkiisa.

**Qodobka 89aad** waana kan la qoondaynayo kabka dawladaha hoose ee 10%-ka waxaan leeyahay ha loo daayo sida ay gudidu u soo dhigtay waayo la tashiyo badan ayay sameeyeen ee sideeda ayaanu daynayaa.

sida halka ku taala degmooyinkeenu waa 77degmo oo "D"-ah iyaga oo markii hore ahaa 23degmo waxaanan qabaa in aynu maamulka dawladnimo aynu ku ciyaarayno ayaan qabaa waayo meel cidlo ah ayaa degmo laga dhigayaa iyada oo la siyaasadaynayo wanan aaminsanahay in ay qalad weyn inagu tahay waayo laba degmo oo isku muuqda in degmooyin laga dhigaa waxay ceeb ku tahay, waayo Samliyadii aynu ka midka ahayn Imisa Degmo ayay ahay Marka la isku geeyo aad ayay u yaraayeen, markaa ma dhukeenii ayaa balaadhay, waxaan u arkaa in aytahay wax aan macquul ahayn, *waxaanan soo jeedinayaa in wax alle wixii "D" ah lagu noqdo ama dhamaantoodba waa in la baabiiyaa* waxaanan qabaa in somaliland miinooyinka qar soon ee u yaala hadii ay noqon lahayd Xadayn tooda iyo woxogaaga, markaa halkaa qalad weyn ayaa ku jira ee waxaan leeyahay waa in la iskaga yidhaadaa hadii ay noqon lahay xukuumad iyo golayaalba.

waxaan ku samaynayaa sixitaan a iga oo ka bilaabaya qodobka 3aad farqadaha 2,3, iyo afraad, sidii kale Qodobdka 4aad Mabaadii'da Xeerka **farqadiisa 6aad** Hagaajinta awooda fulineed ee hawlaha ***dawladaha hoose ee ha la hagaa jiyo waxaanan ku raacsanahay sida guddida.*** Qodobka 9aad: Gobolada Iyo Degmooyinka JSL farqadiisa 1aad **Jamhuuriyadda Somaliland waxay u qaybsantaa (6) Lix Gobol, *halkaa laga dhigay u qaybsantaa waxaan ku raacsanahay sidii uu soo jeediy Xuseen Axmed ee uu yidhi way u qaybsami karaan.***

**Qodobka 11aad Xuduudaha Gobolada iyo Soohdimaha Degmooyinka** farqadiisa 7aad Degmo kasta oo la magacaabo waxay xuduudaheedu ku jirayaan xuduudihii Gobolka iyo soodimihii Degmada ay ka farcantay, sida ku cad xarafyada kala ah A, B, C Ee Qodobkan. ***Waxaan leeyahay meel ay ku qorantahay A,B, C, ma jirto mana garanayo meel laga keenay qodobkaa waxaan leeyahay ha laga saaro ama ha laga dhigi 1,2, iyo 3***

**Qodobka 12aad Qiimayn Iyo Darajo Ka Bedelid Degmo farqadiisa** 2aad **Xukuumadda waxa waajib ku ah inay dib u qiimayn ku samayso Darajooyinka Degmooyinka B iyo**

**C, muddo aan ka badnayn Saddex Sanadood (3) hala ay gudidu soo jeedisay in laga dhigo 2 sono** ***anigu waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo 18bilood*** sanad iyo lix bilood.

**Qodobka 18aad Xilka Iyo Waajibaadka Guddoomiyaha Gobolka** Farqada 14aad Xukuumada dhexe waxa ku waajib ah in ay guddoomiyayaasha gobolada u qoondayso miisaaniyad ku filan xil gudashada waajibaadkooda shaqo***, waxaan leeyaha farqadaasi lama soco qodobkan waxaanan ka dhigay farqad labaad aniga oo farqadahaa hore ka dhigay in laga dhigo farqada 1aad B,T,J,X, ilaa farqada 13aad laga gaadhayo, aniga oo farqada 14aad na laga dhigo farqad 2aad oo u shigan sidan; si loo xaqiijiyo xil gudashada waajibka shaqo ee ku xusan farqada kood xarfaha B ilaa f halkaa ayaan soo galinayaa*** Xukuumada dhexe waxa ku waajib ah in ay guddoomiyayaasha gobolada u qoondayso miisaaniyad ku filan xil gudashada waajibaadkood. Mudane Gudoomiye waad mahadsantihiin inagaa ayaan ku soo koobayaa.

**Md: Axmed Cadi Nuur (kijaandhe) :-** "18Min 38Sec" **B**islilahi Raxmaani Raxiim. Waan salaamayaa xildhibaanada, anigana Guddoomiye aad iyo aad ayaad ugu mahadsan tahay in aad fursadan I siiso.

Xeerkan Gobolada iyo degmooyinku waa xeer aad iyo aad u muhiim. Sida xildhibaanadii iga horeeyey sheegeen xeerkani wuxuu la mid yahay inaga oo furnay dastuurkii. Anigu xeerkan waan eegay meel aan muhiim ahayn ma jirto, waliba waxaan eegay kii ay xukumadu soo gudbisay. Waan ka xumay kii kale waan ka gaadhsiin waayey.

**Markaa waxaan soo jeedinayaa marka doodu dhammaatuin loo saaro Guddi soo qiimaysaa degmooyinkaas la sheegayo, Guddidaas oo ka kala imanaysa Gobolada oo og dhibaatooda ka jirta meelahaas oo ay ka dhab tahay inay qiimayn soo sameeyaan. Guddidu aad iyo aad ayey u mahadsan yihiin.**

Guddoomiye u jeedada xeerkan laga leeyahay saddex qodob weeye:-

1. In aynu dadka u dhawyno adeegyada aasaasiga ah.
2. Inaynu khayraadka dadka u dhawyno siday u munaafacaadsan lahaayeen.
3. Inay siyaasad ay dadku kaga qaybgeleyaan fududdayn u samayno.

Barri dhawayd aniga xildhibaan Axmed Ducaale ayaa Safar ku tagnay Gobolada Barriga, barri ka sii horaysayna waanu ku tagnay. Runtii meelahaas barriga haddii aad aragto dhibaatada ka jirta waa maamul la'aan iyo kala dambayn la'aan iyo itijaah la'aan ayaa ka jirta. Waxyaabaha ugu wacan colaadaha ka jira Gobolada Barriga, wax aka mid maamulka oo aan gaadhsiisnayn.

Haddii aynu samayno maamul daadejin wanaagsan, dhibaatooyinkaas weyn xalili lahayn. Ninka Taliyaha qaybta Police ayaanu waraysanay, wuxuu yidhi Buro ilaa meesha la yidhaa Duruqsi 156KM ayey isku jiraan, waxaa markaa Duruqsi jooga saddex nin oo Police ah. Saddexaas nin ee police ah ee halkaas jooga wax u dhexeeyaa ma jiraan.Wuxuu

yidhi dadka ay soo qabtaan ee dambiyada gala dhigta hoostiisa ayaanu fadhiisinaa, gaadhi ma haysano, waxaanu nool kaga bixino ma haysano.Markaanu wax aanu ku qaadno waynu ayaanu iska siidaynaa, markaa halkaas ayaad ka garan gartaa waxaas oo dhibaatooyin ah ee jira. Wuxuu yidhi 10 litir oo badrool ah ayuu ku shaqaynayaa. Waxaanu u tagnay Badhasaabka, wuxuu noo sheegay budget-ka aanu qaadanaa 30 litir oo baadrool ayuu gooyaa maalintii marka la qaybiyo.

Runtii dhibaatooyin adag ayaa ka jira oo maamul xumo ayaa ka jirta. Qof aynu magacawnay oo aynu meel fadhiisinay wax allaale waxay tarayaan ma jirto. Waxaynu inooga baahan yihiim inaga in aynu siino shuruucdii ay inooga baahnaayeen.

Haddii aad tagto degmada layidhaa Gar'adag dhulka ay leedahay iyo khayraadka ay leedahay waad yaabaysaa, haddana dadkii xagan ayuunbay soo eegayaan. Markaa sidii waxaa ay u maamulan lahaayeen, u munaafaacsan lahaayeen in shaqoooyin loo sameeyo weeyaan.

Haddaad eegto degmada faraweyne iyo Balicabane 2km ayey isku jiraan. Degmada faraweyne Iskuul ma leh, meel caafimaad ma leh. Waxa ka haboon inta meel loo sameeyo oo isku wada fadhiistaan, cusbitaal wada dhistaan oo macalinka iska wada bixin karaan halka la kala qaybinayo.

Markaa runtii waxay u baahan tahay caqli ayey u baahan tahay, Gobolo la sii kardhiyo iyo degmooyin la sii abuuraa wax macno ah oo ay samaynayaa ma jirto dadka ayey sii kala qaybinaysaa, waxaanay aakhirka noqonaysaa in aynu jilib walba u samayno degmo, taanisa inama anfacayso oo waxay noqonaysaa in Gobol Gobol la isaga soo horjeesto. Waxaynu u baahan nahay in aynu dadka midayno, Gobolada midayno, iskuul u wada samayno.

Matalan shuruudaha lagu magacaabayo A, B iyo C waxay ku qoran tahay meel walba. Anigu waxaan odhan lahaa waar shanti degmo ee Ingiriiska ha inoo ahaadeen oo qaab-dhismeedka Gobolka aynu ka saarno. Imika hadaynu eegno sida uu u samaysan yahay qaab-dhismeedkani Qaranka ee Gobolku, waa saddex qaab-dhismeed waa tii Gobolka iyo tii degmada, xeerkana markaynu eegno tii degmada wuu ka booday oo tii degmada hoose ayuu wax ka qorayaa tii Gobolkuna way ka maqan tahay. **Waxaan leeyahay awoodaha Gobolka ee Guddoomiye, Guddoomiye ku xigeenka iyo Xoghaya waa in lagu daraa xerka. Waa in aynu gelinaa saddex qaab-dhismeed dabeetana samaynaa qaab-dhismeed Qaran.**

Markaa sababaha waxaas oo degmooyin ah iyo waxaas Gobol ha loo samaynayaa waa xaga doorashooyinka weeyaan, taas lafteedun waxay u baahan tahay in tirade dadka la sameeyo la soo qiimeeyo.

**Qodobka 7aad** shuruudaha degmo lagay samaynayo. Waxaan leeyahay waa in lagu darraa degmada waxa noqonaysa Matalan degmada kharashkeeda soo saari karta, degmo 30,000 oo qof ku nool yihiin, taas oo carruur ahi iskuulka tagto. Waxaanay u baahan tahay in waxaas oo dhan lagu qoro waxaan u dhaafayaa Wasaarada arrimaha Guddaha.

Gobolada iyo degmooyinka magacaabistoodu way iska siyaasadaysan yihiin, markaa foodka doonayaa ayaa la kala iibsanayaa, markaa eegi maayo oo markaa doorasho timaado ayuu marada dhiganayaa oo meel walba magacaabayaa, markaa taas waa in aynu meesha ka saarnaa, ama sheegnaa sababaha lagu magacaabayo ama nidhaahnaa Barlamaanka oo ansixiya mooyaane lama magacaabi karo badhaasb iyo Gobol, iyada oo halkan laga ansixiyo mooyaane lama sii magacaabi karo oo xitaa ku sii meelgaadh ahaan looma sii magacaabi karro.

Qodobka ka hadlaya Xuduudaha Gobolada iyo degmooyinka ii la siiyey Wasaarada Arrimaha Guddaha, waxaan odhan lahaa ha loo magacaabo Koomiishan wax ka yaqaana Geography oo khuburo ah oo Gobolada oo dhan ah sida Koomiishanka Xisbiyada.

Waxa xeerka ku soo noq noqday awoodaha Golaha deegaanka, Awoodaha Guddida Fulinta iyo awoodaha Guddida Joogtada ah, waxaan odhan lahaa meel ha la iskugu geeyo, iyada oo la leeyahay waayo Guddida Joogtada ahi. Waxaan leeyahay waa in la isku soo ururiyaa Qodobada awoodahaas ka hadlaaya Guddida fulinta.

Waxaan raacsanahay soo jeedinta Guddida ee ah siday u dhigeen tirade xubnaha Golaha deegaanka dalka. Matalan Hargeisa 15 xubnood, Darajada “A” ee Gobolada 11 xubnood, Darajada “B” 9 xubnood, Darajada “C” 7 xubnood iyo Darajada “D” oo Iyana 5 xubnood.

Waxaan soo jeedinayaa in muddada 14 cisho ah ee la yidhi ha is doortaan la kordhiyo, waayo waxay u baahan yihiin Olole iyo inay is xodxotaan, markaa waxaan leeyahay ha laga dhigo ilaa 6 wiig ama 7 wiig maadaama oo ay cusub yihiin.

Waxa kale oo aan soo jeedinayaa in aan la samayn 5 sanno oo dictator ah, waxaan leeyahay xubnaha Golaha deegaanku waa in ay wada lahadaan dhawrsanaanta oo aan cid gaar la siin.

Waxa ka maqan xeerkan wayaabo muhiim ah oo ay ka mid tahay ay cashuur urursadaa, waxa kale oo ka maqan inay deegaanu ay dhulkooda ka shaqaystaan oo haddii ay doonaa dhuxul ha ka qotaan, beer ha ka samaystaan, oo dhagax hadday doonaa ka qotaan. Waxaan leeyahay awood ha loo siiyo inay awood loo siiyo inay dhulkooda qorshaystaan.

Waa in xeerka lagu daraa guddida qorshayna, waana in Guddoomiyaha Gobolka awood loo siiyaa in uu magaacaabi karo Guddida ka shaqaysa degmooyinka iyo Tuulooyinka oo ka kooban 11 xubnoon.

Waxa kale oo aan leeyahay waa in Golaha deegaan kastaa leeyahay qorsho sanadeed uu sameeyo, haddii aanu taas samayn Karin ha iskaga tago meesha waana inay Goddoomiyaha Gobolka qorshahaas wax ka siiyaan. Waxa kale oo aad moodaa in xidhiidhkii wada shaqayn aanu ka dhaxayn oo ninkii Gobolka loo Magacaabay ee Guddoomiyaha ahi aanu waxba gacanta ku hayn.

Waxaan leeyahay dhibaatooyinka dalka ka jirta waxaka mid ah maamul dabacsan ama maamul aan jirin gaar ahaan Gobolada barriga.

Waxaan soo jeedinayaa in Guddi loo saaro, Guddidaas oo ka soo baaran dagta xeerkan si xeerkani u noqdo mid dhammaan ka jawaabaya baahiyaha jira, markaa guddidaas ha loo saaro oo fasaxa oo dhan ha soo haysato.

**Md. Maxamuud Ismaaciil Xassan:- "18Min 38Sec":-** Gobolada iyo Degmooyinka Dalka ee Digrooto lagu soo saaray waa inuu Xeerka ka muuqdaa, ilaa iyo inta laga gaadhayo qiimayn rasmiya oo lagu kala saarayo wax allaale wixii dheef ah ama kam ah waa inay wada helaan waxaan ku raacsanahay ragii yiri A" hala mideeyo B" hala mideeyo C" hala mideeyo D" hala mideeyo anigu sababta qaar looga tegayo ma fahmin halkaas taas halkaasaan dhigayaa.

Waxaa lagu kala saari karaa marka la qiimeeyo ayay kala tegi karaan mida kale waxaa jira degmooyin ilaa Ingiriiskii Degmooyin ahaa goormaa la qiimaynayaa intaasoo sanadood baynu maraynaa sow waxa inaan taariikh leenahay maaha History aynu leenahay maaha dib in loo eego maaha dhawrkii sanoba dib loo eego maaha waxaa laysku gefayaa waa adeeg xukuumadu gelaysay weeye dalku inuu kala tago kala hormaro maaha mana qabo sidaad awgeed, Gar-adagoo kale Badhan oo kale kuwa noocaasaa Ingiriiskii Degmooyin ahaa Sheekh oo kale xaqbay u leeyihiin inay sii fadhiyaan maaha taa halkaasaan kaga gudbayaa.

**Qiimaynta iyo Kala Xadaynta** halkan waxaa lagu soo qoray waxaa lagu kala xadaynayaa oo ay xukuumadu soo qortay 3 Sanadood waa siday weligeedba u taagnaato Xukuumad walbana ta ka danbaysay isu dhaafinaysaa.

**Soo Jeedin:-** waxaan soo jeedinayaa in lamagacaabo Komishan heer qaran ah oo mudo 2sano ah kusoo dhamaystira qiimaynta iyo kala xadaynta Gobolada iyo Degmooyinka hadii kale dal madaxa laysku wada geliyuu noqonayaaye lagu kala bixi maayo murankoodaa taagnaanaya. Waxaan kaloo soo jeedinayaa sidaa ku cad sharciga Degmooyinkaa D" ilaa inta la qiimaynayo ay qiimayn gelayaan 5km oo xuduudooda ku ekaadaan taasna sidaasaan leeyahay.

**Qodobka 18aad** oo ka hadlaya Waajibaadka Gudoomiyaha Gobolka halkaa uu ka hadlayay Kijaandhe Gudoomiyaha Gobolku waa ninka dawlada dhexe uga masuulka ah

Gobolka had iyo jeer halkaas ay cabasho ka jirto tixgelin badan inaanay qabin Miisaaniyad badan inaanay lahayn halkaa waxaa ku qoran xeerka waa in lasiiyaa Farqada D" baan u malaynayaa miisaaniyad ku filan isla markaana ay ka muuqataa Wasaarada Arrimaha Gudaha lafteeda ay ka muuqaataa.

**Qodobka 21aad** xidhiidhka laamaha dawlada ee dhexe ee heer Gobol iyo Degmo adeega bulshada in la dhaadhiciyaa waa daruuri Wasaarad walba inay dhaadhiciso budget keeda ka mid ah ay u dhaadhiciso si uu umada adeegu u wada gaadho Gaar ahaan waxbarashada iyo Caafimaadka taasi waa daruuri waxaanku raacsanahay waxaan ku raacsanahay halkaas la yiri waa inay ka muuqaataa miisaniyada dawladaha hoose waa in wasaaradahaa Development ay geeyaan adeegyadooda ilaa heer Gobol ilaa heer Degmo.

**Qodobka 22aad** xubnaha golaha degaanka tirooyinka waxaan anigu ku raacsanahay in la dhimo waxaana raacsanahay qaabkan ay xukuumadu kusoo qortay meselan hargaysa oo kale 17 xildhibaan Degmooyinka kale ee A" ah 13 xildhibaan B" 11 xildhibaan C" anigu waxaan ka dhigi lahaa 7xildhibaan D" 5 xildhibaan labadaas meelood baan waxka bedeli lahaa inta kale sideeda ayaan u dayn lahaa waayo culays dhaqaalay leeyihiin taladoo baahday leeyihiin waxbadan masoo kordhin piratical baan u aragnay markaa in la yareeyo waa daruuri.

**Qodobka 24aad:-** Mudada Xilka Golayaasha Degaanka 5sanaa halkaas ku cad hadii doorashooyin ku ay qabsoomi waayaan, Gobol iyo Degmo waa lakala diri karaa buu Dastuurku Qabo laakiin Gobolada dhamaan halaka duruuf saamaxaysa ma arko hadii nidaamka halagu celiyo Xoghaye iyo Gudoomiye dib ayaynu u noqonay Dastuurkii ayaynu meel kaga dhacnay ayaan qabaa anigu.

**Soojeedin:-**

- Waxaan soo jeedinayaa oo aan qabaa oo aan raacsanahay, hadii Doorashooyinkoodu qabsoomi weydo Qiimaynteeda iyo Goaan ka gaadhisteeda inay leedahay Golaha Guurtidu isla markaana xukuumadu ay soo jeediso.

**Qodobka 28aad: Dhawrsanaanta Xubinta Golaha**_Gole lasoo doortay oo Umadi soo doorátay oo Shacabku Vote-kiisii siiyay weliba Duruufaha aynu ku suganahay anigu markaan qiimeeyo iyo Xaaladeena marka aynu meel fog gaadhno mooyaane, Sababta dhawrsanaanta looga qaado garan mayo oo laba nin oo kamid ah loo siiyo Maayarka iyo Maayar ku xigeenka taana ma waafaqsani waxaan leeyahay sidaa haloo daayo.

**Qodobka 32aad: Iscasilaada Mudanaha** Qaabka ay u qoran tahay Wuxuu soo gudbin karaa Duqa Magaalada ayaa goaan ka gaadhaya anigu waan khilaafsanahay waxaan qabaa Xubintu markay Istiqaalada dhiibto inay u gudbiso iyadoo qoraal ah, oo

sababaysan Duqa Golaha Degaanka isla markaana isagu uu soo hordhigo Golaha oo halkaas ay u ogolaadaan inuu isagu uu Move Gareeyo Taasna waanka soo horjeedaa.

**Qodobka 33aad Xilka Qaadista Gudoomiyaha Golaha Degaanka iyo Ku-xigeenkiisa** 2/Majoorati anigu waxaan leeyahay halaga dhigo kala badh iyo haldheeri Madaxda ka saraysa ee Qaranka  oo dhan ayaa la fududeeyay sabab loo adkeeyaa ma jirto dadkuna wada qayral Masuul maaha qodobada u qoran sharciga ayaa lagu qiimaynayaa oo sharciga lagu qaadayaa.

**Soo Jeeedin:-** waxaan soo jeedinayaa oo aan adkaynayaa **Absulate Majorate** halaga qaado ayaan odhan lahaa.

**Qodobka 98aad Kabka Dawlada Dhexe**_Halkan waxaa laga dhawajiyay kab baad dawladaha dhexe siisaan waxaa kaloo laga dhawaajiyay in degmooyinka in degmoyinka qaarkood in 10% kastamada ka qaatan halkaas dulmi baa ku jira taasi waa Wanweyn Subag ku shub sabab degmooyinka waa weyn ee koray ee publishingku iskugu yimid ee dhaqaaluhu uu kuso ururay ee lehna 10% waan qaadanayaa 10% kastamkaan ka qaadanayaa halkana 10% baanka qaadanayaa taasi cadaalad maaha dalku wuxuu u baahan yahay dhaqaale soo gala in si cadaalada loogu qaybiyo waxa uu u baahan yahay in mudnaantiisa la eego, wuxuu u baahan yahay in baahiyihiisa la eego Degmooyinkaa C,D,B waxaa laga yaabaa in ay duruufo gaar ahi ay haystaan inaanay guryahan baraha badani ku ool, inaan kastamo ku ool inaan inaan beero ku ool laakiin, publishing ay leeyihiin miyaa la dayacayaa waxay ukala mudan yihiin D,C,B waa in mudnaanta la siiyaa.

**Soo Jeedin:-** waxaan kaloo soo jeedinayaa Gobol walba Resourceska uu leeyahay waa in lagu cashuuraa oo uu 10% uu Goostaa Gobolada leh **livescore** waa in xoolaha 10% uu goostaa waa in kastamadooda lagu cashuuraa xooluhu ay halkaas ku nastaan Togdheer, Sanaag, Sool Gobolada xoolaha oo dhan leh waa in 10% ay halkaas ku goostaan.

Magaranayo sabab inta halkaas laga qaado Berbera loogu Cashuurayo sharcigaa midaynta cashuuraha Dulmi buu dalka ka galay waa in la baabi'iyaa xeerkani wuu baabi'iyay waan taageersanahay.

**Qodobka 107aad Baabi'inta iyo Laalista ee** xeerkaa midaynta cashuuraha tirtiree xeerkaasna sidiisaan ku taageersanahay Qodobkaasi dalkuu is dhaafiyay Dulmi baa ku jiray sidiisaan ku taageersanahay, waxaan Gudoomiye kaga baxayaa oo kusoo Gaba-Gabaynayaa sharcigani waa sharci balaadhan waa sharci muhiimadiisa leh Guddi Anrugment ah oo isku soo duba rida oo Golaha soo hordhigta oo dad Expert ah waa in loo qaybiyaa oo ay Golaha kusoo celiyaan. Wasalaamu calaykum waraxmatulaahi wabarakaatu

**Md. Axmed Maxamed Diiriye (Nac-nac)“2 min 04sec”**Gudoomiye intaanan Xeerka u galin, waxaan idiin sheegaya xildhibaanadii la sood doortay baynu nahay, qarankaynu u taaganahay, meel halkan ah oo xaafad la xaaqay oo sidii bariii siyaad barre loo galay ayaan idiin sheegayaa.

**Gudoomiyaha:-** Xildhibaan Xeer baa laga doodayaa Xeerkuun ka hadal.

**Md. Axmed:-** waxa kale oo aan ka hadlayaa Xeerkan waan waafaqsanahay intiisa badan, gudoomiye waxaa jira Wadanka ereteriya meeshii laga xoreeyay ee daabiyada ahayd waxay ku qoreen magaca lacagtooda, Itoobiya sidaas oo kale ayay ahayd, marka maxaa inaga inoo diiday Meeshii dalka laga xoreeyay ee lagu soo wada-qaxay ilaa Ceergaabo in degmooyinka iyo Gobolada oo dhan laga wada horeysiiyo, waxaan leeyahay war hadhow iyaduun baa lagu soo qaxayaa hadii wax kale dhacaane waa in laga dhigaa A+ iyada iminka Biyo ma laha oo Laydh ma laha oo waddo male, markaa waxaan soo jeedinayaa muhiimad ha la siiyo sidaas Ereteriya iyo Itoobiya, marka anigu taas uun baan ka hadlayaa oo waxaan leeyahay Gudoomiye Degmooyinka Ada ah waa In Baligubadle laga horeysiiyaa dhamaantood.

**Md. C/qaadir Jibriil Tukaale“10min 41sec”**kolay Markaan eegay ee aan qodobadiisa intooda badana akhriyay, waxaan ku soo koobay intaan wax ku darayo.

**Qodobka 1aad** ee Magaca Xeerka ee Gudiddu soo jeedisay, magaca Xeerku inuu sidiisii ahaado ayaan taageersanahay oo uu ahaado sidiisii, wax ka badalka iyo kaabistu magac noqon maayee waxay noqonaysaa hawshii xeerka laga qabtay.

**Qodobka 6aad** ee Qaaba-dhismeedka Dalka, Xeerkani wuxuu ku eegyahay Gobolada iyo Degmooyinka oo intaas muu dhaafin, waxase loo baahan yahay madaama laga hadlayo maamul daadejin, adeegyada bulshada oo dhan dhibta ugu waayn ee haysataa waa waxan la yidhaahdo -**kitmen areas**, Wasaarada Caafimaadku waxay la soo baxday qaab ay u eegayso bulshada ay shaqaynaysaa tiradoodu hadba intay baaxad le’egtahay **kitmen areas**.

Marka sidaas oo kale dhamaan adeegyada bulshada ee waxbrasho, nabadgalyo iyo wixii la mid ahi baahi bay u qabaan in maamulku halkaas ka sii dhaadhaco. Dastuurkeena Qodobka 111aad farqadiisa saddexaad waxay ka hadlaysaa Gudoomiyaha Degmadu isagoo la tashanaya Golaha deegaanka wuxuu maamul u samayn karaa oo magacaabi karaa gudidda horumrinta heer degmo, waxaan halkaa ka dhigay sidaynu naqaan Gobol walba wuxuu kooban yahay laba degmo iyo wixii ka badan, degmo kasta waxay ka kooban tahay tiro tuullooyin ah, tuullooyinkaas waxaa loo baahan yahay in tiroba la isku daro oo zone laga dhigo oo loo sameeyo wax la yidhaahdo Gudidda horumarinta zonekaas ama shantaas degmo, markaa saddex ilaa shan degmoba waxay samayn karaan Zone, tulo kastana waxay yeelanaysaa gudi horumarineed oo gudoomiyaha degmadu

magacabo, markaa sidaas ayaa degmo kasta lagu gaadhsiin karaa maamul daadejin iyo adeega bulshadu gaadho

Markaa Qodobkaas 6aad degmooyinka waxaa ka hoosaysnaya zones, tuulooyin, tuullooyinka waxa ka sii hoosaynaya clusters ama xaafado (villages), marka qaab-dhismeedkoodu inuu halkaas raaco ayaan soo jeedinayaa.

**Qodobka 8aad** siday u soo dhigeen waxaa loo baahan yahay markuu Xeer yahay wuxu inaanu waxba ka tagin, iyagu waxay yidhahdeen qiimeynta xeer-nidaamiyaha waxa soo samayn doonta Wasaarada Arrimaha Gudaha, Wasaaraduna waxay u gudbin doontaa Golaha Wasiirada, golaha Wasiirada oo madaxweynuhu gudoominayaa wuxuu ansixnayaa, halka waxaa ku qoran way gudbinayaan hadhowna waa la isku qabsanayaa aad uma cada sidax xildhibaano badan baa soo jeediyay in xeerka dib loo eego oo qodob loo eego fasiraadiisa hadii kale dhib badan baa ka imanaysa.

**Qodobka 22aad** ee tirada Golaha Deegaanka, marka tiradaas anigu waxaan ka dhigi lahaa Caasimahadu inay yeelato 19 xubnood, degmooyinka A ahina yeeshaan 15, Degmooyinka Bda ahina 13 Xubnood, Degmooyinka C ahina 9 xubnood, Degmooyinka D ahina yeeshaan 5 xubnood, tiradaasi waxay simaysa siday iminka u yaaliin tiro mid ah bay is dheeryihiin, tirona waynu ka dhinay oo degmo kasta 6 xubnood baan ka dhinay, halkan ay A+ ka dhigeena ma jirte dastuurku wuxu jideeyay Hargeysa inay tahay Caasimadii Qaranka waana loo aqoonsan yahay, degmooyinka Ada ahna kuma jirto kuma milmi karto.

**Qodobka** Qoondoonyinka kabka, sida Xildhibaankii iga horeeyay uu sheegay waxa jirt isku dhex dulmanaan degmooyinka ah, waxa weeye dalka oo dhan maaha degmo heblaayo waxba ma soo saarto, tii aan waxba soo saarin in la kabaa fiican, anigu qaabkan loo soo dhigay inta A ah inay isku qiiimo laga dhigaan soo jeedinayaa hadii ay ka tagi waydo degmooyinka kastamada leh ee dakhliga badani soo galo ee hela 10% dakhliga ay cashuuraha ku qabanayaan inay intas ku hadhaan (10%)kaas ama tan kabka ay ku hadhaan, tusaale ahaan Saylac iyo Oodwayne dee Saylac oo dakhli soo saarta inay Oodwayne ka sii hoosayso baa meesha ugu qoran oo Oodweyne waa 2.5, Saylac oo dakhli soo saartana waa 2, waa khaladaadka meesha ku jira, marka degmooyinka Saylac iyo in ugu yaraan 3 la siiyo, Degmooyinka waawayn ee dadka badan inoo haya ee ka mid yihiin Boorame iyo Laascaanood waa inay ugu yaraan 6 helaan, kuwan dakhliga badan soo saara waxaan xasuusta Berbera marar badan oo aan booqanay waxan ogaanay in aanay kabka haleelinba waayo meel badan oo kale ayay wax ka soo galaan, marka waa in sidaas la isugu habeeyaa oo degmooyinkaas culayska badani saaran yahay muhiimada la siiyo.

**Waxaan kaga baxayaa oo aan soo jeedinayaa:-**

- Xeerkan oo aad muhiim ah in Guddi gaar ah (ad hoc committee) loo saaro markay dooddu dhamaato oo ay soo lafagurto meel walbana soo saxdo, markay soo dhameeyaana golaha dib ugu soo celiyaan oo Goluhu todobaad haysto, marka la soo wada akhriyo loo codeeyo.

**Md. C/qaadir Jaamac Xaamud**"6min 59sec"runtii Xeerkan si badan baa looga dooday waana Xeer qiimo badan oo balaadhan.

**Qodobka 11aad** oo hore u ahaa **Qodobka 7aad,** farqadiisa **5aad oo ah** Xuduudaha iyo soohdimaha Degmooyinka waxay ku soo ururiyeen oo yidhaahdneen, "Qiimeynta iyo kala xadaynta degmooyinka "D", Wasaaradda Arrimaha Guduhu waa in ay ku soo dhamaystirtaa muddo dhan laba sano (2) gudahood" marka laba sanadood yaa nool yaa dhintay, dadkii inay is qabsadaan mar walba maaha, waxaan halkaa labada sano soo jeedinayaa in laga dhigo **"lix (6) bilood gudahood"**in wasaaradu kaga soo baxdo oo ay qiimeyso oo Degmooyinka hada magacaaban ee wali D da lagu hayo si ay D-da uga baxaan, waayo dad badan baa qaarkood ku nool, marka si dadku aanay caasimada ugu soo ururin oo meel isugu iman in degmooyinka D iyo C muhiimad gaar ah la siiyo weeye, maalin baa iman doonta ay hodon noqonayaan, laakiin inta kuwan la kobcinayo oo waxba lagu soo ururinayo dalku isu soo gaadhimaayo, marka si la isu soo gaadho waa in kuwaas la horumariyaa.

Marka waa in lix bilood gudahood lagu soo ururiyo, waayo, waxaynu ognahay kala xadayntii in badan bay taagnayd, marka doorasho dhacayso uun baa la or-ordaa, waa in inta ka horaysa laga sii shaqeeyo oo waliba sida XIldhibaanadu soo jeediyeen in Gudi loo saaro oo inta doorashada ka horaysa qodobkaas xal laga gaadho.

**Qodobka 28aad** ee Xasaanada ka hadlaaya, xasaanada intii Somaliland jirtayba XIldhibanada deegaanku xasaanad bay lahaayeen, nin saaxiibkay ah baan waydiiyo wuxuu ii sheegay in caalamka sidaa laga dhaqmo, waa dhab, laakiin dee caalamka waxba iskumaynaan darsan, sabab loo kala qaado oo midna loo siiyo midna loo diiyo ma jirto, Dastuurkayna ka hor imanaysaa, wixii dastuurka ka hor imanayaana waa waxba kama jiraan.

**Qodobka 22aad** ee tirade Xubnaha Deegaanka, A+ meel ay ka jirta ma jirto, dastuurkaana xeerarka oo dhana waxaa saldhig u noqonaya dastuurka, wixii dastuurka ka hor imanayaana waa waxba kama jiraan, laakiin marka Caasimada waxaan jeedinayaa dadkii oo dhan baa isugu yimiye waa in 25 xubnood laga dhigaa si qof walba isaga soo sharaxdo, tirade xubnaha kale ee degmooyinka iyaga waan taageersanahay, Degmooyinka D in xaq la siiyo oo kor loo soo qaado weeye, waayo degmooyinka qaarna inay koraan qaarna down noqdaan macno samayn mayso, dalkuna inuu hore u socdaa fiican.

**Qodobka 89aad** ee ka hadlayaa kabta, halka Degmooyinka D ah laga siiyay 0.5 waxaan siin lahaa 2.5% waayo sababtu marna waxba lama siin dastuurkuna wuxuu sheegayaa in

khayraadka dalka lawada leeyahay, sidaan hore u sheegayna waxa dhici karta wakhti ay iyagu hodon noqonayaan markaa in la isu keeno oo la isasa soo gaadhsiiyo baan soo jeedinayaa oo Degmooyinka D ah tixgalin la siiyo.

Waxaan ku soo koobayaa:-

Xeerkani waa xasaasi ah oo muhiima waxaana qabaa in Gudi loo saaro oo ka soo shaqayso iskuna soo gurto, Goluhu marka la isku soo guro si fiican looga baaraan dego ayaan kaga baxayaa, Dhamaan waan idin salamaayaa WSC.

## Kal-fadhigii 39aad Fadhiyadii 22aad

**Axad, 21, April 2019**

**Quraanka: -** Md. Xaamud Cismaan Cigaal

**Gudoonka: -** Gudoomiye, Md. Baashe Maxamed faarax.

**Ajandaha Fadhiga: -** Doodda Xeerka Ismaamulka G. iyo degmooyinka, maalintii 4aad

**Md. Cabdiraxman Maxamed Jaamac (Aw-Xoog) (41min 20sec):** |Shir-guddoonka, Mudanayaasha, Saxaafada haddii ay joogto iyo haddii ay marti-sharaft idhagaysanayso, waxaan idinku salaamayaa Salaanta Islaamka. Aslaamu Calaykum Warax matulahi Wa Barakaatu.

Waxaan anigu duljoogsanayaa dhawr qodob. Guddida arrimaha Gudduhu waxay wax ka bedeleen 46 qodob oo lagu sameeyey wax ka bedel iyo kaabis.
Waxaad odhan kartaa Guddoomiyahoogiina wuu I dhinac fadhiyaaye, waxaad odhan kartaa dhalan rog xeer.

Waxaynu guddo galynaa inaynu qodobada wax ka taataabano. Qodobka ugu horeeya oo aan is leeyahay waxa ku jira khalad mabdiciya, waa Qodobka 9aad ee ka hadlaya darajooyinka degmooyinka Jamhuuriyadda Somaliland uu Guddidu ku samaysay. Kumay soo darin in Gobolka Maroodi-jeex darajada “A” ay yeelanayso magaalo Madaxdii oo Hargeisa oo kaliya ah. Waxa kale oo la soo raaciyey magaalo kale oo iyadana “A” la siiyey.

Jamhuuriyadda Somaliland waxay u qaybsantaa lix Gobol (Six Regionl). Lixdaas Gobol oo kala ah; Gobolka Maroodi-jeex, Gobolka Togdheer, Gobolka Sanaag, Gobolka Sool,

Gobolka Saaxil iyo Gobolka Awdal Waa lix Gobol doorasho. Lixdaa Gobol waxay u kala qaybsamayaa degmooyin darajooyinkoodu kala yihiin A, B, C iyo D. Magaalo madaxda halkaasay ku caddahay, waa Qodobka 9aad farqada 3aad.

Magaalo maxada Gobol kasta darajadeedu waa A; Hargeisa waa A, Burco waa A, Ceerigaabo waa A, Berbera waa A, Laascaanood waa A, Booramana waa A. markaa degmadan kale ee A la siiyey kuma cadda Qodobkan 9aad. Sida ku xusan Qodobka 14aad ee xeerkan iyo Qodobka 109aad ee Dastuurka farqadiisa 3aad oo ku xusan qaab dhismeedka wax ka bedelka tirada Gobolada iyo Degmooyinka Somaliland, waxay leedahay lix Gobol doorasho oo sharciyeysan oo lagu dhaqmo.

Gobolo loo bixiyey hab siyaasadeed ama marka Xukumadu is tidhaa doorasho ayaad gelaysaa ay bixiso Gobol sharci maaha. Waxa sharciya xukumadu waa inay inoo keentaa Gobolada oo iyadu soo sharciyeysaa, ka dib Golaha Barlamanka u soo gudbisaa oo la sharciyeysaa. Waxa kale oo uu odhanayaa isla qodobkaasi, waxa kaloo jira 23 degmo doorasho oo Magaalo Madaxda ee Gobolka oo kaliya ayaa leh A. markaa anigu waxaan qabaa in aynaan ku dawakhin ilaa xukumadu kala xadaynteeda iyo kala magacaabisteeda ay sharci ka dhigayso.

Lixdii degmo ee barrigii Ingiriisku inagaga tagay ayuunbaa lix Gobol laga dhigay, lixdii Gobolna Caasimadaa ayaa "A" la siiyey. Waxaana weeyaan haddaanu anagu nahay reer Hargeisa in magaca caasimada laga tuuro waanu ka soo horjeednaa, anigu waliba haddaan ahay Xildhibaan laga doorto Gobolka Maroodi-jeex waan ka soo horjeedaa. Waana in la raaciyo Caasimada Hargeisa oo ah Degmada Hargeisa, ahna Caasimada Jamhuuriyadda Somaliland.

Waxa kale oo aan raacin lahaa caasimada labaad oo ah Burco waana in lagu caddeeyaa xeerkan, waan in la yidhaa Caasimad ku xigeenka Jamhuuriyadda Somaliland waa Burco, si aan waxba la isugu qab qabsanba. Reer Burcana way seconded gareeyeen, laakiin Hargeisa seconded waxba ugama baahni oo Dastuurka ayaa yeeshay.

Waxaan ka horaysiinayaa qodobka ay Guddidu wax ka bedelka ka bilaabeen oo ah Qodobka 2aad. Qodobkan 2aad waxa lagu soo kordhiyey ereyga "**Xildhibaan"** oo waa la isku qoonsaday. Imika qof loogu yeedho Xildhibaan, waxay dadku is weydiinayaan ma xildhibaan Guurtida ahbaa mise waa Xildhibaan Golaha Wakiilada ah. Kalmadan afsoomaaliga ayaa naga dhexaysiiyey, markaa guddidu may qaldanayn haddii ay halkaa geliyeen oo iyaga laftoodu ama inaga oo dhammi u weynay macnaha.

Kalmada MP Waa member of Parlaiment. Golaha Wakiilada qofka ku jiraan waa wakiil. Imika waxaynu qaadanay habka Maraykanka oo wuxuu odhanayaa Congress man ama

Congress woman, markaa aniga in la iigu yeedho wakiil ayey noqonaysaa. Markaa inagu Congress uguma yeedhnee waxaynu nidhaa Golaha Wakiilada.

Golaha Guurtida waxa loogu yeedhaa (Senator) waa Af-qalaad. Golihii Magac u yaalka ahaa ama magacan Xildhibaan wuu inaga dhexeeyaa inaga iyo Golihii deegaanka oo "Councilor" ayey qaws soo geliyeen, waliba uma hayno eray oo waa mid aad u dheer. Xubin gole deegaan waa erey bixin aad u dheer, markaa ereyga "Councilor" waa in loo helaa erey bixin aad u mugweyn, si looga duwo title xildhibaan. Markaa sida la igu wargeliyey dastuurku inaguu xildhibaan inoo aqoonsan yahay. Markaynu inagu qaadano xildhibaan, waa in Golaha deegaanka mid loo helaa.

**Qodobka 9aad** oo hore u ahaa **Qodobka 5aad**farqadiisa 2aad oo u dhiganta sidan "Gobolkiiba wuxuu u qaybsamayaa degmooyin" waxay yidhaahdeen waxa laga saaray kalmada "**Magaalo Madax"** oo isna darajadeedu waa A. waan kuwan hoos ku qoran. Waxaan leeyahay Magaalo Madax ha loo daayo, Hargeisana ha loo daayo Caasimada.

**Qodobka 11aad** Soohdimaha iyo Xuduudaha Gobolada iyo Degmooyinka. Guddidu waxay yidhaahdeen waa in lagu soo koobaan qiimayntaas laba sanno guddahood. Hadda ka hor waxaynu siinay xeerkan laba sanadood oo aan lagu soo dhamayn.

**Waxaan leeyahay** "haddii qiimaynta Gobolada iyo Degmooyinka ku soo dhamayn waayaan labo sanadood, waa in loo daayaa sidii Xukumadu soo jeedisay ee saddexda sanadod ahayd.

Markaa mar kasta way ka habsaantaa oo waxay u baahan tahay dhaqaale, oo mid kastaa wuxuu doonayaa in uu degmo yar samaysto, markaa waxaan leeyahay ha loo daayo saddexdii sanadood ee xukumadu soo jeedisay.

**Qodobka 15aad;** baahinta awooda ismaamulka. Halkan xarafka 'K" waa lagu soo kordhiyey oo hore ugumuu jirin, waanay ku mahadsanyihiin lagu soo kordhiyo waana dastuuri oo dastuurka ayey ku qoran tahay **Qodobka 110aad, 111aad** iyo **112aad** ee ismaamulka Gobolada iyo degmooyinka. Waxaase Guddidu ka tagtay tamarta ama laydhka. Xarafka K "Horumarinta Isgaadhsiinta, adeega heer degmo" markaa war Isgaadhsiinta iyo Tamarta". Degmooyinku waxay ka dhursugayeen "Primary Education, primary health care, water and electricity". Waa caalami in waxbarashada, Caafimaad, Biyaha, Isgaadhsiinta iyo Laydhkaba waxa maamuusha degmada.

**Qodobka 2aad:** Gobolada iyo degmooyinka. Halkan waxa la yidhi Hargeisa darajada A+, B+ ayaa haddana soo baxaya, C+ ayaa haddana soo baxaysaa. Markaa balaastani waxbay wareerinaysa. Hargeisa ha loo raaciyo Caasimada Hargeisa si ay u hesho xildhibaano dheeraad ah, maxaa yeelay dadkii oo dhan ayaa halkan isugu yimid,

laakiin anigu balaaskaa waan ka saari lahaa oo ha loo daayo Caasimada jamhuuriyadda Somaliland waa Hargeisa.

Halkan waxa ku qoran Goloyaasha deegaanka. Golayaasha deegaan waa la yareeyey, waxa la yidhi degmada Hargeisa 15 xubnood, degmooyinka darajada "A" waa 11 xubnood, B waa 9 Xubnood, degmooyinka darajada C waa 7 xubnood, degmooyinka daraja D waa 5 xubnood.

Halkaas Caasimada ku xigeenkii oo Burco ah ama Magaalo Madaxyadii Gobolada ayaa waxa lala simay degmada Gabliey oo 11 xubnood la siiyey, halkaasi caddaalad maaha. Bedka ay leedahay degmada Gabiley ninka tagay ayuunbaa garanaya, markaa 11 xubnood ee Burco la siiyey maaha in la siiyo Gabiley oo wali waxay ka tirsan tahay Hargeisa oo Gobolka Maroodi-jeex ah.

Degmadu waa caasimadaha Gobolada sida Burco iyo kuwii kale ee aynu hore u soo sheegnay. Markaan Hargeisa 15 xubnood siiyo xageed Gabiley "A" u siisay, waxaynu hore u maqalnay Somaliland la wada leeyahay iyo Horaa loo soconayaa.

Waxa kale oo halkan ku qoran muddada xilka Golaha deegaan. Xubnaha golaha deegaanka ee cusub waa inay ku soo doortaan Duqa iyo Ku xigeenkiisa muddo 14 cisho gudahood ah. Waxaan leeyahay 14 cisho way yar tahay, waxaan ka dhigi lahaa **"in muddo 30 cisho ah lagu soo doorto Maayirka iyo Ku xigeenkiisa".**

Qodobka 28aad: Dhawrsanaanta xubunta. Qodobkan waxa laga saaray farqada 3aad oo u dhignay sidan "**Xubinta Golaha lama qaban karo haddii aan ogolaansho laga haysan Golaha ama faldambiyeed faraha kula jirin".**

Waxa loo bedelay: "**Duqa degmada iyo ku xigeenkiisa oo kaliya ayaa leh xasaanad, inta ay xilka hayaan. Xubanaha kale ee Golaha deegaanku wax xasaanad ah ma yeelanayaan, waxaan loogu yeedhayaa xubin Gole deegaan".**

Waxaan soo jeedinayaa **"in farqadan aan laga saarin meesha, xubno Gole deegaan oo isku mid ah oo la doortay oo iyagu iska dhex doorta Duqa degmada iyo ku xigeenkiisa, qaarna lama siin karo xasaanad qaarna waa la siinayaa meesha ma taalo".**Waxaan leeyahay Golaha deegaanku xasaanada ha wada yeeshaan.

Haddii duqa iyo ku xigeenkiisa lagu soo eedeeyo Hanti lunsi, fal lidi ku ah Qaranimada Somaliland, xil ka qaadistooda waxa ogolaanaya Madaxweynaha Jamhuuriyada Somaliland, iyada oo loo raacay habka Golaha Wasiirada xilka looga qaado.

Golaha deegaanku Xukumada kamma tirsana, Golaha Wasiirada kamma tirsana, waa Gole ay dadku doorteen oo dawlada hoose la yidhaa. Markaa Madaxweynuhu xilka aniga igama qaadi karo, aniga Xasaanada waxa iga qaadi karra Golahayga, iyagana

waxa xasaanada ka qaadi karra Golahooda. Haddii la soo eedeeyo Gobolka ayaa loo gudbinayaa Gobolka ayaa baadha, Guddi baa loo saaraa ka dibna waxa la yidhaa ninkaasi dambi ayuu galay, Golahaa lagu celiyaa Golahaa ka qaada. Markaa haddii iyagu diidaan cid ka qaadi kartaa ma jirto.

Markaa Goluhu waa Gole la soo doortay ma haboona in la yidhaa waxa xilka ka qaadaya Madaxweynaha, waxaan soo jeedinayaa in aanu madaxweynuhu shaqo ku darsan waayo waa Gole la soo doortay.

**Qodobka 29aad:** waayida iyo bannaanshaha xubinta Golaha. Shuruudaha ka reeban laguna waayi karro xubinta wax aka mid ah:
Haddii shuruud ka mid ah shuruudihii lagu soo doortay ay burto, markaa waxay ahayd halkaas "Inuu abuurro ama ka qayb qaato fal lidi ku ah nabadgelyada iyo xasiloonida Qaranka" meeshani waa meesha Dictator-nimadu ka dhalato ee la isugu soo dhuunto.

Haddii uu ka qayb qaato mudaharaad oo la yidhaa xasiloonida iyo nabadgelyada ayuu wax u dhimaya. Dastuurka ayaa ogol in aad mudahaard salmi ah aad samayso, ood ku cadayso hadal bannaan bax. Kalmadaasi **xarafka "C" qodobka 29aad** ma cadda.

**Waxaan soo jeedinayaa waa qodobka 29aad Xarafka"C"** laga saaro, waan in la cadeeyaa nabadgelyada xumada uu sameeyey noocay tahay, waayo hadalka iyo qoraalo maaha xasilooni darro. Waxaan ku sababaynayaa dastuurka ayaa u damaanad qaaday inoo fikirkiisa cabbiri karo.

**Qodobka 33aad:** kala dirida Golaha. Qodobka 33aad **farqadiisa 3aad** "Haddii Doorashada Golaha deegaanadu ku qabsoomi waydo xiligeedii Golihii hore ayaa xilka sii haynaya, inta laga soo dooranayo Gole Cusub" waxa qiimaynaya kana go'aan gaadhaya Golaha Guurtida, ka dib marka Golaha Xukumadu sidaas soo jeediso.

Golaha deegaanku hadda waxay ku fadhiyaan muddo kordhin, muddo kordhintaas markii loo kordhinayey waxa laga gaadhay heshiis wax la yidhaa saddexda Xisbi Qaran, Golayaashu iyo Xukumadu ku heshiiyeen ayuunbaa la yidhi ha la raaciyo Doorashada Golaha Wakiilada. Markaa ilaahay ayaa oge waxay ku heshiiyeen Golaha Guurtida ayaa laba sanno u kordhisay oo markaa xeer looma ahayn.

Waxaan soo jeedinayaa Golaha Wakiiladu waxa uu ansixiyaa Koomiishanka Qaranka, Golaha Wasiirada, Madaxda hay'adaha gaarka ah. Wax alle wixii xukumadaas ka soo baxa ee ay Magacawdo inagaa ansixina. Maxaa inoo diidaya inaynu ka talo bixino oo aynu ansixino, ka dib marka madaxweynuhu inoo soo gudbiyo. Waxaan leeyahay barrigii dhawayd ayey xuurteeyeen Guurtiduye ka daaya'oo awalba inaguu

madaxweynuhu inoo soo diri jiray cida uu magacaabee, mar haddii ay tahay wax cusub ha loo soo gudbiyo oo Golaha Wakiilada qaraar ha ka gaadho.

**Qodobka 44aad:** Xilka iyo Awooda Duqa. Qodobka 44aad oo hore u ahaa Qodobka 40aad waxa lagu darray Ereyga, "**Guddoomiyaha Degmada ahna Duqa"** Guddoomiyaha maaha oo duqa degmada ee Gobolka, sidoo kale waa Guddoomiyaha Hay'adaha laamaha dhexe ee dawladda ee Degmada waana sax. Guddidu Caasimada Magaalo Madaxda Gobolada way u ogolaatee, maxaa magaalo Magaalo Madaxda Hargeisa ugu diideen Caasimada.

Isla **qodobkan 44aad farqada 2aad Xarafka "Q**" waxa laga hadlayaa Gobolada "Wuxuu ogolaadaa, sidoo kalena saxeexaa kharashka bixinta Jeega iyo foojarada" anigu maan arag Duq isagu ogolaadaa oo kaligii saxeexa. Adduunyada waxa jira qof la saxeexa oo waxa la saxeexa Xoghayaha fulinta.

**Qodobka 49aad:** Magaacibta iyo Xil ka qaadista Xoghayaha Fulinta. Xoghayaha Fulinta ee Dawladda hoose waa sarkaal ka tirsan Wasaarada Arrimaha Guddaha. Magacaabistiisa iyo xil ka qaadistiisa waxa is leh Wasiirka Arrimaha Guddaha. Markaa Xoghayaha Gobolka waxa ku qoran Wasiirku wuxuu xilka ka qaadi karaa markuu la tashado Guddoomiyaha Gobolka, halkan waxaan soo jeedinayaa in lagu darro **"Wuxuu xilka qaadayaa fulinta ee deegaanka markuu la tashado maayirka".** Way kala madax bannaan yihiin, laakiin ma xuma haddii uu la tashado.

**Qodobka 69aad farqadiisa 4aad** Madaxda Qaybaha iyo Madaxda Laamaha waa magacaabistii iyo sidii loo shaqaalaynayey dadka. Xoghayah fulintuu wuxuu leeyahay awood fulineed (Executive powers). Markaa waxaan ku darrayaa waa **"Xoghayuhu soo jeediyaa shaqaalaha dawlada hoose qoranayso, ka dibna laga ansixiyaa Golaha deegaanka Degmada, isaga oo la tashanaya Guddida fulinta".**

**Qodobka 65aad** waxa ku jira kalmada **"Sharci dejin"** haba yaraatee inaga oo eegayna dastuurkeena oo ku salaysan diinta Islaamka mar walba waxaynu isticmaalaynaa **"Xeer-dejin"** markaa **Qodobka 65aad** ciwaankiisa waxa laga dhigay, **awooda sharci-dejinta**: waxaan leeyahay ilaahay ayaa sharciga dejiya. Inagu xeerbaynu dejinaa, waxaan leeyahay halkaas ha laga dhigo "**Xeer-dejin".**

**Qodobka 89aad** waxa ku qoran dakhliga ay dawladda dhexe siiso Dawladaha hoose oo ah dakhliga ay ka helaan miisaaniyada oo kabka dawladaha hoose. Waa in loo qaybiyaa iyada oo lagu salaynayo noocyada darajooyinka degmooyinka shuruudaha ay ka mid yihiin tirada dadweynaha. Halkan waxaan arkayaa anigu waa wixii maxkamadu mabnuucday 2005 oo ahayd in la sameeyo tira koobka Guud, tiina wali lama samaynin. Markaa laguma salayn karro wax kale oo lagu saleeyo mooyeene,

markaa ha laga saaro tirada dadweynaha, tuulo afarta cariish wuxuu ku odhanayaa yaa la tiriyey anagaa ugu badane.

Horta qodobadani waxay ku socdeen lamabaro caadiya oo ah 1,2,3,4,5,6,7. Waxa imika halkan iiga soo baxay far ku qoran “Roman Figure” X, I, P. markaa qodobka 89aad iyo Qodobka 90aad waxbaa la galiyey. Waxa la siiyey degmooyin kooban “Customs Duties”

**Md Cabdilahi Xuseen Cige (Point of Order).** Guddoomiye halkaas uu ka hadlayaa waa xeer 12. Xeer 12 baa wuxuu u qoran yahay qodobadiisu sidan, **“Qodobkan waxa lagu nasakhayaa oo lagu bedelayaa xeer 12 sidii uu dhigayeybaa kan lagu bedelayaa**” markaa xeer 12 sidii uu u dhignaa lama bedelayo karro waa inuu siduu u dhignaa xeerkaasi la soo qaataa oo halkan lagu sheegaa.

Waa da,wakh oo waxa la odhan karaa qodobkaasi wuu ka yimid xeer 12 wuxuu ahaa sidan, waxaan loo bedelay sidan ileen kuwii horeba waynagan leh kaasi qodobkaas ayuu ahaa qodobkaas ayaa loo bedelay.

Haddana kastamadu waxay qaadi doonaan 12.5% lacagta Customs duties-ka, waxaana la siin doonaa degmooyin kooban oo kastamo leh. Kastamada waxa lagu cashuuraa badeecadaha ay la soo degaan dedweynaha Somaliland barri ilaa galbeed.

Sidaa daraadeed, si siman ha loogu qaybiyo Gobolada degmooyinka wixii kab ah ama kastamis duites ha noqdeen ama kabka dawladda dhexe ha noqdee am aka dawladda hoose ha noqdee si siman ha loogu qaybiyo.

**Md Cabdilahi Xuseen Cige (Point of Order).**Cashuurtan laga hadlayo ee 12.5% horta xeerka hore inaad akhridaa wanaagsane kan maaha. Cashuuro degmooyin kale qaadan jireen ayaa markii la mideeyey ee uu mideeyey xeer 12, ayaa waxa la yidhi dawlada ha u qaado degmooyinka si kastamadu aanay u noqon mashquul. Markaa cashuurta badeecada dhoofta ayaa la yidhaahdaa degmooyin kastamkaa u qaadi jiree kan maaha, degmooyin gaar ah ayaan qaadan jiray intaan la midayn degmooyinka maahee, cashuur degmooyinka loo qaaday ahayd.

Wuu ku mahadsan yahay inuu I saxo Guddoomiyuhu, laakiin waxaan leeyahay alaabtan loo qaadayo degmoyinka gaar ah. Degmooyinka allaabta dedka ka soo dejiyaa dee imika anigu dabo-gurayaale ayaan ka furan karaa kastam oo Baligubadle ayaan ka bilaabi karaa.

Markaa haddii aan soo marri waayo kala-baydh oo haddii aad tidhaa alaabtaan Berbera kala soo dego lacag gaar ayaan u qaadayaa oo aan ku idhaa Boosaaso ayaan kala soo

degayaa. Waxaan leeyahay waar Somaliland la wada leeyahay keena tani waa tii la isku haystaye. Wasalaamu Calaykum Warax Matulahi Wa Barakaatu.

**Md Xuseen Ismaaciil Yusuf** **(13min 10sec).** Bismilaahi Raxmaani Raxamiin. Guddoomiyaha aad iyo aad ayey Xildhibaanadu u mahadsan yihiin xilkan ay iska saareen doodan maanta, in badan baynu joognoo xeerkan ahmiyad gaar ah baa la siiyey, ahmiyad gaar ahna wuu leeyahay, xildhibaandii ka hadlayna si wanaagsan bay uga hadleen, waana xeer aad iyo aad u muhiim ah.

Waa xeer haddii xaqiisa la mariyo oo aynu ka fiirsano maamul daadejin caqiibo leh samayn karaya, citiraafkeenana wax ka tari karaya waxaynu doonayno haddii aynu nahay Jamhuuriyadda Somaliland. Waa inaynu ka fiirsanaa weeye, sidaa darteed. Waxaan guddoomiye jecelahay, waxaan soo jeedinayaa haddii ay inagu qaadanayso bil iyo laba iyo saddexba in aynu ka fiirsano. Waa maamul daadejin, waa horumarin, waa nabadeglyo waa haddii aynu Guddaha iska citiraafno oo si wanaagsan Guddaha uga shaqayno refraction ay samaynaysaa adduunkana iyada ayaa inoo soo jiidaysa. Haddii ay mid iyo laba inagu qaadanayso aynu ka baaraan degno xeerkan oo ayeynaan ku deg degin.

Xeerku waa saddex waa kii hore, kii dawldda ka yimid iyo kan Guddidu soo samaysay inn la isla akhriyaana waajib weeye. Guddidu aad iyo aad ayey u dedaashay waxaanay wax ka bedeleen 48 Qodob 5 Qodobna way ku dartay. Wixii ay isku soo gureen, waxaan ka eegayaa wixii aan ka gaadhsiiyey oo dhawr qodob ah intii kale oo dhan xildhibaanada ayaa ka dooday.
**Qodobka 22aad oo tirada xubnaha Golayaasha ka hadlaya. Waxaan soo jeedinayaa Jamhuuriyad ayeynu nahay citiraaf raadinaysa, markaa waxaan leeyahay oo aan soo jeedinayaa in sideedii ha loo daayo tirada xubnaha Golaha deegaanka. Waxaan Yaan midh laga dhimin midhna lagu kordhinin.**

**Qodobka 28aad: Dhawrsanaanta Xubnaha waxaan soo jeedinayaa inuu sidoodii hore ahaado oo aan qarna la odhan ha loo daayo qaarna la odhan ha laga qaado.**

**Qodobka 29aad:** Waayida Xubinimada. Haddii xubin dambi ku kacdo ama dhaqan ha ahaado ama musuq maasuq uu ku kacay ah ahaatee. Waxay illa tahay dembiga musq maasuqa ah xildhibaanka lagu hayo waa inuu ku soo oogo Hanti dhawraha Guud, dabeeto waarankii u jaro oo uu xidho. Markaa xasaanadi waxba ka tari mayso, kol haddii uu u badheedhay inuu wax cunno oo lagu hayo oo la baadhay oo uu gacanta kula jiro. Haddii ay dhaqan noqoto oo isaga oo sikhraansan, waxa shaqo ku leh Booliska, iyada oo aan la marayn Guddoomiyaha iyo meel kalaba.

**Qodobka 33aad;** Kala dirista. Anigu **waxaan soo jeedin lahaa haddii imika aanu xeer jirin oo ay wakhtigoodiina dhammaadeen, aniga waxay illa tahay in Xukumad loo daayo oo ay gacanta ku qabato arrintooda. In ay Guddoomiye u samayso oo Golayaasha oo aan awood lahayn iska joogaan meesha, laakiin waxa rasmiga ahi noqdo Guddoomiye cusub oo la dooray in Xoghayihii fulinta iyo xildhibaanadii oo meesha iska jooga. Waxaan kaga bixi lahaa in dawladdu gacanta saarto in aan lala qaybsan Xukumada ama iyagu Golaha Wakiiladu ha u gudbiso ama Golaha Guurtida ha u gudbiso.**

**Qodobka 33aad; Xilka iyo Waajibaadka Duqa iyo Ku xigeenkiisa. Qodobkaas waxaan doonayaa in dib loogu noqdo oo ay dib u eegaan xukunkii uu lahaa Duqa degmada iyo Badhasaabka Gobolka. Awoodii Badhasaabka ayuu qabanayaa dib ha loo eego oo ha loo kala qeexo nin walba shaqadiisa.**

**Qodobka 7aad; Xilka qaadista. Waa markii hore ahaa laba saddex meelood laba meelood 2/3 ha laga dhigo hal dheeri (Absoluty majority) hal dheeri ha lagu riddo.**

**Nidaamka qoondaynta** dalka waxaan soo jeedinayaa waxa meesha ku yaala 100 degmo **oo midna la yidhi 0.5 ayaa la siinayaa, midna la yidhi waxa la siinayaa 4. Waxaan soo jeedinayaa degmooyinku isku mid maaha mid waliba waxbay can ku tahay midnaa Kalluunka caan ku ah, midbaa Xoolaha caan ku ah, midbaa beero caan ku ah. Waxaan leeyahay inta loo kordhiyo waliba oo 12.5% laga dhigo 15% budget-ka looga soo jarro degmooyinka 100 ah si siman loogu qaybiyo. Ka "A" ah ee 4-ta qaadanaya uma baahna.**

**Sakada waynu siinaa miskiinka si aanu u bakhtiyin. Degmooyinkan yar yare e degmooyinka lagu magacaabay ee dawldii joogtay ku magacawday iyo ta "A" ah, waxaan qabaa si dhib ah loogu qaybiyo oo aan midna la odhan 0.5 midna la odhan 4 in si siman loogu qaybiyo ayaan soo jeedinayaa.**

Waxaan ka hadlayaa arrin yar oo aan arkay degmooyinka sidan loo qiimeeyo. Waxa la iga soo doortay Magaalo oodweyne la yidhaahdo oo imika ku jirto "B". Waxay mar la qaadatay degmonimada meesha la yidhaa Gabiley oo "A" ah. Waxay tana "B" ka dhigay midna "A" ka dhigay waxa weeye maahmaahdiiba dhaba. Wax kale isma dheera oo Beeraha, Xoolaha waxba is dheera, laakiin waxaad moodaa dhari nin u dhaw ayaa laf kala baxa inay tahay.

Tuulayaasha maqlaya Eedaanka Hargeisa ayaa uga dhaw Horumarka kuwa ka fog fog. Meeshan Oodweyne la yidhaahdo waa "B" Tuulayaasha ay xukuntaa 65 tuule oo xuduudka ka sokeeya. Bulshada halkaas taala iyo xoolaha ay hayaan in haysaa ma jirto waliba waa "B". Waa Gobol wax ka baxaa oo Beeralay ah dad iyo duunyana aad u

badan dawladuna waa ogtahay, haddana waa “B” oo waxay qaadanaysaa 2.5%, halka Gabiley oo ay isku da’da ahaayeen oo Daaro cusub iyo dawladduna xafiisyo waaweyn ka dhistay dee waa caasimad mabruuk Alle ha u barakeeyo. Laakiin tan maxaa lagu qiimeeyey tan dad iyo duunyaba way badatay. Wax Allaale wixii xoolo ah ee Dekeda tagayaa xagan ayey soo maraan oo xoolaha Berbera iyo Hargeisa ayaa kala qaata. Xoolaha 3 meelood dekeda ka dhoofaya halkaasay ka yimaadaan oo ilaa dawaladda deegaanka Somalida ayey ka yimadaa. Oodweyne waxba lagama siin, Baligubadle waxba lagama siin, Caynaba waxba lagama siin. Wax allaale wixii sidee loo qaybiyey, waxaan leeyahay waa in lagu qiimeeyo waxay hayso. **(2 Seconded) laba mudane ayaa taageeray.**

Berbera oo kale waa in kalluun qiimeeyaa oo wax kasta waxay leedahay ha lagu qiimeeyo, oo budget-ka ha loo sinaado oo ha la eego 120M²ee ay ku fadhido. Dawga Cad wadaa loo sameeyey, Baligubadle wada la sameeyey, salaxlay wadaa la seemyey. Taasi waxayba ka dhigantahay umadda meesha ka dhiman tahay taana waanu ogaysiin doonaa. Waxaan leeyahay waxa dalka ka soo baxa ha loo sinaado.Wasalaamu Calaykum.

**Md. Maxamed Maxamuud Cumar Xaashi (12min 25sec).:-** in wakhtiga la dheeraysto si loo gaadho wax ina wada anfaca ayaan soo jeedinayaa, ugu horayn waxaan ka duulayaa xeerka ay xukuumadu keentay waayo kan ayaa Aas-aas u ah, iyada oo gudiduna wax ka soo beddeshay guud ahaan marka aan eego qodobka11aad ayaa waxaa uu u kala baxayaa 1,2,3,4 hadana meelaha qaar waxaa uu u kala baxaa A, B, C, D tusaale ahaan **Faqrada 7aad waxay leedahay** *Degmo kasta oo la magacaabo waxay xuduudaheedu ku jirayaan xuduudihii Gobolka iyo soodimihii Degmada ay ka farcantay, sida ku cad xarafyada kala ah A, B, C Ee Qodobkan*. wax A,B,C la yidhaana kuma taalo qodobkan waxaana ku taala 1,2,3, *waxaan soo jeedinayaa in la soxo qodobada noocaas ah, sidoo kale waxaan soo jeedin lahaa halka laga isticmaalayo A, B, C, iyo waxaan leeyahay ha laga Isticmaalo B, T, J, X (3mudane ayaa taageeray)*

**Qodobka 15aad: Baahinta Awoodda Ismaamulka;** halkaa waxaa ku jira qodobo badan muhiim ah, siduu uu xildhibaan Abdiraxmaan Dheere uu ku daray qodob 5aad oo ah *in tacliinta iyo tababarka degmooyinka kor loo qaado ayaan ku taageersanahay.* **Qodobka 18aad farqada** 14aad sidii ay gudidu u soo jeediyeen ayaan taageersanahay in loogu daro.

**Cutubka 4aad** Golayaasha Degmooyinka **Qodobka 22aad** waxaa uu ka hadlayaa xubnaha golayaasha degmooyinka, waxaan leeyahay sidaa ay xukuumadu u soo gudbisay ee ahaa degmada Hargeisa oo "A" ah waxaan leeyahay waa in ay noqdaan17xubnood aniga oo aan isticmaalayn "A+"-ta iyo Magaca Caasimada oo Dastuuri ah wax looga jarayna Garan maayo, Degmooyinka Darajada "A" 13 xubnood

Degmooyinka Darajada "B" Anigu waxaan odhan lahaa 9xubnood, Degmooyinka Darajada "C" 7xubnood, Degmooyinka Darajada "D" 5xubndoon, *Sidaa ayaan soo jeedin lahaa.*

**Qodobka 23aad Doorashada Mudanayaasha Farqada 3aad;** Golayaasha Deegaanku waxay ku iman doonaan Tartan doorashooyin Ee Nidaamka Saddexda Xisbi Qaran Ee loolanka Golayaasha Deegaanka, *taasi waxaan qabaa in aynu mar beddelay oo meeshii shatan (5) sanadood ahayd ee dawlada hoose ka qayb gali jireen doorashooyinka aynu toban (10)sanadood ka dhignay.* Tii wali way taalaa in kasto hada aad looga cabanayo markaa *Anigu waxaan qabaa in Saddex (3) xisbi qaran lagu sheego maaha halkan waa in ay furnaadaan.*

**Qodobka 32aad Faqrada 1aad Istiqaaladda Xubinta Mudanaha Ah**; Mudanuhu wuu iska casili karaa Xilka isaga oo istiqaalad qoraal sababaysan u gudbinaya Duqa Degmada, waxaana ansixinaya Duqa Degmada, ka dib markuu oggolaansho ka helo Golaha Deegaanka. *Anigu waxaan soo jeedinayaa in halkaa la cadeeyo Isti-qaalada oo laga dhigo inay ku ogalaadaan hal dheeri.*

**Qodobka 65aad Awoodda Sharci Dejinta,** waxaan taageersanahay sidii uu xildhibaan Cabdiraxmaan Dheere soo jeediyay ee uu yidhi "*kal-mada Sharci Dajinta waa in lagu bedelaa Xeer-Dajin".*

**Qodobka 67aad Habka Doorashada Guddoomiyaha Ahna Duqa Iyo Ku Xigeenkiisa Farqada 3aad;** Marka laba musharax ama ka badan la soo jeediyo ama ay isu taagaan in loo doorto Duqa ama ku Xigeenkiisa, habka Doorashadu waxay noqonaysaa Gacan taag, oo ku ansaxaysa cod hal (1) dheeri ah. *waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo Absolute Majority.*

**Qodobka 68aad Muddada Duqa Iyo Ku-Xigeenkiisa Farqada 1aad;** Duqa iyo Ku-Xigeenkiisa muddada loo doortay Xilka way haynayaan, hadii aanay iska casilin ama aan laga qaadin ama aanay ku sifoobin tilmaamaha lagu waayi karo xubinimada Golaha ee ku xusan **Q.29aad** iyo Qodobka 70aad ee xeerkan. *Anigu waxaan soo jeedinayaa in duqu uu xilka hayo mudo laba (2) sanadood ah si looga baxo in uu duqu iska ilaaliyo in mar-walba la beddelo intaa uu hayo wixii danbi ah ee cad dee way ka baxsantahay, inuu hayo labadaa (2) sano laguna dari karo cod hal dheeri ah.*

Qodobkii uu ka hadlayay xildhibaan xuseen ee ahaa sida kab-ka loogu qaybinayo Degmooyin, *anigu waxaan qabaa in ay degmooyinku isku mid ahayn oo ay kala weyn yihiin oo Hargeisa oo Caasimadii ah iyo mid aan wali la ansixin oo "D" ahi isku mid noqon maayaan, markaa waxaan qabaa in intii isku Darajo ahba wax la wada siiyo, waxana loo wada qaybiyo oo aan la kala saraysiin sida ay guddidu soo jeedisay,* waana in aad looga baaran dagaa sida wax loogu qaybinayo Degmooyinkaa. Waad mahadsantahay Gudoomiye WSC.

**Md: Saleebaan Diiriye Barre:-** “18Min 38Sec” **Md. Saleebaan Diiye Barre:-** Ugu horayn waxan salaamayaa shir gudoonka, xubnaha wakiilada, saxaafada &marti sharafta ASCWWB.
Waxan u mahad celinayaa dawladda dib u soo celisay xeerkan si kaabis iyo wax ka bedel loogu sameeyo, kadib markii ay aragtay inaanu anfacayn dalka iyo dadka, sidaa awgeed soo diyaarisay xeerkan si uu ula jaanqaado waqtiga, waayo wax kasta oo bani-aadamku gacmihiisa ku sameeyo lagama waayo, kala dhinaanshaha.

**Sida uu qabo xubinta 2aad ee Dastuurka JSL, qodobka 11aad, farqadiisa 2aad waxay leedahay**: iyadoo la dhawrayo inaanu habka dhaqaale noqonin mid horseeda in barwaaqadu ku koobnaato ama ku ururto koox ama dad tiro yar, si aanay u dhalan dabaqado dhaqaale oo ka kooban kuwo wax haysta iyo kuwo aan waxba haysan, si aanay u balaadhan farqiga dhaqaale ee u dhaxeeya reer magaalka iyo reer miyiga, waxa dawladda JSL xaqiijinaysaa in adeegyada bulsho iyo fursadaha dhaqaale si cadaalad iyo sinaan ah loo qaybiyo. Sidaa awgeed waxan soo jeedinayaa in wax kabedel iyo kaabis lagu sameeyo qodobadan hoose sida:

**Qodobka 89aad ee xeerkanoo dhigaya: Nidaamka qoondaynta dakhliga kabka: (12.5%)**
Sidaa awgeed aniga oo ka duulaya qodobkaa dastuuriga, isla markaana eegaya dhaarta aynu qarankan u marnay, kuna shaqaynaya xeerarka dalka, waxan soo jeedinayaa inaynaan markhaati ka noqon, sed-bursi, ama cadaalad daro iyo kala saraysiin, sababi karta in bulshadeenu noqoto dabaqado, isla markaana lays dhaafiyo gobolada iyo degmooyinka dalka, sidoo kale aynu dhawrayno Qodobka 11aad ee dastuurka JSL, waxan soo jeedinayaa guud ahaanba qadarka lacagta ee 10% ah ee loo jaro degmooyinka ay kastamada dalku ku yaalaan ee ku cad **Qodobka 87aad, farqadiisa 3aad, xarafka “a”**in gebi ahaanba lagu daro lacagta kabka ee dawladdaha hoose la siiyo, isla markaana loogu qaybiyo sida ay u kala danbeeyaan, maadaama ay dawladu u xil saarantahay dhamaanba isu dheelitirka iyo jihaynta, ka warqabka, xaaladaha nololeed ee bulshada, kan caasimada ku nool iyo kan cidhifka ugu fog jooga, kan Somaliland jecel, iyo kan waxtabashada ku maqanba, waxana aan soo jeedinayaa in Togdheer (siiba Buuhodle) iyo Sanaagba (siiba dhinaca bari) xaaladoodu dhab loo wajaho, oo tabashadaa dadkaa dawladdu mudnaanta siiso, waana masuuliyad saaran dawladda JSL inay sugto xaqiijisana wax wada lahaanshaha iyo dhulka iyo dadka JSL.

**Qodobka 9aad ee xeerka Gobolada iyo degmooyinnku wuxu qorayaa**:

1. Jamhuuriyadda Somaliland waxay u qaybsantaa (6) Lix Gobol, lixdaas Gobol oo kala ah:-

- Gobolka Maroodijeex
- Gobolka Togdheer.
- Gobolka Sanaag.
- Gobolka Awdal.
- Gobolka Sool.
- Gobolka Saaxil.

2. Gobolkiiba waxa uu u qaybsamaa Degmooyin darajadoodu kala yihiin <u>*A,B,C,D,*</u>Magaalo Madaxda Gobol kasta Darajadeedu waa "A" oo ah kuwan soo socda: -
3. Magaalo madaxda gobol kasta darajadeedu waa **" A**"

Sidaa awgeed ma jiro Gobol 7aad oo dastuurka qaranka ku qoran oo lagu soo dari karo gobolada dalka, hadii aan dastuurka furayn

waxa kale oo ceeb ku ah qarankan &inagaba ka wakiilo ahaan degmooyin darajada "**C**" ah oo hadana gobol ah waxan soo jeedinayaa in Gobolada ay Somaliland Magacawday ee **8**ka Gobol ah dhamaantoodba loo aqoonsado darajada "**B**" dawladduna si siman oo cadaaladi ku dheehan tahay ay ugu qaybiso mashaariicda horumarineed gobolada, iyada oo aynu ognahay in gobolada dalka qaarkood ay xaalad deg deg ah ku jiraan, (Emergency) qaarna horumar ay ku talaabsadeen (development stage). Gobolada oo kala ah sidan:

Lix (6) degmo oo ka mid ah degmooyinka dalka waa Grade "B" 1.Oodwayne**, 2. Gebiley, 3.Buuhoodle, 4. Badhan, 5. Saylac**.6**.** *Ceel-Afwayn,*(5 ka mid ahi waa gobolo)
, iyo (3) sadex gobol oo ka mid ahina waa Grade **"C"** sida: ***7. Caynabo, iyo 8.Bali-gubadle. 9. Xaysimo.***

Waxa halkan aan ku jirin oo laga reebay **Darajadii Degmada Caynabo** ee "B" oo madaxwaynuhu ku dhawaaqay safarkiisii ugu danbeeyey, waxana aan codsanayaa in lagu daro waayo dhawaaqii madaxwaynaha qaranku *you tube*yada iyo *websites* walba waa ku jiraa cidii doontaana way heli kartaa.

Waxa kale oo lifaaqan ku qoran degmooyinka **"C"** ah oo dhan 8 degmo oo kala ah sida:

1. ***Garadag.***
2. ***Laas-qoray.***
3. ***Lug-haya.***
4. ***Baki.***
5. ***Dhahar.***
6. ***Shiikh.***
7. ***Salaxley.***
8. ***Xudun.***

Waxa jira laba degmo oo 1960 kii ka hor ahaa Sub-district markii danbena 1963 kii la siiyey degmooyinka waana laba degmo ee Garadag iyo Laas-Qoray, waxan soo jeedinayaa in loo aqoonsado labadaa degmoba Darajada "B" oo wayna u qalmaan, waxana haboon in si cadaalad ah loo qiimeeyo,

Baarlamaan ahaan doodeenii hore waxay ku saabsanayd isdhexgalka dawladaha bariga Afrika iyo saamaynta taban ama togan (waxtar iyo waxyeelo ) ee ay inagu yeelan karto dal ahaan iyo dad ahaanba, waxan qabaa inay ka muhiimsan tahay inaynu xooga saarno

is aaminka, is dhexgalka, walaalaynta, dhiiri gelinta karaamada bulshadeena iyo adkaynta iyo kor u qaadida dhismaha qarankeena ee gudeheena, inaynu hormuud u noqono oo dawladdu kula shaqayno ama ku dhiiri gelino inay xaqiijiso, wadajirka bulshadeena, aan xuso hal qodob oo muhiim ah maaha deganaansha iyo nabadgelyada hargaysa iyo agagaarkeeda, ee waxa muhiimka ahi waa qaran meel u wada jeeda oo mida kaas ayuun baynu ku guulaysan karnaa.
Hadaan cadeeyo hadalkayga in guri la dhisaa waa wax fudud waana fiican tahay, laakiin quluubta dadka in la dhisaa maaha wax fudud, waana calaamatul su'aal taagan oo u taal jilayaasha qaranka, golahanina qayb ka yahay,

Gole ahaan waa waajib ina saaran hubinta xeerarka golahan ka baxay maxaa dhaqan galay oo dawladdu sidooda u fulisay, maxaanse dhaqan gelin oo dawladu ka gaabisay ku dhaqankooda, waa arrin u baahan inaynu hoos u eegno, waxan jecelahay inaynu kulan kale ka yeelano.

**Qodobka 22aad ee xeerkan: Golayaasha Deegaanka**. Mudanayaasha golaha deegaanku waa xildhibaano, maadaama ay ku yimaadeen doorasho one man one vote, Tirada xubnaha Golaha deegaanka ee degmooyinka dalka iyo darajooyinkooda:

Waxan soo jeedin lahaa madaama aanay waxtar u lahayn horumarinta degmooyinka tirada faraha badan ee xildhibaanada ahi, maadaama ay ka muhiimsanaayeen ama ka waxtar badnaayeen markii hal Mayor iyo ku xigeenkiisa loo magacaabi jiray, anigoo si mug leh daraasad ka sameeyey badanka xubnaha golayaasha deegaanka iyo mayoradaba, oo aynu wax badan ka warhayno, xaaladaha ay ku jiraan, iyo duruufaha ay ku shaqeeyaanba Gudoomiyayaasha kala duwan ee dalku, waxan ku sifeeyey Madaxwaynayaal ay hareera fadhiyaan raxan wasiira ah oo aan mid qudhi ka amar qaadanayn, oo aanu eryi karin, oo weliba isaga madaxwaynenimadiisu ay iyaga gacantooda ku jirto, hadana waa xildhibaano doorasho ku yimi oo toos taageero la taaban karo uga hela hay'adaha Qaramada Midoobay sida mashruuca: *(UN Joint Programme on Local Governance and Decentralized Service Delivery (JPLG)*

waa dhab Mudane Gud, iyo mudanayaal in xeerkani wuxu u baahan yahay in xaqiiqo ahaan loo wajaho, ururada rayidka, khubaro (consultancy) lala kaashado, cid iyo meel jeclaysiba ka fayow, waqtina la siiyo, si loo helo wax dalka iyo dadkaba u cuntama, Waxan soo soo jeedinyaa inay lama taabtaan yihiin golayaasha degaanku

**xaga xasaanadda** marka la eego Golayaasha maadaama ay ku yimaadeen cod dadwayne waxay lee yihiin xasaanad, hadii ay degmadooda ka baxaan iyo hadii ay ku jiraanba, waxaba laga yaabaa xubnaha golayaasha fadhiya in qaarkood ka cod badan yihiin Maayarka degmada aniga oo ka duulaya dastuurka dalka waxan soo jeedinayaa aynu ixtiraamno sharciga, xasaanada xubin gole deegaanoo la soo doortay waxay ku waydaa uun isbedel ku sharciyada wadanka sida inqilaab milatery, iyo wax la mid ah, Qodobka sharci dejinta waxan soo jeedinayaa inuu ahaado Xeer dejin.

Caasimada waxan qabaa Degmada Hargaisa inaan la odhan ee la yidhaahdo, Caasimada Hargaisa, darajadeeduna tahay "A" tiradeeduna noqoto, 11 xubnood,

Kabka Dawladaha hoose waxan ka dhigi lahaa sidan:

| *S/NO* | *Description* | *Grade* | *Tirada xildhibaanada* | *Qoondada Kabka percent %* | *Tirada magaalooyinka* | *Wadarta Guud* |
|---|---|---|---|---|---|---|
| 1. | Caasimada Hargaisa | A | 11 Xildhibaan | 4 | 1 | 4 |
| 2. | Degmooyinka | A | 9 Xildhibaan | 4 | 5 | 20 |
| 3. | Degmooyinka | B | 7 Xildhibaan | 1.7 | 9 | 15.3 |
| 4. | Degmooyinka | C | 5 Xildhibaan | 1.5 | 8 | 12 |
| 5. | Degmooyinka | D | 3 Xildhibaan | 0.6 | 77 | 46.2 |
| 6. | Wasaaradda Arimaha Gudaha | | | 2.5 | 1 | 2.5 |
| | Totalka Guud ee Percentage ka100% | | | | | 100 |

**Md. Saleebaan Cawad Cali (Bukhaari )** **"27min 15sec"** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, xeerkan in badan ayay xildhibaanadu ka yidhaahdeen aniguna intaan ka soo akhriayay ayaan ku kordhinayaa waxaanan ka bilaabayaa magaca Xeerka oo loo bixiyay Xeerka Ismaamulka Gobolada iyo Degmooyinka, ismaamulku waxaa weeyi madax banaanida gobolada iyo degmooyinka maadaama oo gudoomiyiihii degmada, badhasaabkii ka wakiil ah Dawlada dhexe, isku duwayaashii Gobolada iyo degmooyinka ee wasaaraddaha iyo hay'adaha kale ee ay dawladu leedahay, Ismaamulkaasi wuu ka balaadhan yahay Macnaha uu xeerkani sheegayo sidaa daraadeed ***waxaan u bixin lahaa xeerka Hab-maamulka Gobolada iyo Degmooyinka ama Xeerka maamulka Gobolada iyo degmooyinka.***

Qodobka kale ee aan soo jeedinayaa waxaa weeyi gobolkii hore loo odhan jiray waqooyi galbeed ayaa maroodi jeex loo bixinayaa taasi waxay iigu muuqataa in aanay sax ahayn waayo waxa uu ahaan jiray Degmada Hargeisa iyo Degmada Berbera iyada oo Degmadii Berbera La baabiiyay oo dhawr iyo Sagaashankii laga dhigay Gobol, qayb burco ka mid ah oo degmada shiek ahna waa lagu soo daray iyo Degmo kale oo ka xigta dhinaca bariga aanan u malaynayo in ay tahay Degmada Xagal markaa waxaan qabaa sida ugu jirta habka doorashooyinka *in la yidhaa Gobolka Maroodi-jeex ayaan soo jeedinayaa, Awdal, Saaxil, Togdheer, Sanaag iyo Gobolka Sool in sidaa loo qoro.*

**Qodobka 11aad** xukuumadu waxay soo jeedisay in xadaynta lagu sameeyo 3sano halka ay gudiduna soo jeedisay 2sano, taas oo macneheedu uu noqonayo in aan marnaba aan la samayn oo sadex sano marka ay gaadho in ay dawladaha soo socda madaxa lagasho iyo doorashooyinka danbe.

markaa hadii la doonayo in shaqadaa la qabto waana shaqo wax badani ku xidhanyihiin oo caasimadii ayaa ku xidhan, waxaa ku xidhan tira-koobkii, doorashooyinkii ayaa soo galaya ***waxaanan qabaa in 12bilood lagu dhameeyo oo doorasho laqabto ayaan soo jeedinayaa,*** waxaa hadii la doonayo in wax la qabto hadii aan la doonayna waa in 3 iyo 4sanaba laga dhigaa.

isla qodonkaa 11aad waxay gudidu soo jeediyeen in degmooyinka 5 km oo dhinac walba ah, kana bilaabmaya xarunta Dagmada, inta Wasaaraddu soo dhamaystirayso qiimayntooda, markaa 5km qayladaa gaadha, ***markaa degmooyinka 5km isku jiraa waa in ay ku hadhaan qiimaynta hore ayaan soo jeedin lahaa waana in ay lahaadaan degmooyin cayiman oo isku jira ugu yaraan 10km ugu badnaana 20km ama 30km² iyo wixii ka badan.***

**Qodobka 12aad Qiimayn iyo Darajo Ka Beddelid Degmo;** guddidu waxay soo qortay in dib loo qiimeeyo Degmooyinka "D" iyo "C" waxaan ***soo jeedinayaa in Degmooyinka oo dhan la qiimeeyo A, B, C, iyo D-ba*** oo qiimayntan uu xeerku sheegayaa ay taabato dhamaan degmooyinka dalku uu leeyahay oo dhan oo degmo walba lagu qiimeeyo dadka, wax soo saarkeeda, khayraadkeeda iyo soo jireenkeeda Taariikheedba.

**Qodobka 15aad Baahinta Awoodda Is-maamulka;** ***Degmooyinka darajada "A, B, C, iyo D waa in ay ka mas'uul yihiin; Waxbarashada hoose Dhexe Caafimaadka iyo khayraadkooda waana in aanay ku koobnaan "A" iyo "B" oo kaliya ayaan soo jeedinayaa.***

**Qodobka 16aad** waxaa ku qoran in la soo dooranayo Gole Gobol sida uu u jiro Golaha Deegaanku *Taasi waxay khal-khal galinaysaa Golaha Deegaanka Dawladd nimada iyo Maamulka* waxaa sax ah in sidii hore ee ahayd inuu gobolku yeeshi gudoomiye Gobol iyo oo badhasaab la yidhaa, ku xigeen iyo xog-hayaha dawlada hoose ee fulinta oo ay soo magacawdo dawlada dhexe iyada oo uu madaxweynuhu uu soo magacaabo badhasaabka iyo ku xigeenkiisa halka uu wasiirku ka soo magacaabo xog-hayaha fulinta ee dawlada hoose.
Gudida fulinta Degmada Gudoomiyaha, kuxigeenka iyo xog-hayaha oo uu soo magacaabayo wasiirku arimaha, labada kalana ay ku yimaadaan doorasho, waxaana amniga kala shaqaynaya hay'adaha kale ee ay wada shaqaynta leeyihiin ee sida ciidamada kala duwan iyo isku duwayaasha iyo maamulayaasha Degmada.

**Qodobka 21aad; Farqadiisa 4aad** waxaa uu sheegayaa in isku duwayaasha goboladu iyo maamulayaasha Degmooyinka ee wasaaradaha iyo hay'adaha dalku ay leeyihiin, isku duwayaal ayaa Gobolada u jooga, degmooyinkana maamulayaal ayaa la yidhaa, markaa gudidu waxay ku soo qoreen waxay la shaqaynayaa maamulka Degmada waxayna wada shaqayn la yeelanayaan wasaaradahoodi, *sida saxda ahi waxaa weeyaan in ay hoos-yimaadaan, la shaqeeyaan, warka u gudbiyaan wasaaradaha ay u joohaan meesha dhinaca kalena ay wada shaqayn yeeshaan Golaha Degmada iyo haday heer gobol tahayba maa-mulka Gobolka.*

***Qodobka 22aad;*** Guddidu waxay wax ka beddeshay maadaama oo dawladaha hoose wabanayaan shaqo la taaban karo oo saxeex dhaqaale, saxeex dhul leeyihiin, oo ay fulin leeyihiin oo golaha aynu fadhinaa fulin ma lihin oo waa waxa ay inagag duwanyihiin, sidaa awgeed hadii ay leeyihiin fulin *waa in loo daayaa Magaca dawladaha Hoose oo hadhawna lagula xisaabtamo.*
Dhanka kale caasimada Hargiesa ee ay gudidu sheegtay in darajadeedu tahay "A+" *waxaan leeyahay waa in loo raacaa sida uu dastuurku dhigayo oo caasimada hargiesa la yidhaa oo waa in danbaysaa sida loo dooranayo iyo sida xilka looga qaadayaaye waa in sidaa loo daayaa oo marka xeerkan la dhameeyana waxaa ka dhalanaya xeerkii caasimada oo lagu jaan goynayo Xadkeedii iyo xuquuqdii ay lahayd ee gaarka ahayd.*

Waxaan raacsanahay in Caasimada hargeisa ay 15xubnood noqoto Degmooyinka "A" ahina ay noqdaan 11xubnood Degmooyinka "B" noqdaana ay noqdaan 9xubnood Degmooyinka "C" ahi ay noqdaan 7xubnood Degmooyinka "D" ay noqdaan 5xubnood, waayo hadii D-da Saddex laga dhigo isba heli maayaan tiraduna way yaraanaysaa.

**Qodobka 24aad Xarafka F.** Bixinta iyo sharciyaynta jagooyin cusub, *markaa kalmada cusub waxaa ka fiican in la yidhaa dhul oodhan ama ha cubaado ama hore ha u jiro oo dawladu ha lahaatee, sidaa daraadeed waa in la yidhaa Bixinta iyo Sharciyayanta Dhulka.*

**Qodobka 28aad** halka odhanaysa Duqa iyo ku xigeenka ayaa xasaanad leh waxaan doodaa la qabaa mudanayaashii iga horeeyay, in dad la soo doortay qaana xasaanad la siiyo qaarna aan xasaanad lasiin, *markaa maxay golaha deegaanku kaga duwanyihiin golaha Baarlamaanka? Waxay iskaga mid yihiin doorashada oo cod ayay kusoo wada bexeen, waxaanay kaga duwanyihiin waa dawlad, laakiin inagu Saxeer iyo dakhli ma soo saarno ee shuruuc ayaynu soo saarnaa, waxaanay leeyihiin fulin.*

Markaa dhinac waxay uga eegyihiin Baarlamaanka dhinacna waxay uga eeg yihiin Xukumada oo waxay u eegyihii Golaha wasiirada iyaga oo labadaa wajiba leh xasaanadana ay ku heleen doorashada la soo doortay oo dadkii soo doortayba ay xasanad leeyihiin.

**Kal-fadhigii 39aad Fadhigii 23aad**

**Isniin, 22, April 2019**

**Quraanka: -** Md. Xaamud Cismaan Cigaal

**Gudoonka: -** Md. Axmed Yaasiin-sh. Cali Ayaanle.

**Ajandaha Fadhiga**:- Doodda Xeerka Ismaamulka G. iyo degmooyinka, maalintii 5aad

**Md. Axmed Ducaale Bulaale (24min 19sec):** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Shir-guddoonka, Mudanayaasha, Saxaafada iyo shaqaalaha. Waxaan idinku salaamayaa Salaanta Islaamka. Aslaaamu Cayakum Warax Matulahi Wa-barakaatu. Bacda salaam waxaan ku bilaayaa erey bixinta.

**Erey bixinta:** Xeer-dejin: Waxa loola jeedaa golayaasha heer Qaran, Gobol iyo degmo.

Xeer-dejintu waa labada Gole Wakiilada iyo Guurtida (Munacipoligu-Regulation).

**Qodobka 5aad farqada 1aad:** Qaab-dhismeedka dalku wuxuu u qaybsan yahay Gobollo iyo degmooyin. Farqada 2aad: Caasimadda dalku waa Hargeisa, xeer gaar ah ayey yeelanaysaa, haddana Hargeysa waa degmo "A" ah. Markaa sidee ayey isu qabanayaan Gobolka maroodi-jeex iyo Hargeysa **waxaan soo jeedinayaan in la kala saaro.**

**Qodobka 9aad:** Jamhuuriyadda waxay u qaybsantaa 6 Gobol iyo 23 degmo. Gobolkiiba wuxuu u sii qaybsamaa degmoooyin darajooyinkoodu kala yihiin **A, B, C** iyo **D. Farqada 2aad:** Gobollada Magaalo madaxyadoodu waa "A".

**Halkaa waxaan soo jeedinayaa in la sameeyo degmo hoosaadyo (Sub-ditrict), oo leh waxa lagu xulo (creteria) sida ugu yaraan 5000 oo qof, 8-10km oo xuduud ah iyo inay ugu yaraan 40% dabooli karto kharashaadkeeda. La qiimeeyo meesha "D" ah ee noqon**

**karta degmo ama degmo hoosaad (Sub-district).**Sababta maamul daadejin waa in meesha laga saaraa khaladaadka maamul.

**Waxa kale oo aan leeyahay, 7 Gobol in lagu sheego xeerka. Laguna soo qiimeeyo Gobollada iyo Degmooyinka "D" Muddo 2 sanno ah.**

**Qodobka 9aad:** Qiimayn derejo degmo. Xukumadda iyo Guddiduba waxay yidhaahdeen, waa in dib u qiimayn lagu sameeyo derejooyinka degmo ee **"B" iyo "C".** Anigu waxaan leeyahay ha la qiimeeyo dhammaan**A, B, C** iyo **D.** Waayo qiimyanta hore waa la iska isticmaalay ee kuma cadda xeerka sababta ay "A" u noqotay kaliya waa magaalo madax Gobol, oo la sameeyo **A+, B+, C+** iyo **D+**(Sub-district).

**Qodobka 15aad, farqada 3aad:** Adeegyada **farqada 2aad** ku xusan ee darajada **"C"** waxay ku xidhan tahay habka awoodda maamul iyo dhaqaale, iyo darajada **"D".**

**Qodobka 22aad: Tirada Muadanayaasha.** Sidoodii hore ee 25 Hargeysa **iyo 21 darajada A, Darajada B-17, darajada c-13 ku dar haddii aynu aqbalno degmo hoosaadka (sub-district) D= 5 oo ku biira degmada ay ka tirsan yihiin.**

Arrintan macnaheedu maaha tirada, mushkiladu waa ragga la xulayo. Rag culus oo creteria adag leh, sida: digree, proffesors iyo odayga magaalada oo culus.

**Ereyga Mudane,** Councilar uma hayno soomaali, **halka mudane ku bedel "Koonsilar".**

**Qodobka 33aad: Kala dirridda.** Marka laga yimaado sababaha xeerka iyo Dastuurka labaduba sheegayaan kala dirrida ee la yimaado dhammaadka mudada. Waxaan leeyahay sida Guddidu soo jeedisey, waayo maaha mushkiladcusub ee hore ayaa loo xalilay, oo horaa loogu kordhiyey. Ta kale korodhsiimo cid buu dastuurka inoo yaal siiyey.

**Qodobka 40aad: Xukumada:** Golaha deegaanka diyaarin maaliyadda iyo barnaamijyada kale ee taxan, waxaan ku bedeli lahaa: maamulka deegaanka ee xeerku sheegayo iyo ansixinta oo golayaasha ah.

Waxa kale oo aan ku dari lahaa **"Waa xubnaha maamulka loo doortay sida Mayir, ku xigeen, xoghaye in loo daayo maamulka, Golohuna ansixin iyo dabagal ku yeesho (oversight) iyo la xisaabtan.**

Waayo maamulada Gobolada iyo degmooyinku, waa maamul hoosaad u eeg. Maamulka dhexe waa executive and lagistative iyo xilalkooda. Sidoo kale

**Qodobka 47aad:** Waxaa ka reeban Guddi hoosaadyada Golaha deegaanka inay galaan hawlaha maamul ee waaxyaha dawladda hoose.

**Qodobka 65aad:** Golaha deegaanku wuxuu awood u leeyahay dejinta xeerarka **(Bylaws)** waxaan ku bedelay xeer-hoosaadyada **(Internal Regulatuon)** oo aan ka hor imanayn xeerarka Qaranka u dejisan sida dastuurka. Haddii laga fogaado Golaha Wakiilada iyo Guurtida waxa imanaysa xeer-dejin seddexaad.

**Qodobka 84aad iyo 85aad:** sicir-goyn iyo kala xaddayn badeecadaha (Import, export) and whole seller. Wasaarada Ganacsiga iyo dawladda hoose ma cadda siday u wadaagayaan arrintan (Shares).

**Qodobka 87aad farqada 5aad:** Xoolaha dhoofka waxa la siinayaa xaashida jid-marka (Transit sheet), kuma qeexna. Waa in lagu caddeeyo in degmada u horaysa loogu jaro oo ah, meesha xadka ama haddii ay xooluhu ka dhoofayaan degmo xuduudeed.

**Md. Aadan X. Diiriye Dirir (26min 20sec).** (Bismillahi Raxmaani Raxiim, Wabihii Nasticiinu Calaa Umuuru Dunyaa Wa Diin) sida khayr-ka leh alle hayna waafajiyo.

Marka hore waxaan odhan lahaa kalmad baa jirta ama xeerka laftiisaba markaynu eegno waxaad moodaa inuu sida looga doodayaa ay saameyn ku yeelatay golahayaasha degaanka ee hada sameysan xubnaha fadhiya, markaa horta xubnaha maanta inoo jira ee golayaasha degaanka ah meeshay doonaanba ha joogaane ha fahmaan inaan iyaga laga hadleyne laga hadlayo cidkasta oo ilaahay keeno meeshaa oo xilkaa qabata ee iyaga wax ujeedo ah oo laga leeyahay ama xeerkani ka leeyahay ama golahani ka leeyahay dooda markay doodayaan inaanay jirin aan kaa isla fahamno ayaan leeyahay golayaasha degaamada ee hadda inoo jira qodobka kale ee isna aan doonayo inaan xuso waxa weeye kalmada xildhibaan waa wax af laga yidhi oo magac ah inkastoo laga yaabo inay wax huwan tahay haddana anigu waxaan qabaa haddii xildhibaanka golaha degaanka ninka jooga iyo ninka halkan fadhiya haddii labadaba xildhibaan lagu yidhaahdo inaanay wax qiimo ah oo kala mudnaan ah aanay sameynayn waxaana ka markhaati ah suuqa imika bacadlaha hadaad gasho waxaad maqlaysaa inamada bacadlaha jooga oo leh xildhibaanka iska eega xildhibaanka la sheegayaa maadigaa mise waa tuug wax xadaya oo ay isku tilmaamayaan markaan waxaan leeyahay waxba yaan kalmadaa qolana yay u qaadan wax iyagu leeyihiin qolana yay u qaadan in wax laga duudsiyayo xildhibaan haddii halkan lagu qoro oo lagu isticmaalo xeerka gudahiisa iyo hadii laga daayo inaanay midna wax qiimo ah oo ay inoo samaynaysaa aanay jirin labadaa eray horudhac baan ka dhiganayaa.

**Qodobka 8aad** ee xeerka waxa ku tilmaaman kalmada ah markaad akhrido qodobkaa 8aad ee ah faahfaahinta shuruudaha qiimaynaya ee lagu magacaabi karo gobol iyo degmo ee ku qoran **qodobka 7aad faqradahiisa 1aad, 2aad, 3aad, iyo 4,aad** wasaaradda arrimaha gudaha ayaa ku soo diyaarinaysa xeer sharaxaya ayaa ku taala ma xeer cusuboo waxay sameynaysaa aan ahayn xeerka is maamulka gobolada iyo degmooyinka mise waxa weeye kalmada ay u jeedaan wax ka badel markay qiimayntooda soo sameynayaan

ama darajada kor u qaadayaan ama hoos u dhigayaan ma xeer cusub bay soo sameynayaan mise waxa weeye ujeedadoodu xeerka oo is badel kaabis ama wax ka badel ah lagu sameeyay markaa waxaan leeyahay kalmada xeer baa sharaxaya ayay wasaaradu soo saaraysaa kalmadaa halaga saaro oo eray ku haboon oo ah inay wax ka badel awood way u leedahay oo iyagaa sameeya inay ku soo saarayso digreeto is badel laga dhigayo goluhuna ansixinayo hala dhigo waa Qodobka 8aad faqradiisa 1aad halka la isticmaalayo faqrada 3aad magaalooyinka darajada xeerka marka la dhigayo dee maaha in waxa maalintaa taagan in laga hadlo inay iman karto beri, saadanbe iyo bil walba.

waxa kale oo maanta degmooyin ah A oo ay ka mid tahay gabiley inkastoo ay golaha soo galisay degmadaasi inagu kamaynaan dhigin A xeerka wey ku jirtay oo dawladihii hore wey ku jirtay oo A ka dhigay A lasticmaalayo ee la leeyahay intaas uunbaa A anigu waxaan leeyahay kumaba haboone halaga saaro maanta uunbay yihiin A barena waxay noqon karaan B qaar B ahaana way noqon karaan A Degmada Gabilay Xildhibaano badan ayaa ka dooday sidii oo wax la dhaafiyey degmooyin kale oo loo kala eexday amba loo kala qabyaaladeeyey markaa had iyo jeer waa in ay doodeenu ku salaysnaataa si siman oo xildhibaanku in uu matalo gobalada iyo Degmooyinka wadanka oo dhan.

waxaan is leeyhay hadii ay xildhibaanadu si siman u doodayaan waxa u muuqan lahayd in Gobalka Saaxil iyo Degmada sheekh in xeerkan iyo kii ka horeeyey ay takoorayaan kuwa sameeyeyna ay ku sameeyeena takoor sababta oo ah Gobalka kaliya ee hal Degmo oo A ah iyo hal Dagemo oo C ah waan gobalka kaliya ee lahaan jiray afar degmo doorasho ama subdisterct xiliyadii ka horayeey 1969-kii maantana wax weeyaan degmada Berbera oo ku qiimaysan A iyo Degmada sheikh oo ku qiimaysan C magalada sheikh wax weeye caasimadii u horaysay ee Somaliland waana meelaha ay ka unkantay wabarashadda iyo ilbaxnimada reer Somaliland ay hastaan inta takoorkaasi jiro ee uu haysto Gobalkaas iyo Degmadaas aqoonsiga Somaliland waxa uu ku laalanyahay samada, markaa alle ha idin garan siiyo xuquuqda Gobolkaa iyo Degmadaasi leeyihiin.

**Qodobka 11aad farqadiisa 2aad** Adeegsiga Erayga Somalia, degmooyinkii hore loo magacaabay xiliyadii hore ee saamaaliya xagay ahayd. waxaynu nahay niman aqoon lagu soo xulaya waxaynu halkan ku fadhinaa dad lagu soo xulay inay matalaan umada somaliland, markaa kalmada somalia waxa la odhan jiray in aynu marka hore garano saw maaha, somaliya waxaa la odhan jiray wadan kii uu talyaanigu gumaysan jiray, markaa waxaynu la midawnay inaga oo Somaliland ah oo ay aynu la baxnay Soomaali Republic, markaa anigu waxaan leeyahay *erayga samaaliya isticmaalkeeda aan iska ilaalina xeerkana halaga saaro waayo wuu isku keen qaadayaa*

**Qodabka 11aad farqadiisa 5aad** halka ay ku taalo qiimaynta degmooyinku iyo gobolada muda la soo qiimaynayo ee laga sugayo xukuumada, *waxaan taageersanahay oo aan raacayaa sidii ay xukuumadu ku soo gubisay ee ahayd mudada qiimaynta Degmooyinku in ay*

*noqoto Sadex (3) sanadood marka gobolada la qiimaynayana waxaan raacsanahay in laga dhigo laba (2) sanadood.*

**Qodobka 18aad farqada 12aad** gudoomiyaha gobolku waa in uu soo kor-meeraa mashaariicda dawlada hoose ay fulinayaan, *kuwa dawlada dhexe fulinayso miyaanu xaq-ulahayn in uu soo kormeero waxaan ku darayaa in uu kormeeri karo kuwa dawlada dhexe ee gobolka ka socdana.*

**Qodobka 22aad** waxaan taageerayaa sida xukuumadu u soo dhigtay oo ahaa in xubnaha ka imanaya degmo doorashooyinka A, B, C, iyo D.

**Qodobka 23aad farqada 3aad** golayaasha deegaanku kama yimaadaan sadexda (3) xisibi ee waxaan *halkaa ku darayaa iyo Ururada.ama waa in farqadaba laga saaraa oo la yidhaa sida ku cad xeerka doorashooyinka.*

**Qodobka 24aad** Anigu waxaan qabaa ciwaanka ah mudada xilka Golaha *iyo waxa ku hoos qorani markaa waa in wax laga badalaa ciwaankaa.*

**Qodobka 26aad** Marka la leeyahay ha la diwaan galiyo hantida mudanaha doorashada ku soo baxay u jeedada aynu ka leenahay waa maxaa looga jeedaa, *waxay ila tahay maadaama oo ay hanti gacanta ku hayaan in aanay isku milmin hantida qofka iyo hantidan uu umada u hayaa maadaama oo ay sidaa tahay meesha laga diwaan galinayaa waa halkee,* marka la leeyahay waxaa diwaangalinaya xog-haya fulinta waa ayo xog-haya fulintu miyaanu iyaga ka mid ahayd miyaanay isaga xukumin ama kuwa shaqada ka eryayaa miyaanay ahayn iyagu, *markaa waxaan leeyahay ujeeda aynu qeexno hantida la diwaan galinayana aynu tilmaano waana in ay noqotaa meesha laga diwaan galinayaa meel ka baxsan xafiiska deegaanka. waxaa kale oo aan leeyahay waa in la diwaan galiyaa maalinta la dhaariyo sidaa ayaan soo jeedinayaa.*

**Qodobka 27aad farqadiisa 3aad** xeer hoosaadka ay farqadani sheegaysaa waa kee ma ka ay iyagu samaystaanbaa mise waa ka la yidhi wasaarada ayaa soo ansixinaysa *xeerka marka la samaynayo maaha in uu yeesho mad-madaw ee waa inuu cadaadaa waana in aynu buuxino meelaha wax ay ka maqan yihiin intii awoodeena ah ayaan qabaa. waana in la cadeeyaa waxaa la leeyahay waa la mideeyay.*

**Qodobka 28aad** waxaa kale oo aan soo jeedinayaa dhawrsanaanta mudanayaasha golaha deegaanku in ay yeeshaan xasaanadooda oo aan la kala qaadin oo aan midna laga dayn midna la siin xasaanad, waayo iyaga ayaa ka maanta jooga ka dhigay gudoomiye ka barri joogana iyaga ayaa ka dhigaya gudoomiye.

**Qodobka 31aad** xog-haya fulinta muxuu u soo jeedinayaa xubinta banaanaatay saw shaqaale dawladeed maaha waa in uu soo jeediyaa Gudoomiyuhu, iniga marka ay jagadu banaanaato ma xog-hayaha ayaa soo qora jagada banaanaata yaa awoodaa u siiyay mise sharcigaa u siiyay, halkan waxaa ku jirta xisbi in aanu badelan karin xubin, wadada

kaliya ee uu ku badellan karaa waa jagada oo banaanaata uun wado sharciya oo loo maro ayay leedahay.

**Qodobka 33aad** marka ay dhamaato midada golihii hore ee la rabo in mudo kordhin loo sameeyo *anigu waxaan aamin sanahay in mudo kordhintaa loo daayo Golaha wakiilada, waxaa kale oo aan soo jeedinayaa Gole Deegaan ha noqoto ama Gole Wakiilo ama ha noqoto mid Madaxweyne marka mudo kordhinta la samaynayo sida aduunkaba ka dhacda in aanay noqon wax lagu takri falo oo cida awooda loo siiyay aanay ku takri faline waa in ay noqotaa wax xeerarka ku cad oo wakhti leh* oo hadii mudaada wax dhici waa yaan waa la kordhin karaa.

Inaga Distoorkeena Qadobkiisa 89aad farqadiisa 1aad iyo ta 4aad-ba waxaa ku cad Madaxweynaha iyo ku xigeenka hadii ay labaduba is raacaan mudada lagu soo dooranayo, hadii uu madaxweynuhu meesha ka boxo labada (2) sano ee hore ee uu xilka u magacaabanyahay, mudada midna waa lix (6) bilood midina waa lixdan (60) maalmood, *Markaa hadii mudada xildhibaanku dhamaato maxaa u diidaya in lix(6) bilood lagu soo doorto oo hadii lixdaa(6) bilood waxba ku qab soomi waayaan lix(6) bilood oo kale la sameeyo, sida wadamo badan oo jaarkeena ah ay sameeyaan.*

**Qodobka 36aad** Ee muujinaya Guddiyada uu ka koobnaanayo Golaha Deegaanku *waxaan soo jeedin lahaa in xeerka lagu muujiyo in guddiyadaa sideed iyo tobankii (18) biloodba mar la isku badelo si ay xubinta Goluhu ay u yeelato khibrad shaqadan uu goluhu uu u hayo degmada ama gobolka (1mudane ayaa taageeray).*

**Qodobka 40aad** xilka Golaha Deegaanka **faqradiisa 6aad** Goluhu waxaa uu awood u leeyahay in uu heshiis la galo cidii ay faa'iido ugu jirto dalka gudihiisa iyo dabadiisaba, iyada oo la waafajinayo shuruucda dalka u dajisan *waxaan soo jeedinayaa in qodobkaa dib loogu noqdo*

***Sixitaan Md. Dable;*** qodobkan waxaa looga jeedaa in la walaaleeyo cidii ay dani ugu jirto ha noqoto yurub iyo aduunka ama gobolkaa iyo gobolkaa ama degmadaa iyo degmadaa sida aduunkaba ka dhacda waad mahadsantihiin.

Md. Aadan; marka hore heshiis muxuu yahay? Waxaan rabaa in aan taa macnayno waxaan leeyahay marka si gaar ah wax loo qiimeeyo iyo marka si guud wax loo qiimeeyo waa kala macno, markaa hadii si guud loo dhigo sidaan doono ayaan u adeegsan karaa oo xiligaan doono ayaan adeedsan karaa. *Sidaa awgeed waxaan soo jeedinayaa in xeerka laga daayo sidan guud ee wax loo sheegayo ee waa in si gaar ah loo cadeeyaa wixii xeerka galaya.*

**Qodobka 67aad Faqradiisa 2aad;** Waa in la dhamays tiraa farqadaa waxaan qabaa in ay wax ka maqan yihiine oo la sheegaa xaga natiijada loo sii gudbinayo.

**Qodobka 69aad** Ciwaanka uu xanbaarsanyahay waa gudbinta wax qabadka duqa iyo ku xigeenkiisa *markaa waxaan leeyahay taa ha laga daayo oo ha layidhaahdo Gudbinta wax-qabadka guddida fulinta* waayo waxaa jirta gudi fulineed oo uu xog-hayuhu la socdo, waana

warbixintii sanadlaha ahayd waxaana iska leh guddida fulinta intaa ayaan ku soo gaba-gabaynayaa WCS.

**Md: Siciid Ismaaciil Warsame:- (12min 20sec).** ASalaamu Calaykum Waraxmatulaahi Wabarakaatu, Mudane Gudoomiye Xeerkani waa xeer muhiim ah waana xeerkii base u noqon lahaa qaranimo taaba gasha sidaas awgeed waxaan anigu aaminsanahay xeerkan inaana lagu deg degin ee sidii xildhibaanadii iga horeeyay ay sheegeen, mar iyo lababa loo saaro cid oo laga guro Qodaxda xeerkan hadii aynu si deg dega aynu u ansixino ama la dedejiyo wuxuu noqon doonaa mid wadanku madaxa isla galo oo timaha la isku dhago.

anigu waxaan aaminsanahay halka ay xildhibaanadu degmooyin iyo derejooyinka sida loo qiimaynayo ay xooga saarayaan degmo waxaa laga dhigayaa iyo gobol hebla waxa uu noqonayaa anigu waxaan aaminsanahay inaan xeerkan looga baahnayn in degmo magaceedba lagu qoro xeerkani waa kii la rabay inuu asteeyo sababta degmo loogu baahan yahay ama gobol loogu baahan yahay iyo siduu ku imanayo iyo qaabka loo qiimaynayo hadii aynu kusoo horayno nin waliba degmadiisa iyo tuuladiisaa lagu soo xidho weligeen ku heshiin mayno.

Waxaa loo baahan yahay in xeerkani uu noqdo kii samaynayay proceeger degmo ay ku imanayso A" ama B" ama C" iyo D" iyo macnaha Degmo Gobol midna kuma qorna Gobol iyo Degmo midna macnaheeda iyo sida loogu baahan yahay, marka laga hadlayo Kuraasta waa inay waxku yimaadaan waxaan u baahanahay, xeerkani inuu sheego waxa la yiraahdo halbeegii wax lagu cabiri lahaa looma baahna in degmo A" ah iyo Degmo B" ah waa in Xeerka la dhamaystiraa Proceegerkii Gobol iyo Degmo oo wax waliba ku cadaan lahaayeen, ayna ku iman lahaayeen.

Makra laga hadlayo midbaa 15 la siiyay heblana waxaa la siiyay 10 maxay ku timid maxaa la adeegsaday, ma Mode baa wadana mode laguma xukimi karo Modena waxba laguma qaadan karo fikir qof soo jeediyayna ma noqon karo mid dadka wax u sawira.

Waxaynu nahay xeer dejintii waa inaynu 6da Gobol baynu ka soconaaaye samaynaa, sidii waxaas loogu cadaalad samayn lahaa oo weelkii u tolnaa ee kuwa jooga lagu cabiri lahaa ama lagu qiimayn lahaa anigu waxaan aaminsanahay wax kasta waxaa pace u noqda haday degmo noqoto inta degmo ee uu yeelanayo inay A" Noqonayso iyo Inta gobol uu yeelanayo tirada ama Pablishionka wadankaas ayaa lagu cabiraa inta Degmo ee uu yeelanayo inta Gobol ee u yeelanayo sidaasayna kuraastu ku kala timaadaa dadka wadankaasi leeyahay oo la qorsheeyay marka la helo, Pablishionka ayay kasoo baxdaa tirada Gobol ee loo baahan yahay iyo tirade Degmo ee loo baahan yahay iyo derajooyinka la qorayaa.

Wuxuu kaloo xeerkani u baahan yahay inay ka muuqato Degmada A"da ah ama Gobolka in lasii qorto A"xadkeedu muxuu noqonayaa, maaha in nin wasiir ahi uu maskaxdiisa

inoomeegaaro oo yiraahdo meel heblaayo Codkeedu waa intaas heblana badkeedu waa caynkaas waxaynu u baanahay iyadoon la gaadhin in aynu sii qorshaysano. Marka loo baahdo degmada A" xadkeedu iyo cabirkeedu wuxuu noqon doonaa intaas iyo intaas **B**" wuxuu noqon doonaa intaas oo kale laakiin marka laga hadlayo qiimaynta oo kale ee la leeyahay waa in dawlada loo daayaa dawladu maxay ku soo qiimayn inagaa laynaga rabaa wixii lagu soo qiimaynayee.

Ma intay tagaanbaa waxay doonaan soo samaynayaan taasi suura gal noqon mayso in fikir qof wax lagu qiimeeyaa, waa inaan samaynaa oo xeerkii uu ka muuqdaa sida loo qiimaynayo waxa lagu qiimaynayo waa inay ku qorantahay xeerkan, waxaa kaloo meeshan ku jira dhaqaalaha Pablishionka oo sidee iyaga dhaqaalaha la tixgelinayo u arkeen maka wax kasoo baxaanbaa ma ka cashuuraha soo maray kastamada dawladu ukala qorshaysaa, dhaqaalahaa lama garanayo.

**Md:- Dable Sixitaan Gudoomiye 2005kii** ayaa lasoo qoray xeerka Wasaarada Maaliyada ayaa qiimaynaysa in uu is bixin karo iyo in aanu isbixin karayn sida mudanuhu u hadlay waa ay wanaagsan tahay waa in la helaa jariiradii rasmiga ahayd ee shuruudaha ku buuxinaysay inay jeelka, Booliska, dhakhtarka iyo Goobaha Caafimaadka, Beeraha iyo Iskuulaadka markay intaba wuxuu ku qoran yahay Dastuurka.

**Md. Siciid; Qodobka 1aad** Degmooyinka iyo Gobolada marka laga hadlayo anigu waxaan aaminsanahay in aan xeerkan lagu qorin, sideedaba magac degmo iyo magac gobol midna ee lagu qoro sidii uu ku imanayay iyo macnaha baahida keentay uu sharaxo xeerkani waa inaanu helnaa halbeegii Degmo Gobol iyo derajada ay yeelanayso.

Halbeegii lagu cabiri lahaa waa inay ku cadahay laakiin hadaynu hore usoo qadino, tuulooyinka iyo degmooyinka oo faraqa is qabsano dee weligeen, ku kala dhaqaaqi mayno xeerkani waa kii lagu qaybsami lahaa Gudoomiye waxan la yiraahdo khayraadka iyo awood qaybsiga kuraasta la sheegayo waa awood qaybsiye, dhaqaalaha marka laga hadlayo waa khayraadkii, xeerkani waa inuu noqdaa mid leh halbeegiisa wax lagu cabiro ee aan lagu qorin halkaas degmooyinka iyo gobolada A+B laga siiyay anigu waxaan ka soo horjeedaa waxaas waxay yeelan kartaa A"B"C"D" ayay noqon kartaa oo midwaliba caddahay waxay tahay iyo waxa looga baahan yahay iyada oo hadhay halkanaad ka helaysa sare-keeda.

Waxaan kaloo aan aaminsanahay marka laga hadlayo qiimaynta gobolkaas Gobolada iyo Degmooyinka inamadu waa ay qorayaan iyadana in la helo wixii lagu qiimaynayay Dawladu maxay ku soo qiimaynaysaa ma riyada Wasiirka Habeenkii inaga ayaa laynaga rabaa meesha ay raacayaan inaan kusoo darso Xeerkan.

Dhaqaaluu sheegay Jiifku hadii la yiraahdo hadii wadankaas dhan laba magaalaa yeelanaya kastam, oo taasaa wax soo saar ah ma taasaa la odhanayaa dhaqaaluhu waa inuu isbixiyaa waan usoo soo socdaa qaabka taas looga gudbayo taasina maaha Cadaalad

waxaanu rabnaa wax ah fare oo qaabka dhaqaale uu cadyahay waa in wax soo saarka la qiimeeyaa.

Tirade Degaanka iyo Kuraashta waxaan iyana leeyahay waa in ay iyana ku xidhnaataa degmooyinkaa lasoo sharaxay derajooyinkooda ee ku yimid minqiyaaska iyo halbeega la gartay ku yimid ee aan iska iman ee la yiri heblana intaas halaga dhigo heblana intaas halaga dhigo waa in ay iyana yeelataa saldhig wax laqaato sida kuraasta baarlamaanka base looga dhigay 60kii 33kii kursi kuwana waa inay yeelataa sabab iyo halbeeg wax base ah waa inay yeelataa.

Waxaa kaloo ii raaca Miisaasaniyada iyo Kabka marka laga hadlayo

**Qodobkaas 89aad:-** waxaa jira xeer la yiraahdo xeer/12 xaga danbe waxaa ku qoran xeer 12 waa la laalay, Ok hala laalo waxa uu ahaa xeer xun oo Gobolada iyo Degmooyinka kala hormariyay 30sano ayaa Degmooyinka iyo Goboladu isku dul shaqaysanayeen waxaa la yiri xeerkaas waa la laalay hadii la laalay waxaynu doonaynaa in la helo dibu habayntii cashuuraha in la sameeyo oo weliba heer Gobol ah.

Oo qeexan waa in lasameeyaa Gobol walba waxa uu xaq u leeyahay ,Kastam cashuurka aynu hada qaadnaa waa cashuurta ay bixiyaan maaha cashuurka kasoo baxdaa meeshaas kasyuumarisku maaha cashuurta kasoo baxdaa meeshaas qofka u danbeeya ayaa cashuurtaas bixiya qaadka ina afdiinle ee lagu cuno laascaanood Gebilay ayaa Cashuurteeda qaada waxaasina maaha cadaalad waxaani cadaalad noqon mayso waa in dibu habayntii cashuuraha oo qeexan oo siday u kala qaadanayaan iyo waxa taraansiga ah waa in la sameeyaa iyana waa in dibloogu noqdaa.

Waxan la leeyahay waxbaa loo qaybiyay meel heblaayo 0.1 0.5 anigu ma garanayo xeerkan dibu habaynta cashuuraha midwaliba waxeedii iyadaa helaysee dib haloogu noqdo xeer 12 sidaa halagu baabi’iyo waxaan kusoo Gababaynayaa Gudoomiye marka ay dhamaato Doodu ee laysku soo guro in Gudi loo saaro waan taageersanahay.

Waxaan kaloo taageersanahay intaan la odhan haloo codeeyo aan wiig soo akhrino oo laysku soo guro hadal qoraalka la socodsiino waa xeer muhiim ah xeerkani maaha xeer bulucbuluc laysku dhaafin karo.

**Md: Ibraahin Jaamac Cali (Rayte) :-** “26Min 38Sec” Bismilaahi Raxmaani Raxiim, Gudoomiye, mudanayaasha dhamaantiin waan idin salaamayaa, marka ugu horaysa Gudoomiye xeerkani waa xeer aad u balaadhan markaan akhriyayna waxaa ii muuqda ama iiga soo baxay su'aalo faro badan iyo dhaliilo weyna adegtahay in Qodob-qodob La isku dultaago, marka ugu horaysa waxaan jecelahay in aan soo jeediyo dhawr arimood oo guud xeerkana ku saabsan in aan soo jeediyo in aan ka hadlo waayo waa xeer aad u cufan oo ka kooban sadax xeer oo ay ahayd in ay kala baxaan kalana jaad noqdaan *xeerkii ismaamulka gobolada iyo degmooyinka, xeerka mina-shiibiyada iyo xeerkii dawladaha hoose*

*(Municipality Act)* waxaanu ahaa institution dhisan oo jiray ayuu ahaa, Goleyaasha deegaankuna waa gole la soo doorto 5tii sanaba mar, markaa cidii la soo doorto ayaa maamulkeeda qaadata xeerkaa dawladaha hoose waana laba hay'adood oo kala duwan inagana way iskugu keen dhafanyihiin waxaana fiicnaan lahayd in laba xeer oo kala jaad ah laga dhigo waayo municipality act ayaa aas-aasaya Dawladaha hoose.

Hadase waxaa ii muuqda in aanay inoo suuroobayn halka ay xaaladu hada marayso, sidoo kale waxaa ku jira xeerkan xeer maaliyadeed oo ah cashuuro, oo sidii uu hada sheegayay xildhibaan Siciid waaba lagu laalay xeerka cashuuraha waanay adagtahay iyada oo aan la samayn xeerkii bedelayay xeerkaa la laalay, xeerkii cashuuraha oo dhami halkan inooguma yaalee wax yar ayaa kaga jira, mana qabo in xeerka cashuuraha sidaa dhibta yar lagu laali karo ee waxay iila muuqataa in xeer 12-na lagu noqdo.

Xeerkan sida aad arkaysaan ama doodiisuba ay tahay, macno siyaasadeedna uu leeyahay waxaan qabaa *yaynaan deg-degin wax dabada inaga eryayaana mudane gudoomiye ma jiraan (5 mudane ayaa taageeray).*

hadaba markii aan isha soo mariyay waxaan qabaa in aan soo kordhinay waxyaabo uu muran ka dhalan karo iyo in aynaan xalin ma shaakilkii yaalay oo aanu xeerkana aanu xalin ayaan arkayaa *sidaa awgeed waxaan soo jeedinyaa in gudi loo saaro mudana la isasiiyo si gudida iyo dooda mudanayaasha la iskula eego oo ay talooyin ka weydiiyaan Arimaha Gudaha iyo hay'adaha kale ee ay khusayso oo inta fasaxa ka hadhay ha haystaan marka fasax laga soo noqdana aynu gudo galno xeerka (2mudane ayaa taageeray).* Anigu taladaas ayaan soo jeedinayaa.

Waxaa kale oo aan *soo jeedinayaa halka waxaa inoogu yaala qiimayn la qiimeeyay Degmooyin* markaa sida uu u qoranyahay farsamo ahaan maaha wax sharci ah oo hadaad tusaale ahaan eegto shuruudaha lagu bixinayo degmooyinka waxaa ka mid ah Baaxada Dhulka, waa maxay baaxada dhulku? waxaan qabaa in aanay noqon karin baaxada dhulku shuruud waayo waxay shuruud noqon kartaa marka aad tidhaa baaxada dhulku marka ay intaa iyo intaa leegtahay waana inay ahaato wax lagu sooci-karo, sidaa awgeed arimahan aan haynaa maaha arimihii professional-ka hawlihii xildhibaanada maaha, hawlihii wasaaradana maaha ee waa arimo technical-ka arimahana dunida waxaa fuliya dad Commissions ah oo la magacaabo oo mandate leh xeerna lagu abuuray oo dhamaan habraaca ay raacayaana uu ku cadyahay xeerkaa, dadkaas oo ah dad khubaro ah oo dhan walba iskugu jira hadii ay noqon lahayd dad photographers, Joe-graphics, lawyers iyo xubno danaynaya xeerka ama baarlamaanka ha noqdeen ama dad kalaba e.

Waxaanan qabaa in aanay shaqaalaha wasaaradu aanay lahay awooda intaa leeg ee ay ku kala xadaynayaan intaas oo gobol ayaynu isku hoos abuurnay, waxaasina waxay keenayaa xuduudo la isku qabsado sida hadaba taagan ee ceelsha iyo meelaha sanduuqyada la dhigayo la isku qabsanyo *waxaanan qabaa in waxani uu noqdo wax si nabadgalyo ah ku sugma.*

waxaan *soo jeedinayaa in commission qaran la abuuro* inkastoo ay halkanba si dedban ugu qorantahay oo wasaarada ayaa iska dhigtay, waana in xeerka qiimaynta gaar loo sameeyo  oo shuruudahana la dhameeyo oo dawladu soo gudbiso baarlamaanku ansixiyo  oo ay hadhawna wasaaradu fuliso, iyada oo aan qabo in fulintaa wasaaradu aanay awood u lahayn fulintaa ee waa in qayb ka noqotaa.

Waxaan qabaa in aanu xeerkani xataa aanu xalilayn hadii uu mashaakil yimaad xataa, waxaanan qabaa hadi aynu ansixino in ciladihiisu ay badnaan doonaan, waanu soo noqon doonaa hadii uu sidaa inagu dhaafo ee waa in aan komishankaa lagu daraa xeerka (5mudane ayaa taageeray).

arinta kale ee abuurtay ee dadka dareenkoodu iyo midnimadiisa aan u wanaagsanay, cadaalada aan ahayni waxaa weeyi xeerarka aan u aqaan dagaaladii sokeeye ee ahaa xeerar ku meel gaadh ah oo inala dheeraaday ayna ahayd in aan ka baxno oo uu ka mid yahay xeerka Cashuuraha oo sida hada Degmooyinka wax loogu qaybiyaa maaha cadaalad mana aha wax la aqbali karo.

Aduunyada kale waxay isticmaalaan cidiba cida aya dhaqaale yaraan uga hadhay ayay kabaan oo kaalmeeyaan, tusaale ahaan hada Sanaag oo kale waxay leedahay Sadex dakadood, saddexdiiba way xidhanyihiin waxa berbera ka soo degaana Sanaag ma tagi karaan, boosaasaana u dekad ah oo dhaqaaleheeduna waxaa uu ku xidhanyahay halkaa dabiiciyan markaa waa in dekadahaa loo furaa oo wixii ka soo degaya loo sameeyaa cashuur dhaaf si loo quudiyo labadaa gobol Sool iyo Sanaag waayo waa gobol Gobolada kale ka hadhay.

Waxaan qabaa horumarka gobolkaa ka dhacaa in uu kaabayo goboladan kale ee dalka hadii kale wuu la dagayaa, oo hada waxaad arkaysaa in hargeisa ay noqotay meel la isugu yimaad oo khayraadkeeduu uu dhamaado oo goboladii bariga ayaan lagu noolaan karayn.

Gudoomiye baashe; xildhibaan qodobee wixii aad xeerka ka odhanayso.

Md. Rayte; gudoomiye xeerkani waa xeer ka hadlaya waxa aan ka hadlayo oo dhan, markaa waxaan jeclaan lahaa in aad wax yar ii samirtaan.

sida ku qoran xeer 12 in degmooyinka kastamada leh wixii ka soo baxa 10% la siiyo iyada oo aanay miisaaniyada galin, halkaa waxaan u arkaa in ay laba arimood oo khalad ahi ku jiraan waana sharci daro waayo wax kasta oo dakhli ah oo dawlada soo galaa waa in ay toos u galaan miisaaniyada waana in lagu qaybiyaa miisaaniyada gudeheeda, wixii miisaaniyada dibadeeda lagu qaybiyaana waa sharci daro.

Qodobka kale kastamka meeshii la doono ayaa la dhigayaa oo waa meel laga soo galo waxaana la dhigaa madaarada iyo dekadaha iyo meelaha dalka laga soo galo wixii lagu cashuuraana wax meeshaasi leedahaya ama khuseeya maaha, degmada waxaa lagu

qiimeeyaa in-Land revenue, hadii ay noqon lahayd cashuureheeda iyo dakhliga ay soo saarto, waana laga dhoofiyaa wixii wadanka ka baxaya oo waxa kaliya ee aan dhoofinaa uu yahay Xoolaha Nool iyo Beeyada.

Markaa waxaa dhacaysa in meel waliba ay meel isbaaro dhigato sidii markii la samaynayay midaynta cashuuraha, oo degmo waliba ay neefkeeda iyadu cashuurato oo berberana xoolaha oo cashuurani ay ka dhoofaan, tanina nidaam maaha halkaana ku noqon mayno, ee waa in ay miisaniyada gashaa waana in degmooyinku wada helaan, waana in loogu qaybiyaa hab shuruudaysan oo isku mid ah oo cadaaladi ku jirto ay wax u wada helaan.

Wanan qabaa in uu xeerkanu uu noqdo mid cadaalad ah hadii aanu noqona waa qayru sharci, sidaa awgeed waxaan mudane gudoomiye leeyahay waa in uu waxii kab ahi ha yaraado ama ha weynaado waa in uu meel iskugu yimadaa waana in lagu daraa miisaniyada wasaarada Daakhilga sababta oo ah ilaa maanta kaabka dawlada hoose waxaa qaadanayay ama kala badh la hadha wasaarada maaliyada iyada oo wax sharci ah oo ay u raacday aanu jirin. Waa in wasaarada arimaha gudaha loo daayaa iyaduna waa in aanay u isticmaalin wax kale ee waa in u isticmaashaa kabka Degmooyinka oo kaliya, si cadaalad ahna loo qaybiyaa.

Darajooyinka Degmooyinka Gudoomiye Somaliland waxay lahaan jirtay nidaam sharci oo adag, marka ay darajooyinka ku kala bixi waayaan waxay ku kala bixi jireen siiniyaarati oo ka siiniyeersan ayaa la salaami jiray, sidaa awgeed waa in degmooyinka shuruudo muuqda oo aan ku xidhnayn qofka ra'yigiisa oo cad lagu qiimeeyaa, tusaale ahaa magaalo madaxdeeda hada goboladii la magacaabay ayaan xataa isku darajo ahayn waxa ay darajada ku qaadanayaana waa magaalo madax gobol markaa waa in ay isku darajo ahaadaan.

Waxaa kale oo jira Degmooyin wakhtigii ingriiska ahaa degmooyin *waxaana ka mid ahaa degmooyina Gar-adag iyo Degmada Laas-goray* kuwo hada la magacaabay ayaa dhaafay wax lagu saleeyayna ma jiro. markaa waa in la eegaa sida ay u kala qadiimisanyihiin, waxaanay isku mid ahaayeen degmooyinka Saylac, Gabiley, Ood-weyne, waxaan uga jeedaa wax shuruud ah oo lagu kala xushay ma jiraan *waxaan leeyahay labadaa degmo waa in ay la qiimo noqdaan degmooyinkaa ay la xiliga ahaayeen iyo kuwa ka danbeeyay ee soo gaadhay hada,* hadaan la siin alufkii hoos u jeeday ee uu igriisku bixin jiray, waana in ay niyada ku hayno in ay somaliland ku wada jiri karto cadaalada.

xeer dejintu waa meesha ay cadaaladu ka bilaabanto waayo sharcigii cadaalada dhigayay ayaynu haynaa, waxa aan haysanaa resource yar laakiin hadii aynu si cadaalada u qaybsano waxaan qabaa in aynu kuwada qancayno waana la kala nabad galayaa, isku midna waynu wada noqonaynaa, waana in aan joojinaa gobolaysiga iyo waxa kala

jiidashada aynu wadno oo qaarna la fogaynayo qaarna la soo dhaweynayo waxaan u arkaa siyaasad aan caafimaad qabin.

Waxaa kale oo aan wax ka odhanayaa Tirada Xildhibaanada ee wax laga badaley *Anigu waxaan qabaa in ay tahay Hargeisa ay tahay magaalo weyn oo milyan iyo dheeraar ay dhaaftay degmooyin badana wey leedahay waxaan qabaa in ay 25xildhibaan yeelataa waay tirada xidhibaanada oo la badiyaa wax dhibaato ah ma yeelanayso marka aan si caafimaad qabta u fakarno, sidoo kale tirada oo aad yaraysaana waxba ma jarayso,* markaa hadii aad leedihiin tuugtii ayaa badatay inta aan yaraysay ayuun baa qaybsan doona kharashaadkii oo wax is badelayaa ma jiraan oo uu jeedkoodu uu kordhayaa, mana aha calaamad lagu xakameeyaa musuqmaasaqa ee sharci ayaa lagu xaka meeyaa, aduunkana qofka lama aaminee waxaa la samaystaa sharci wanaagsan, waxaanan qabaa in system ku uu inaga xunyahay ee ayna dadku inaga xumayn.

Sidaa awgeed waxaan ka cabanayno halkii aynu ku xalin lahay waa halkan ee maaha meel kale, kumanaynaan darin sidii ay u shaqayn lahaayeen ama loola xisaabtami lahaa markaa waxaan *qabaa in tiradaa xildhibaana halkeedii loo daayo.*

Mudada Xilaka anigu waxaan qabaa ama aan tuhunsanahay ee aanu gudoomiyuhu inala wadaagin baan filayaa waanan tuhun sanahay waana sababaha xeerka dedejinaya.

Mudane gudoomiye hada xilkii wuu ka dhamaaday, xeerkoodii hore ee shaqaynayayna ma tilmaamayo, hasa yeeshee marka ay taas oo kale timaado *laba arimood ayaa muhiim ah sharciyan; midi waxaa weeyi dee hadeer kamay dhamaane hore ayay uga dhamaatay meel baana la maray, markaa mar labaadka meel kale lama mari karo waayo waa wax dhacay sharciguna ma ogola in aan mushkilad aad laba sharci u kala samayso, oo tii hore meel ayaad la qabatay oo mudo kordhin ayaad u samaysay.*

Hadaba marka ay sidaas oo kale dhacdo waxaa la isticmaala oo aduunka oo dhan ka jirta wax layidhaa u-e-kaasho sidaana lagu xaliyo dhibaatada jirta. *Anigu waxaan qabaa mar hadii hore mudo kordhin loo sameeyay waa in hadana mudo kordhin loo sameeyaa waayo sabab kale oo sharci ah oo meel kale loo maraa ma jirto mudane gudoomiye.*

Kala dirida golaha deegaanka sida xeerkii hore ku jirtay kala diridu waxay leedahay sabab oo golayaasha deegaanka oo dhan hal-mar lamawada kala diri karo, waxaana lagu kala diri karaa sida uu xeerku sheegayo wasaarada arimaha guduhuna madaxweynaha u soo jeediso golahaa, lakiin golayaasha deegaanka oo dhan lama kala diri karo.

Magaca xildhibaanka ama mudanaha Golaha deegaanka waan qabaa oo af-somaaligii ayaa inagu yar oo xildhibaan ayaynu isticmaalaa, xataa inaga iyo guurtidu in aynu kala duwanaano ayay ahad oo sida maraykanka waxa la yidhaa Senator qolada kalana waa Representatives, mudane waa mid aan ka qiimo yarayn xildhibaan waanaynu kala soo caynaaye erayadu ma kala qiimo badna, hadii kale counselors ha la yidhaa waayo erayo badan ayaan isticmaalaa waa in la af-soomaaliyeeyaa

*Waxaan soo jeedinayaa in gudi Ad-hoc committee ah loo saaro waayo wax ina de-dejinayaa ma jiraan ayaan qabaa waayo hadii kale marka uu ina dhaafo ayuu hadana inagu soo noqonayaa wsc.*

## Kal-fadhigii 39aad Fadhigii 24aad

**Salaasa, 23, April 2019**

**Quraanka: -** Md. Xaamud Cismaan Cigaal

**Gudoonka: -** Md. Baashe Maxamed Faarax.

**Ajandaha Fadhiga: -** Doodda Xeerka Is-maamulka G. iyo degmooyinka, maalintii 6aad

**Md. Cabdirahmaan Yusuf Cartan:-** **(27min 10sec),** Waxaan u mahad naqayaa Gudoomiyaha Golaha wakiilada, Xaldhibaanada, saxaafada iyo Xoghamahaba salaam ka bacdi, Gudoomiye xeerkan laga dooddayo ee xildhibaanadu ahmiyada siiyeen maaha mid iska yimi ee xeerka muhiimadiisa ayaa aad u qaaliya, markaas waan ku farax sanahay sida fiican ee looga qayb qaatay doodda xeerka, mar hadii uu Golihii inoogu yimid.

Gudoomye Qodobka ugu horeeya ee Mabaadiida, halkaas waxaan doonayaa inaan ka bixiyo tafsiir, hadaba xeerkani waxa uu ka hadlayaa xukun daadajin, Somaliland Qodobka siyaasiga ah ee shir kasta lagu soo hadal qaado waa xukun daadejin, sida shirkii Boorame iyo kii Burco, waayo Dawladii Siyaad Barre ee burburtey ayaa ahayd sababtu xukunkii oo caasimada Muqdisho isugu yimid, waayo wax walba waxaa loo doonan jirey Caasimada Muqdisho hadey tahay waxbarasho, baasaaboor, dhaqaale iwm, magaalo madaxdii labaad ee Hargeysina tuulo ayey ahay, may ahayn waqooyi oo keliya ee waxa ay ahayd wadanka oo dhan, sidaas darteed caasimadii oo kaliya ayaa noolayd oo waxa wadanka ka soo baxaya lagu cuni jirey, taasina waxa ay sababtey in wixii macaan jecel

ah iyo kuwa raba iney dhacaan dawlada iskugu yimaadaan, waxay ku urureen caasimadii, halkaaseyna joogi jireen ,

Sidaas darteed, dalka intiisii kale leydhka ayaa u bakhtiyey taasina waxa ay dhalisey burburkii ka dhacay somaaliya, waayo magaalo kaliya ayaa noqotey dawladii, hadaba markii Somaliland soo ceshatey dawladnimadii waxaa fiican in laga illaaliyo xukunka caasimada, waayo waxaa fiican in cid walba adeeg loogu geeyo meesha ay joogto, Ceerigaabo luugu geeyo adeega oo Borame loogu geeyo iwm, meelaha Wadankeena ugu burburka badney waxay ahay Hargeysa, imikana Hargeysi aad ayey u dhisantey hadaba Somaliland waxa ay u egtahay dawlad magaalo ah, Hargeysan uma fiicno in umada Somaliland yimaadaan oo ay soo buuxiyaan magaalada Tuuga iyo dibjirku, hadaba xalku waxa uu ku jiraa xeerkan aan gacanta ku hayno si Caasimadu u badbaado, sidaas darteed, waan in aynu sameyno maamul daadejin si siyaasiya ah.

**Qodobka 7aad** shuruudaha lagu magacaabi karo Gobol iyo Degmo waxaa ku qoran waxa loo eegayaa baaxada dhulka, ama badka, hadaba taasi hadal weeye ee baaxada la eegayaa waa tee, ma Dadkaa la eegayaa mise wax kale, tusaale ahaan Gobolka sanaag 40% ayuu ka yahay Dhulka Somaliland, hadaba maxaa Degmooyin ka jira ,Ceerigaabo waa (A) Badhan iyo Ceel Afweyn waa (B) laasqorey iyo garadag waa (C) shantaas degmo yaa ka jira Goboladaas bari, hadaba inee ayay isku jiraan Degmooyinkaasi, Badhan iyo Ceerigaabo waxa ay isku jiraan I65k m, ceel Afweyn iyo ceerigaabo 85km , hadab marka ay intaas Degmooyinkaasi isku jiraan maxay la kulmi karaan xaga caafimaadka waxbarashada ama adeega kale ee Xagga nolosha ah,

Hadii aan eegno dhinaca Galbeedka Hargeisa waa (A) Booramana waa (A) waxayna isku jiraan II8km , Gabiiley oo (A) Hargeysa oo (A) waxa ay isu jiraan 58km, Berbera oo (A) iyo Burco (A) waxay isu jiraan I35km, hadaba waa in aynu meelahaas gaababka ah ee Goboladu ka kal fog yihiin aynu fiiro gaar ah siinaa, Goboladaas Bariga waxaa aad ugu badan dumarka foosh ama umul aroorka, Anigu waxaan qabaa in gudidu aad u shaqaysey, marka la eego xeerka sida ay u soo qoreen laakiin waxaan mooda Degmooyinkii xakuumadu magacawday iney badh ka tegeen.

**Qodobka 89aad** ee ka hadlaya kabka, waxaan soo jeedinayaa in loo badiyo degmooyinka (D) waana dadka u baahan, waana ina la daba gala lacagtaa kabka, hadaba anigu lacagtaa kabka ah waxaan odhan lahaa waa in laga qaado Gobolada (A) lana siiyaa kuwaas u baahan ee ay waxa u tareyso ee (D), waayo qofka xayraanka ah waa la iska muslaxaa waxna la siiyaa, takale Degmooyinka kabka wax ku qabsada waxaa in la siiyaa abaalmarin sababtoo ah waxay ka soo baxeen xilkoodii, mana jecli in kabka la iska bixiyo oo afmiishaaradu jeebka ku shubtaan, sida marar badan dhacda, hadii anigu aan qaybiyo Wasaarada Arimaha oo la siiyey 4% waan ka qaadi lahaa, Kabka Gobolada (A) waa ka qaadi lahaa dabadeed waxaan siin lahaa Gobolada baahan.

**Md. Maxamed Cali Xirsi** **"46 min 18 sec"** Hadii aan Xeerkan bilaabo waxaan jeclaan lahaa inaan marka hore ku bilaabo madaama Xeerkani muhiim yahay Qodobo inoo wada muhiim ah oo u baahan inaynu isla garano, Xildhibaano hore ay ka dhawaajiyeen sidaan jecelahay ana aan doonayo inaan xoojiyo kuwaas oo Xeerka iyo Golahana khuseeya.

Procedure-ka xeerarka oo dhan aynu marayno sida Xildhibaanadu sheegeen in Cidii Xeerka wadata Wasaarada ha noqoto ama hay'ad ha noqote Golaha hor keento oo Golaha ka hor akhrido ujeedadiisa, waana mid Golaha iyo shaqadiisaba u wanaagsan hore goluhu u samayn jiray laakiin indhowaytoba aan lagu arkin, Golaha micnihiisay sare u qaadaysaa, Golaha awoodiisa iyo sumcadiisa ayay sare u qaadaysaa in cid walba oo wax ka doonaysa soo hor istaagto oo ka sharaxdo inagu su'aalo badan ka waydiin lahayn, marka gudidda loo dhiibo Xeerka iyana waxaa muhiima inay Xeer-hoosaadka Golaha raacdo oo hadii Gudiddu Xeerka Golaha hor keento waxba kuma laha ee halkaas bay kaga hadhaysaa, waxa kaliya ee ay ku leeyihiin waa sixitaan (point of correction). Anigoon gudidda u jeedin waa procedure inaga lumay baad moodaa, Gudoomye waxa dhacday in Gudidii laftigeedii ay ka dooday Xeerkii oo doodii la qoray.

Arrinta saddexaad waa Secondment-ka, Marka Xeer ama qodob ama ra'yi xildhibaan keenay la secondmentgareyo macne wayn bay Xeerka, hadal-qoraalka, shirka iyo Golahaba ku leedahay oo ay khasab tahay in lagu daro. Xildhibaanadana mid baan leeyahay, waynu dooddnaa Gudoomiye, marka minuteska dooddaas la soo qaado waxa laga yaabaa wax xildhibaanu ka dooday wax wayn oo la soo qaadaaba in aanu ku jirin, mar hadaanu qodob tilmaamin, mar hadaanu wax badalin, mar hadaanu wixii la keenay ra'yigiisii aanu ka dhiiban ee wixii noqoto wacyiglin, taasna marka minuteska sida hadhowba la inoo keenayo marka la akhriyo in waxa laga dooday iyo wax yaalay farqi badani u dhexeeyo oo xataa xildhibaankiiba iskula yaabayo, waxa la inaga doonayaa waa qodob ama hebel farqadaas S, B ama C waxaasaa ku qoran ana sidaas ayaan u badalay.

Xildhibaanadu markay dooddaan Gudoomiye marka Minuteska la keenayo waxa iyana muhiima, in minuteskaad Xildhibaanada dooddooda la keeno oo aynu aragno, hadaad iska dooddo oo wax soo akhrido habeen iyo maalina ku soo jeedo halkaasna markay timaadona aan waxaagii waxba laga soo darin adigoo ra'yi fiicankeenay waxay taasina keenaysaa Gudoomiye in Xildhibaano badan ka magaan dooddiioo macne badan aanay yeelin, markaa waa in Shirgudoon ahaan aad muhiim ka dhigtaan arrintaas, sidoo kale in ra'yiyada fiican ee Xeerka anfacaya ee aan dooddaba ku jirin aynu keeno mar haday Xeerka anfacayso aynu qiimayn gaar ah siino, intaas ayaan ku koobaya hordhacayga.

Mudane Gudoomiye, Xeerkani waa muhiim Xeerkani waa muhiim oo Qaranka oo dhan iyo Golahaba waa u muhiim, wakhti baynu joognaa Golaha isha lagu hayo oo shacabku isha ku hayaan, Xeerkani waa mid saamayn ku leh bulshada inagana saamayn inagu yeelan doona, waxa fiican inaynu aad uga baaraan degno oo aynu eegnosida Xildhibaanaduba sheegeen Xeerkani ma shaqeeyay waa su'aal aynu ku fadhiisino wax

ka badalka Xeerka mise muu shaqayn? Ceebaha Xeerkani leeyahay waa maxay? Golahan Deegaanka aynu ka hadlaynaa waa gole muhiima oo waddamada ugu anfac badan, waana halka isha shacabku hayo, labadeena goleba wuu hayaa, hase yeeshe mar hadaynu koodii maanta gacanta ku hayno waxaa muhiim ah, aynu ku salayno Qodobada aynu wax ka badalayno iyo waxynu ku salaynayno canaanta Golahan la siinayaa ma xeekay ka timi? Haday Xeerka ka timi waa inaynu Xeerka hagaajinaa oo toosina, mise Xildhibaanada iyo maayarada ayay ka timi? In iyada laftigeeda eegno qodobada iyaga khuseeya oo sixitaan ku sameeyo.

Hadaan eego wax ka badalka Gudidda, waxaan runtii aad ugu mahadnaqayaa shaqaynta ay ka soo shaqaysay iyada iyo xukuumaduba, xeerku waa 108 qodob, boqol iyo siddeedaas qodob 48 qodob bay wax ka badaleen kaabisna ku sameeyeen, waxaan qabaa horta gidigiis wuu u baahan yahay 108 qodob halku ka yahayna 200 iyo 300 oo qodob baa laga dhigi karaa, dalalka inagu xeerar Xeerarka Gobolada iyo deegaankoodu gudoomiye 500 oo qodob bay qaarkood marayaan, taas macnaheedu waxa weeye Xeerku waa jaranjaro hadaad jaranjarooyinkaas mid dhaafto iminka 108 jaranjaro weeye, dhibaatada Xeerkan haysata waxa weeye jaranjarooyin fara badan fara badan buu ka booday, marka inaynu ka fiirsano oo buuxino meelaha banaan baa muhiim ah, 108 daas iyagoo Gudiddu ku mahadsan inay 50 ka gaadhsiiyeen in 50 kale laftigoodu u baahan tahay in la giigiiyo oo wax lagu daro jaranjarooyinka, sidoo kale laga fakaro waxaan xeerka ku qornayn ama ra'yi ka maqan in loo fakaro oo maskaxda la tuujiyo.

Waxaan Gudoomiye arraartayda hore ku soo koobayaa in iminka dooddani mid qurux badan ay tahay shacabkuna wax badan ka rajaynayo oo golayaashii oo dhaliil badan ka jirto la doonayo in lagu saxo xeerkan, sidaa darteed, waxaan ugu horeyn soo jeedinayaa in Gudi gaar ah (ad hoc committee) loo saaro sida xeer-hoosaadkeena Qodobka 19 dhigayo oo sheegaya in Shir-gudoonka ama Gudoomiyuhu xaq u leeyahay inuu ururiyo ama gudi u saaro arrinta uu doono, marka inaynaan ku deg-degin Xeerkane Gudoomiye gudiddaasi waxay soo qabanaysaa

- Inay soo ururiso waxay xildhibaanadu ku dooddeen oo dhan
- Waxay midaynaysaa oo isku keenaysaa arraa'da ka fog-fog ee Xildhibaanada
- Waxay buuxinaysaa wixii ka dhiman ee gaab si xeerku isagoo dhamaystiran oo aynu ku midaysan nahay golaha uga baxo ee aan lagu kala foodine wax la isu soo ururiyo gudoomiye.

Waxa kale oo aan ku soo koobayaa Goluhu ha is-taago meel. Goluhu hadaanu meel istaagin oo mawqif yeelan waa dhibaato, xildhibaanadii ku dooddayay 2/3 ha laga dhigo ayaa dhinicii kale isa soo taagaya taasina waa wax goleheena ceeb ku ah, marka waxaan qabaa in mawqifkiisa meel istaago.

Hadaan galo Xeerka, anigoo qayb ka dhigtay ama go'aan ka dhigtay in Gudi gaar ah (ad hoc committee) loo saaro, anigoo xaga dambe ka bilaabayaa Xeerka inta badan xage hore ayaa laga bilaabaaye.

**Qodobka 107[aad]** ee awooddaha Gudidda Golaha Wakiiladda, halkaa anigu waxaan badali lahaa **"Awooddaha Baarlamaanka"**ma khuseeyo oo kaliya Gudidda Golaha Wakiilada ee xeerku Baarlamaanka oo dhan buu marayaa keena iyo Golaha Guurtida, marka halka aynu magaca waynayno oo awooddaha Baarlamaanka ka dhigo weeye. Gudidda waan ugu mahadnaqayaa Xeerarka aynu had iyo jeer ansixino wax awoodda ah oo inagu aynu leenahay kuma darsano si aynu ugu dabagali karno, awoodahaas oo ah ku daabagalno, ku daba socono, ku kormeerno iyo yeedhitaan.

Qodobkaas Gudiddu waxay ka dhigtay *"Guddiyada Golaha Wakiilladu waxay awood u leeyihiin dabagalka, la socodka hawlaha Gobolada Iyo Dagmooyinku u xil saaran yihiin, iyagoo u yeedhi kara waxna ka waydiin kara hawlaha iyo waajibaadka ay umadda u hayaan, iyagoo cuskanaysa qodobka* ***53[aad]*** *farqadiisa* ***7[aad]****ee Dastuurka qaranka JSL"*Qodobkaas 53[aad] ee Dastuurku wuxuu odhanayaa Gudoomiye "**Guddiyada Golaha Wakiiladu waxay awood u leeyihiin in ay Wasiirka ama madaxda hay'adaha Dawladda ama madaxda sare ee kale ee Qaranka ee hawshoodu khusayso, in ay wax ka waydiiyaan gudashada xilkooda"**

Halkaas waxaan ka hadlayaa wax hore u dhacay oo khibrad ahaan na soo martay, waxaa dhacday in Xukuumadii hore Golayaashii deegaanka ay u diiday Golaha inay yimaadaan, gaar ahaan Gudidda Dabagalka Hantida Qaranka barigii ay shaqayn jirtay ee aan anigu Gudoomiyaha ka ahaan jiray, garyaqaanka guud oo qodobkaas ka garnqaya wuxuu yidhi awood uma laha oo Gudiyada Golaha Wakiiladu uma yeedhi karaan oo iyagu kuma jiraane waxay u yeedhi karaan Wasiiro iyo hay'addaha kale iyo madaxda qaranka, Golihii deegaanku Wasiiro maaha, hay'ddaha Qodobka 113aad sheegay maaha, saddexdii qodob ee Dastuurku ku sheegayo isla qodobkaas inay u yeedhi karaan way noqon wayday, wuxuuna garyaqaanka guud ku garnaqay in aanay ku jirin dawladaha hoose oo aan u yeedhi Karin, waxaana halka ka dhashay muran waanu u yeedhi karnaa iyo uma yeedhi kartaan, anigoo hadaba ku faraxsan qodobkaas hase yeeshee waxaan qodobkaas u badalayaa si aynu ugu yeedhi karno oo aan sidaas hore madmadawgu ugu jiro garyaqaanka guudna uu ku sharaxay barigaas ay noqon karto.

Marka waxaan u dhigi lahaa **Qodobkaas 107aad farqada 1aad***"Gudiyada Baarlamaanka iyo Golewaynuhuba waxay awood u leeyihiin in ay yeedhi karaan duqa degmad***a** *iyo Gudoomiyaha Gobolka si ay wax uga waydiiyaan Xilalka ay qaranka u hayaan"*farqadaas 1aad waa yeedhi taan.

**Farqada 2[aad]** *"Waxa waajib ku ah duqa degmada iyo gudoomiyaha Gobolka inay u soo gudbiyaan warbixino qoraal ah hadii Baarlamaanka iyo gudiyadoodu ka codsadaan"*halkaana waxaan ku cadaynayaa marka aad u yeedhayso waad u yeedhay, waxaad dhacday inay noqotay

mararka qaar in hadal-qoraaladoodii iyo warbixino noo keenaan aan ka codsanay, waxay ku doodi jireen waad noo yeedhi kartaan wixii warbixino afkaan iyadoo hadal ah idinku siinaynaa, taana waxa fiican inaynu ku darno mar hadaynu warbixino ka doonayno.

**Farqada 3aad** *"Golayaasha Deegaanada waxaa waajib ku ah inay xisaab xidhyada u soo gudbiyaan, haday xisaab xidh bileed tahay, haday xisaab xidh saddex bilood tahay iyo haday xisaab xidh sanadeed tahayba Golaha Wakiilada markasta oo ay u baahdaan"* taasna waa muhiim Golaha gaar ahaan gudidda u qaabilsan dabalka iyo ilaalinta hantida qaranka u soo gudbiyaan hada iyo jeer xisaab xidhyadaas waxaana qabaa inay golayaasha deegaankana muhiim u tahay inagana awoodeheena iyo shaqadeena sidaas ugu cadaadaan. Marka waxaan soo jeedinayaa in lagu daro oo qodobkaas laga dhigo saddexdaas farqadood oo mid yeedhitaanka tahay, midna inay minuteksa iyo warbixinaday ka dalbadaan u soo gudbiyaan tahay, midna uu xisaab xidhyada ansixinayo, oo aanu ku koobnaan qodobkaas dastuurka ee madawgu ku jiro.

**Qodobka 105aad** ee Awoodda dawlada dhexe, taas laftigeed wax badan baa ku dari lahaa inkasto aanan iminka soo koobi Karin, waxaana odhan lahaa Gudoomiye in gudiddaas loo saarayaa soo habayso.

**Qodobka 102aad** ee heshiisyada Qandaraaska, Qodobkaas wuxuu isna u baahan yahay in aad loo eego, sida dhacday waxay golayaasha deegaanku golayaasheena kaga duwan yihiin waa gole maaliyadeed oo maaliyad maamula$30-$40 milyan oo dollar bay maamulaan, lacagtaasi waxay ka timi cashuurtii umada, waxa muhiim ah in cashuurtii dadka lagu celiyo, waa inay aanay noqon golayaasha deegaanku service-bixiyayaal iyagu, laakin sida aduunyada ka dhacda contracts bixiyaan oo lacagtii umada ku noqotaa, tusaale waddooyinka oo kale, waddooyinka halkay iyagu qalabka ka iibsanayaan waxaa ka haboon inay shacabka qandaraasyo ku siiyaan oo shacabkii ku celiyaan, inay wax kasta iyagu qabtaan waa halkaa meesha mushkiladu ka jirta ee aanay lacagtii dadku ugu noqon karayn, hadii wax la soo iibinayo waa in qandaraasyadii martaa oo Xeerkii qandaraasyada loo raacaa oo gudidda qandaraasyadu bixisaa, hadii waddoyin la dhisayo, hadii laydh la samaynayo, hadii repair la samaynayo waa in highet companygu galaan waana sidaas sida mujtamacu u noolaan karo, saddexdii bilood markay fadhiistaan golayaashu waa inay intaas oo milyan umada ku celiyaan iyagoo adeeg u bixinaya, laakiin haday iyagu wax walba yidhaahdaan anaga samaynayna waxa iman doonta shacabkii oo aanay cashuurtii ku noqon oo cashuurtoodii taba iyo in musuqmaasuq badani yimaado, hase yeeshe markay sidaas ugu celiyaan waxay u badanaysaa qaranka iyo shacabkii cashuur bixiyaha ahaa.

**Qodobka 92aad** waana isla qodobka xisaab xidhka golaha deegaamada ka hadlaya, waxaan ku darayaa **farqad (C) oo ah inay Golaha Wakiiladda u gudbiyaan** maadama aynu awoodeheeniina aynu gashanay, hadii kale waxeenu hadhow muran bay noqonayaa, waana golihii dalka u sareeyay, waana golaha ay shaqadiisu tahayba inuu

dabagal ku sameeyo haday miisaaniyad tahay iyo shaqo tahayba, taasna sidaas ha loogu daro ayaan soo jeedinayaa.

**Qodobka 89aad** oo ah qodobka Golaha oo dhami ka hadlayay ilaa shalay oo ah mid muhiima, waa nidaamka qoondaynta kabka oo gudiddu si qurux badana ay u soo dhigeen waxna u soo qaybiyeen, halka ugu damabeyssa qodobkaas ee khusaysa "sida ku cad Xeerka midaynta cashuuraha ee Xeer Lr. 12/2000" xeerkaasi aynu ka hadlayno ee xeerka midaynta cashuurha waa xeerka ay cabashada ugu badani ka taagan tahay, waa xeer dhamaan goboladii aan mari jirnay ay ka cabanayaan, Gobolka Maroodi jeex baa ka cabanaya, oo sool baa ka cabanaya, oo sanaag baa ka cabanaysa, oo gobol walba wuu ka cabanayaa Xeerkaas, xeerka laftigiisu waa xeer dulman oo in badan jiray waana 21 bayj ah, waxaanu barigii soo jeedinay in dib loogu noqdo oo wax laga badalo, Xeerkaas gudidu waxay leedahay waxaanu ka soo qaadanay qodob, qodobkii waa la nasakhay oo halkan waxaa ku qoran sharci kasta oo ka soo horjeeda xeerka waa la laalayaa, inaguna qodob kaliya ayaynu ka soo qaadanay oo halkan ka nasakhnay xeerka 21 bayj ahaa waa sidiisii.

Marka waxaan soo jeedinayaa Gudoomiye waligeed may dhicin in xeer dhan inta qodob laga soo qaato la dhaho waa la nasakhay, waxaa ka qurux badan oo sharcigu odhanayaa waa qayru sharci kama hadli karno xeer qodob kaliya laga soo qaatay oo la leeyahay waa la nasakhayaa, waan ku raacsanahay in la badalo gudidda, waan ku raacsanahay kan in wax ka badal iyo kaabis lagu sameeyo, waan ku raacsanahay in cashuuraha xeerkani jideeyay yihiin kuwo gabaw ah, tusaale, geelo oo kale wuxuu leeyahay 5 kun baa laga qaadayaa, adhiga oo kale waxa laga qaadayaa 200 shilling waana xeer mudo jiray, marka waxaan soo jeedinayaa qodobkaas aynu ku wareernay halkaas aynu ku xidhno madaama oo uu qayru sharci yahay, waayo xeer xeer lagama nasikhi karo, xeerna qodob laguma nasikhi karo, laakiin xeer waa la nasikhi karaa oo waxaynu nasikhi karnaa markaynu xeer lr. 12 ka dooddno oo wax ka badalno, arrintaasna gudida gaarka ah inoogu dara, waana qayru sharci oo ka doodi mayne ha loo noqdo Xeer Lr. 12 oo gudidda loo saaro ha la soo kaabto xeerkas gabigiisaba ee maaha in qodob kaliya laga nasakho.

**Qodobka 87aad** ee Xil ka qaadista duqa, gudoomiye waxan qabaa waa qodob aynu in badan mooshin ka keenay oo mooshinkii dib loo dhigay, anigu waxaan qabaa oo aan markastaba qabaa sida qaranka oo dhan in cod hal dheeri ah laga qaado, waayo caqli maaha in masuul simple majority lagu doorto la yidhaahdo 2/3 baa laga qaadaya, taasina waa in cid gaar ah loo xidhayo, marka waxaan qabaa in hal dheeri laga qaado.

**Qodobka 65aad** ee awoodda sharci dejinta**Farqadiisa 2aad** waxay sheegaysa in Xeerarka Golayaasha deegaanka loo gudbiyo garyqaanka guud iyadoo loo soo marinayo wasaarada arrimaha gudaha, inaga xeerarka golayaasha deegaanka wasaarada arrimaha gudaha inoo keenta ee garyaqaanka guud inooma keeno, marka maaha in la isku xidho laba ha'ayddood oo xeerku isku xidha waa laga qurux badan yahay, marka waxaan qabaa inaynu u dayno Wasaarada Arrimaha gudaha haday la tashanayso garyaqaanka

guud iyo haday la soo tashanayso garyaqaan u gaar ah, laakiin maaha lagu xidho garyaqaaka guud wasaaradii.

**Qodobka 49aad**ee Magacaabista iyo Xil ka qaadista xoghaya furlinta, isna wuxuu inoo sheegayaa oo cadaynayaa oo waxyaabaha xilka laga qaadayo xoghayaha fulinta iyo shuruudaha qofka loo magacaabayo, wuxuuna ku soo koobay waxyaabaha laga qaadi karo hadii xoghauhu is casilo iyo hadii uu sababo caafimaad u gudan waayo xilka oo labadaas kaliya lagu soo koobay, laakiin maanay dhicin karinn wasiirka arrimaha guduhu iyadoon labada midna aanay dhicin inay ka qaadi karaan? Way dhacda oo waxa laga qaada badal la iska badalo uun, taasna awoodda aynu galino in Wasaarada arrimaha guduhu ka qaadi karto haday u aragto in baahi jirto marka aynu galino oo ku darno **"Wasaarada arrimuhu guduhu waxay xilka ka qaadi karta markay u aragto inay baahi is badal ah ay jirto"**taasna waxaynu u siinay cidii ay khusaysay ee Wasaaradii ah ilayn ma badali karo hadaanu dambi galin oo aanay waxba jirin oo musuqmaasuq oo kale jirine, marka halkan waxaynu ku cadaynay in is badal lagu samayn karo oo siduu doono u dhigi karo.

**Qodobka 33aad** ee kala dirida Golaha, sida xaaladan aynu ku jirno, waxa loo soo dhigay waxaan qabaa laba suneba way jiraan, mid ah inay iska joogaan oo tii Jiciir oo kale ah oo aanay cidiba ka hadal ilaa inta laga dooranayo kuwii badali lahaa, waynuna soo aragnay oo xeer bay noqon kartaa, tan kalena waa sunaha aynu isna soo aragnay ee Golaha guurtidu u kordhsiay, labadaasba aynu soo aragnay inkasato xeerar qorana aanay ahayn, marka anigu waxaan qabaa in sidaas Golaha guurtida loo daayo oo kordhis oo dhan aynu meel ku ururino oo eedeeda iska leexino madaama kordhis oo dhami eed iska leeyahay, Marka Sidaas Gudiddu u keentay ha loo daayo oo Mandate dhab ah oo hadii doorasho dhici waydo ay Golaha guurtidu kordhin karaan, hase yeeshee aynu eegi karno war kordhiskan ma soo af-xidhi karnaa oo qodob af-xidhi kara ma keeni karnaa, oo dawlada ma ku xidhi karnaa inay doorasho joogto ah qabato, oo tan dastuurku sheegay ee ah dagaal, burbur iyo duufaano iyo abaaro dhaca mooyaane, marka xeerarka inoo soo socda aynu ajande ka dhigano bahashan kordhinta in la af-xidhno inaga u badnayne cid dambe si aan loogu kordhin soo xidhno ayaan qabaa.

**Qodobka 28aad** ee dhowrsanaanta Xubinta Golayaasha, mudane Gudoomiye halkan bay ka timi Golahan oo xildhibaano halkan fadhiya ayay ka timi inay dhawrsanaanta ka hadleen iminka aan ka hadlayne, waa sababta aan u lahaa bal Golahani meel ha istaago oo xildhibaanadani meel ha istaagaan ilaahay bay tiisa tahaye, ra'yiyaa baa meesha yaal in la isku miisaamo u baahan, waa sharci waxaynu ka hadlaynaa ee maaha shakhsiyaad, ra'yiyada meesha yaala waxa weeye dastuurku muxuu dhawrsanaanta ka leeyahay, xeer dhawrsanaana ma leenahay? Golayaashaa qaranka, madaxweynaha iyo golayaasha deegaanada sidee baynu isu waafajinaa dhowrsanaantooda, Gudoomiyaha meesha fadhiyaa dhawrsanaan buu leeyahay aanay inta kale lahayn, madaxweynuhu protocol gooniyuu leeyahay, xildhibaanadeenu protocol gooniya leeyahay, golayaasha protocol iyo magacayaal gooni gooni ayay leeyihiin, waxaas inaynu is waafajino oo xeerar

hadaanay hore u jirin inaynu inagu dejinaa la inooga fadhiyaa inaynu labac labaclayno maaha, dastuurku muxuu leeyahay waa xeer waxaynu ka hadlaynaa, Gudiddu waxay sheegtay intaas oo boqol oo nin dhawrsanaanta ma lawada siin karaa waa su'aal meesha taala, macnaha dhawrsanaanta laftigeeda waa in dadku fahmaa, qof kasta oo la doorta sida loo dhigay dhawrsanaan ma laha, iminka dhowr xeer oo aduunyada baan la soo akhriyay, xeerarka aduunkaynu eegna inta badan oo inagu wax hindisno oo iskama lihin, mid kalena way barbar taal oo noqonaysa inagu qaran gooniyaynu nahay, dhawrsanaan gooniyaynu leenahay, inaga waa inaynu sharciga waafajino, taasna waxaan leeyahay inaynu gudida gaarka ahi isa soo cunsiiso oo waxaynu isku raacsanahay keento, ilayn waxa muhiima inaynu wax isku raacnoinaynu kala foodno maaha.

**Qodobka 16$^{aad}$** sidii hore ayaan u dayn lahaa anigu.**Qodobka 7$^{aad}$** ee shuruudaha lagu magacaaabi karo Gobo lama degmo, waxay gudiddu inoo sameeyeen baaxada dhulka, tirada dadka ku nool, wax soo saarkeeda dhaqaalahay leedahay, isku filnaansho adeegyada ah inay gaadho, afartaas arrimoodba waa muhiim, laakiin habayn badan bay u baahan yihiin, baaxada oo kale waxaan ku raacsanahay sidaas C/raxman Cartan u sheegayayoo ah in baahada la eego, miisaaniyada la qeexo, isku filnaanshaha la eego, intaasba gudidda waan ku raacsanaha, hase ahaatee Gudoomiye waxaan ku dari lahaa qodobo kale, waxaynu nahay dal yar oo doonaya inu aduunyada ka qaybqaato, inaynu is yarayno dooni mayne inaynu balaadhinayno doonaynaa, waxaynu doonaynaa inaynu Gobolo iyo degmooyin abuurno oo dad ku beerno, waxaynu doonaynaa in mab'da iyo siyaasad lagu doorto, intaas iminka la doortay ee halkan ku jira ee farabadan inta midna laguma dooran, waxa lagu doortay duruufo keenay oo strategyad iyo siyaasad, political decision wali wuu ina saaran yahay, markaynu political decision qaadanayno waa inaynu dawlada la eegnaa, iminka goboladaas bariga oo kale waa Gobolo iyo Degmooyin aynu doonayno inay la meeqaam noqdaan oo soo gaadhaan gobolada iyo degmooyinka dhexe iyo galbeed, waana gobolo iyo degmooyin aynu doonayno inaynu tusno wax tar iyo inaynu hanano qalbigooda, caqligooda iyo dadnimadooda oo aynu ku hanano siyaasad, xoolo galin iyo dhisitaan la dhisayo, ma laha dhaqaale laakiin baaxadii iyo dadkii bay leedahay, waxa jira Gobolo iyo Degmooyin aynu doonayno inaynu abuuro dhaqaale oo kuwa jira ka dhaqaale badan kara, abaal marin baa imanaysa, waa maxay waxa baligubadle iyo salaxlay degmo ku noqodeen, waa abaal marin waxay qarankan u soo qabteen iyo qarankan oo u qaxay waxa looga reebay baan garanwaayay, doqoshayna waxay ahayd la mid eh, abaal marintay soo galaysaa.

Waxa kale oo aan gudidda ku raacsanahay in laba sano gudohood lagu qiimeeyo, laakiin gudoomiye inaynu wax akhrino maaha oo wax kasta xukuumada ku celine ee waa inuu Xeerkani ka hadlaa oo aynu inagu sheegnaa inta Xeerka lagu qoro dawladuna fulisaa, qiimayntana **waxaan Gudoomiye anigu soo jeedinayaa in Xeerka lagu daro oo aynu samayno Komishan Qaran oo qiimeeya Gobolada iyo Degmooyinka oo muddo lix bilood ah ku qiimeeya, waxaana magacaabaya Madaxweynaha, waxayn koobnaanayaan laba xubnood oo Golaha Wakiilada, laba Xubnood oo Golaha Guurtida iyo shan xubnood oo Wasaarada Arrimaha Gudaha ka socda"** inaynu sidaas

Xeerka ku qorno, taasi maxay keenaysaa iminka doorasha la galayaa dawlad ku dhacaysa ma jirto inay laba sano ku taabato Gobol ama degmo, marka aynu ka fogayno Xukuumada oo Goleheena iyo Golaha Guurtidu si heer qaran ah ha ka qaybqaato qiimeynta.

Marka komishan qaran oo shaqeeya inta hawshaasi socoto aynu abuurno, xeerkana sidaas komishankaas qiimeynta aynu ugu qorno Gudoomiye waayo waa inaynu Xeerka wax ku darna aan ahayn inta meesha ku qoran iyo inaynu badalo qodob iyo farqad hore ugu qornayd oo inagu dictate-gareyno oo nidhaahno waa xeer dalka u soo baxay, waxaana ka mid ah degmooyinka laftigooda qaar aynu inagu A siino ama B siino ama C ka dhigno inagoo eegayna qiimayntaas iyo faa'idada dhaqaale, marka go'aamada caynkaas ah sida komishankaas ah aynu qaadano. Laakiin hadaynu dawlada ku celino oo nidhaahno iyaga qiimeeya inagoo labaatan sano marayna maanta taas micnaheedu waa shaqadeenii maynu gudan.

Dp World baa inoo timi, waxaa la isu diyaarinaya mashaariic badan, dhaqaale badan baa inaga soo galaya, itoobiyaynu heshiis la galnay, shalay waad arkayseen Berbera wax la keenayay, doraad waad arkayseen in wax la keenayay, waxaas oo dhan waxaa loo wada waa arrin dhaqaale oo waxa la isu diyaarinayaa Dekada Berbera oo DP World doonaysa boqolkaas milyan ee itoobiya gaadhsiiyo ilayn inaga way ina dhaafaysaaye, qorshahooda dhow waa sidaa inaga laftigeenu inaynu siyaasad ka yeelano weeye, dekado qalalan baynu leenahay, dekada qalalan waxa ka mid ah Tog-wajaale oo inoo dhisan Degmo ahaan Waa D Wajaale waa inaynu B ka dhignaa, Baligubadle ayaa isna ka mid ah dekadaha qalalan, Duruqsi baa dekada qalalan, Buuhoodle baa dekada qalalan ah, Bali-dhiig baa dekad qalalan ah, khasab maaha in ay meel kaliya marto oo gasho laakiin meel kasta oo Dadka Itoobiya ka dhowyihiin baa laga galinayaa midba meesha ku toosan waa inaynu mashruucaas u qaadanaynaa oo isu diyaarinaynaa dekada qalalan, aynu u diyaarino oo halka ay D derajada ka wada marayaan derajada B intaba ka dhigno, Tog-wajaale, Allaybaday, Dururqsi, Bali-dhiig, Salaxlay iyo Buuhoodle intaas oo D iyo C ah aynu B ka wada dhigno oo diyaarino Dekadaas.

Political Decsion baa timi Gudoomiye aynu qaadanayno oo tahay inaynu qaadano, taas hore waa tii mashaariicda, Gobolada Bariga Dhahar, Taleex, Xudun, Laasqoray iyo Caynaba intuba waa political decsions oo dadka Goboladaas degan ay dambeeyaan inaynu C ka badalno B ka dhigno, hadaynu B ka dhigno dhaqaalohoodii baa kordhaya, Taleex iyo Xudun markaan B ka dhigno horta kabkoodii baa kordhayo magaalooyin kaamil ah bay noqonayaan, dadkoodii baa kobcayo magaalooyin kaamil ah bay noqonayaan, hadaynu nidhaahno dadku ha ina taageero dee shaqayn mayse kabka aynu gaadhsiino oo inagu intaynu iska gooyno oo sadexdan degmo ee wax kasta ku soo urureen aynu u ogolaano oo dawlada yaynaan u dayne inagu halkii C ah B aynu gaadhsiino intaynu isku raacno oo kabkooda aynu kordhino ee yaanay noqon wax la is barbaryayo.

Waxaan ku soo koobayaa Gudoomiye dekadaha qalalan aynu isla qaadano inaynu kordhino oo political decsions-ka degmooyinkaas aynu isla qaadano, abaal marintaas Baligubadle ha la raaciyo Doqoshay, Xeerkan aynu ku salaynayno maamul daadejin si macne u yeesho xeerku, markaynu maamul daadejin ku salaynayno waa in xildhibaanada sida loo soo dooranayo wax laga badalaa, marka Maroodi-jeex oo 25 ahayd aan iska dhufto 17 aynu ka dhigno macne badan oo samaynaysaa tiro yaraantu ma jirto sida Rayte sheegaye, waxaa macno badan samaynaysa qiimaynta sida loo qiimeeyo, **waxaan leeyahay halka laga dooranayo Maroodi-jeex oo dhan ama Hargeysa oo dhan ha laga doorto Xaafad oo shan xaafadoode shantaas mid shan ama afar xildhibaan hadba tiradii la isla garto xaafadiiba ha laga door**to, laakiin xildhibaanka 26 laga doortay yaanu calaamadaha ka sheekayne wuxuu xildhibaan u yahay 26ka june oo kaliya, markay taasi timaado ayay noqonaysaa maamul daadejin dhab ah oo ay imanaysa inuu xildhibaanku ka hadlo inta mashaariic ee ay xaafadaasi u baahan tahay, wuxuu kordhinayaa oo kobcinayaa cashuurihii xaafadaas, marka waxan odhan lahaa Xeerka ha lagu daro oo Gudiddaas gaarka ahi ha ka fikirto maamul daadejin dhab ah kala xadayn dhab ah ee yaanay xildhibaankiiba ka kaambayn garayn gobol dhan.

Xasaanadii Maayarada la siiyay lagana qaaday Xildhibaanada anigu waxaan qabaa inay khalad tahay in qaarna laga qaado qaarna la siiyo, xildhibaankii doortay ee mayarka ka dhigay bilaa xasaanad baa laga dhigaya adiga oo mayar ahna waad yeelanaysaa waa wax khaldan, xildhibaanka doortay baa sareeye maayarku ma sareyo kan wax doorta sareeya, **marka ama ha laga wada qaado ama ha loo wada daayo Xasaanada.**

**Xaga magayada anigu waxaan ayidsanahay sida Xildhibaanadu sheegeenba saddex goleba inay magacyo kala duwan yeeshaan sida dunidaba, marka saddexda xildhibaanba ha kala noqdaan magacyo kala duwan.**

Xaga Maamulka Gudoomiye Waxa aan soo jeedinayaa Maayarada in toos loo doorto iyagay ugu badinaysaa, dalkay ugu badinaysaa, magaalooyinkay ugu badinaysaa, marka waxaan qabaa in toos loo doorto doorashada soo socota Maayarada, yaanay noqon inaynu doorasho uun samayno eh doorasho kuweenii ka duwan waa inaynu samaynaa oo abuurna, Golaha sharaf bay u tahay inaynu qawaaniinta noocaas ah iyo qodobo noocaas ah aynu ku darno, culaysku komishanka doorashooyinku saarmayaa iyo xisbiyada qaranka, laakiin xeerku inagu ina khuseeyaaye aynu isku raacno inaynu Maayarada ugu yaraan lixda Magaalo ee Gobolada aynu ka dhigno in maayarada toos loo doorto taasna waxaan qabaa inaynu Xeerka ku darno, waxaan aad ugu mahad-naqayaa Shirgudoonka iyo Xildhibaanada wakhtiga aan ku dheeraaday sida fiican ii dhagaystay.

**Md. Maxamed Jaamac Cali** **"22min 16sec"** Marka ugu horeysa waxaan salaamaya Shir-gudoonka, Xildhibaanada Golaha, Shaqaalaha Golaha, Bahda saxaafada iyo marti sharafata kaleba ASC, waxaan filayaa waa wakhti dambe waa hadal dhamaadkiisa, sida xildhibaanadu kaga doodeen Xeerka anigu waxaan qabaa marka hore in Xeerka Gudidda

Arrimaha Gudaha iyo Nabadgalyada ay soo diyaariyeen uu sidiisaba yahay mid baal marsan xeerkii ay soo diyaarisay xukuumadu oo kaa gabigiisaba marka hore laga saaro, sababtoo ah waxyaabo badan oo khaladaad ah oo is dhaaf-dhaafsan baa ku jira, marka anigu waxaan ka hadlayaa Xeerkan ay xukuumadu soo diyaarisay ee kaabista iyo wax ka badalka, waxaan marka hore magaciisa ku celinayaa sidiisii hore.

**Qodobka Eray-bixinta** isna waxaan ka badalay erayga *"Xeer-dejin"* oo waxaan ku badalay "**Xeer-hoosaad"**, waayo xeer-dejinta waxa gaar u leh labada Gole ee Baarlamaanka, sidaas darteed eray-bixintooda kuma jirayso wax la yidhaahdo xeer-dejine waa xeer-hoosaad, waxaana xeer-hoosaad loolla jeedda Xeer-hoosaadka Golaha Deegaanka ama Xeerarka kale ee ka farcama sida Xeerka miisaaniyada iyo Xeerarka kale ee ay leeyihiin (bylaws) sida ku cad Qodobka 58aad ee Xeerkan.

Waxaan ku soo daray oo kale erayga "*Dhawrsanaanta", Dhawrsanaanta waxa loola* jeedaa; ***"Dhawrsanaanta mudanaha Golaha deegaanka oo ah (local councils) oo ku kooban Gobolka ama Degmooyinka ay kasoo bexeen".*** Waxa weeye hadii mudanaha kasoo baxay Degmadaasu xasaanadiisa ama hab-maamuuskiisu wuxuu ku xidhan yahay degmadaas uu kasoo baxay. Qodobka ku saabsan Shuruudaha lagu magacaabi karo Gobo lama Degmo, farqada tilmaamaysa in golayaasha deegaanku ay adeegyada bulshada bixiyaan 50%, anigu waxaan soo jeedin lahaa in laga dhigo 50%, waayo hadii ay bixiyaan 60% inay isku filan yihiin. Darajooyinka ama criteria-da ay kala yeelanayaan waxaan soo jeedinayaa in sideeda loo daayo, waayo hadii maanta lays dheho wax ka bedela, waxa imanaya muran badan maadaama ay in badan soo jireen, wax farabadan baana is dhaafaya, sababtoo ah kuwii kontonaadkii ama lixdanaaadkii loo magaccaabay Sub-district ee maantana "D' da ah, hadaan nidhaahno "B' halaga dhigo, mid shalay la magacaabayna ay "C" ama "D" tahay, khilaafkaasi wuxuu u yaalaa Wasaarada Arimaha Gudaha, kala xadaynta gobolada iyo degmooyinka iyo xaqsiinta habka ay u kala saaraayaan criteria-da marka la helo inay buuxiyeen shuruuda ah Degmadaasi 50% ama soo gala, ayay bixisaa ayay noqon kartaa in lagu sifeeyo criteria-da ay qaadan karto; 60% ayay soo saartaa criteria-da ay qaadan karto, 60% bay soo saartaa criteria-da ay qaadan karto Iwm. Caasimada oo ah 80%, hadii aan tuulo yar soo qaado oo idhaahdo taasuna "D" bay ahayd; tusaale ahaan hadaan kasoo qaado degmadaydii lixdankii ahayd ama dhawr iyo kontonkii ee Qoryaale, oo aan idhaahdo Qoryaale hala siiyo "B" ama "C" hala siiyo, dee waxay noqonaysaa inay meeshii yimaadaan dano iska hor imanayaa, laakiin laga rabo in lagu saleeyo Xadaynta iyo Xuduudaha iyo Waxsoosaarka ay degmadaasi soo saarto.

**Qodobka 15aad** ee baahinta awoodaha ismaamulka, waxyaalaha ugu daran ee qodobkan, gaar ahaan xarafka "K" ka maqan ee aan ku darayo waxa ka mid ah; ***"ka hortaga Khataraha aafooyinka, Masiibada dabka, Dabaylaha iyo Daadadka"*** oo la rabo in degmo kastaaba yeelato kooxaha wax badbaadiya (Rescue Team) ee ka hortaga Dabka,

Dabaylaha iyo Daadadka, sababtoo ah sadexdaas qodob waa kuwa ugu khatarsan ee ugu xaa'saasisan.

**Qodobka tilmaamaya xubnaha tirooyinka la qaybiyey**, anigu waxaan ***qabaa "tirooyinka la qaybiyey ee xubnaha golayaasha deegaanka inaan waxba laga bedelin".*** Hadaynu nidhaahno criteria-dii ay lahaan jireen xiligii dawladii hore ama sodonkii sano ee aynu soo jirney kusoo dhaqmayney aynu maanto hoos u guurno oo nidhaahno toban-toban iyo shan-shan, waxaan qabaa sidii uu sheegay Xildhibaan Rayte inaanay ahayn habka ay dhibaatadu ka taagantahay. Waxyaalahan keenaya in layidhaahdo golihiibaa wax cunay iyo golihiibaa sidana, anigu waxaan u arkaa maamul daro ku timid in la kala hago dhibaatada keentay inaanay ahayn in xal looga dhigo am xal loogu heli karayo in la yareeyo oo 10, 15, 8 iyo 9 laga dhigo, taasu waxaan u malaynayaa inaanay suurto gal ahayn, halkii la rabey inaynu kasii kordhino, oo caasimada hargeysa laga dhigo caasimada guud, gobolka maroodi-jeexna laga dhigo gaarkiiso oo ay yeeshaan xildhibaano intan kasii badan, hada gobolada kale ee la leeyahay kor haloo qaado, hadiiba aynu doonaynu inaynu kor uqaadno oo "A" iyo "B" iyo "C" aynu badino, xubnihiina 5 iyo 6 iyo 7 ka dhigno, anigu taas ma qabo, ***waxaanan soo jeedinayaa inay tiradaasu sideedii hore inoo ahaato.***

**Qodobka sheegaya Habka Doorashadda Mudanayaasha ama habku uu mudanuhu kusoo baxayo,** farqadiisa 3[aad], waxa ku taal *"Golayaasha deegaanku waxa ay ku iman doonaan tartanka doorashooyinka ee nidaamka sadexda xisbi qaran ee loolanka golayaasha deegaanka"* golayaasha deegaanku habka ay kusoo baxaan waa habka ururada, waxaan filayaa in xeer 20 iyo xeer 23 labadaba laga saaray, oo qodobka sheegaya nidaamka ay golayaasha deegaanku kusoo baxayaan inuu yahay nidaamka ururada lagu gefey, halka xubnaha golaha wakiiladuna ay kusoo baxayaan nidaamka xisbiyada, sidaa darted hadii xubnaha golayaasha deegaanka xisbiyo lagu doorto, xubnaha golayaha wakiilada maxaa lagu dooranayaa?, halkaasi waxa ka cad in laga guurey nidaamkii furitaanka ururada, qodobkaas waxaynu u dhignay markii hore xeer 14 in ururada la furo shantii sanoba mar, xeer 14 baa sidaa ahaa 97-kii oo cigaal sameeyey, waxa lagu bedelay oo inagu aynu markii danbe ka dhignay in tobankii sanoba mar la furo ururada, halka mudo xileedka xubinta golaha deegaanku ay tahay shan sano, halkaa waxa ka muuqata inaanay suurto gal ahayn in muda xileedka golayaasha deegaanku noqoto shan sano, ururadana la furo tobankii sanoba mar, waxa u dhexeeya faraq layaab leh, hadii aynu inagu markii hore khaladnay oo xukuumadii ay yaduna sidaa inagu raacday oo fasaxday, maantana uu weli qodobkaasi khaldanyahay taasi waa nasiib daro ina haysata,

Muddada xildhibaanada hada joogaa waa inay toban sano noqotaa markaa, waayo inagaa markii horeba khaladnay oo ay ahayd in mudo xileedka toban sano laga dhigo hadii kale shanti sanoba ururada la furo halmar, markaa ***qodobkaas waxa aan anigu waafajinayaa sida ay hanaanka geedi socodka dimuqraadiyadu u socoto in qodobkaa wax laga bedelo oo furitaanka ururadu noqdo shantii sanoba halmar si ay u waafaqdo***

***mudo xileedka golayaasha deegaanka ama Meesha laga saaro qodobka furitaanka ururada.***

**Qodobka 27aad**, xeer hoosaadka; hab-maamuuska, waxaan kusoo kordhinayaa xubin shanaad oo sheegeysa ***"inaan xubinta golaha deegaanka la xidhi Karin, lana qaban Karin hadii aanay ku jirin denbi ciqaabtiisu tahay ugu yaraan 3 sanadood"***, hadii denbigaas lagu helona waa in hab maamuuska laga qaadaa, sidii ka dhacday golaha deegaanka ee hargeysa oo xildhibaankii wax dilay la xidhay kadib markii laga xayuubiyey maamuuskii ama xasanaadii, waxaan qabaa inay dhamaantood yeeshaan xasaanad lana xidhi Karin lana qaban Karin hadii aanay denbi weyn faraha kula jirin. Anigu waxaan qabaa in lays ixtiraamo oo cidwalba sharaftiisa iyo karaamadiisa loo daayo oo shiikhu sharaftiisa huwan yahay oo odaygu sharaftiisa huwan yahay oo mid kastaaba sharaftiisa huwan yahay iyo karaamadiisa. Wasiir waliba waxa gurigiisa jooga 10 askari, markaa hadii aanu wasiirka dadka kale xasaanadiisa ogolayn dee isagana tiisa la ogolaan maayo.

**Qodobka 65aad awooda sharci-dejinta**, halkaa sharci-dejinta waxaan ku bedelay ***"Awooda Xeer-hoosaad golaha deegaanka".*** ........goobaha sida wakaalada biyaha, shirkadaha laydhka, isgaadhsiinta gaarka loo leeyahay, waxa layaab ah in magaalada hargeysa ama magaalooyinka kaleba in markii dhulkii uu dhamaaday loo waayo dhul ay xataa beebabkii iyo laydhkii dhigtaan iyadoo lagu naas nuujinayo, halkii ay wakaalada biyuhu ay ka yeelan lahayd booskii ay dhigan lahayd beebabkeeda iyo xafiis yadeeda, ay bogcad gaara oo qof leeyahay kiraysteen, hadii aanay wakaalada biyuhu awood u lahayn ama heli Karin bogcad, waasida ay ku socoto oo qaar horeba looga dhigay hanti gaar loo leeyahaye, ilayn kuwanba waxa laga dhigay hani gaar loo leeyahaye, in markaa layska wareejiyodee, laakiin waxaan qabaa in aanay wakaalada biyuhu xaq u lahayn inay boos ay kiraysatay beebabkeeda dhigato, hadii kii biyaha loo samaynayey booskii laga kiraysto isagana waa in biyaha laga iibiyaa. Waxyaabaha khatarta ah ee ka jira magaalooyinka hargeysa, boorama, borco iyo meelkasta ee kasoo baxay oo aan in badan loo fiirsan, taasoo ah khatarta buuraha magaalooyinka ku wareegsan oo dad gaar ahi iska yeesheen oo la guranayo, taasina waxaan qabaa in tahay aafooyinka inagusoo aadan ee keeni karto dabaylo iyo daadad.

Xeerka No.23, waxa ku cad inaan buuraha iyo togoga la yeelan Karin, hada dadbaa wada yeeshay, togbaa la degey daadbaa qaatay, buurbaa meel laga guray daadbaa qaatay, dabayl baa ka dhalatay xanuunbaa ku dhacay, anigu waxaan qabaa qodobadaas oo dhami inay yihiin inuu golahani aad uga fiirsado oo xeerkaas qodobada u baahan in wax badan laga saxo in la saxo oo Buuraha cida ku shaqada leh, Wasaarada Macdanta iyo Biyuhu ay talaabo sharciya ka qaado cidkastoo buur ama meel kale qodanaysa.

**Qodobka u danbeeya: Diyaarinta Miisaaniyadda;** waxaan filayaa berigii aan ka tirsanaa gudida dhaqaalaha qodobada ugu xaa'saasina waxay ahaayeen xeerka miisaaniyada oo

aad iyo aad loo hadal hayey berigii hore markii xeerkii la samaynaayey lasoo celiyey, xeerkaas waxa ku cad si loo hubiyo inay waajibtahay inuu qarankani yeesho miisaaniyad laga dheehan karo dhamaanba wadanka waxa soo gala iyo siday u kala baxaan iyo budget keeda sida hadhow hanti-dhawraha loogu diri karo.

Miisaaniyada Golaha Deegaanka, marka ugu horaysa qaranka waxa ku waajiba inuu sameeyo miisaaniyad guud oo ay ka muuqdaan dhaqaalaha kasoo hoyda cashuuraha iyo dhaqaalaha kasoo gala golaha deegaanka iyo wixii ay u helaan deeqaha, waxa weeye waxa looyaqaan 'grant-ka' ama deegda, oo aanay hay'aduhu iyagu ogolaynba in deeqohooda lasoo mariyo miisaaniyada ama laba xisaabiyo, iyagaana ah kuwa ugu musuq-maasuqa badan ee ugu khiyaamada badan leh, iyagoo aan xisaab xidh ogolayn ayay odhanayaan wadankani ma ogola xisaab xidh oo waxa ragaadiyey musuq-maasuq, imtaasoo milyan ayaanu ku bixinay bay dhehaan Somaliland, marka hore waa in lagu soo daraa miisaaniyada qaranka oo ay ka mid yihiin dawladaha hoose, dawlada shexe iyo Deequhu, sadex doodaba waa in laysa soo waafajiyaa si loo helo xisaab xidh ku dejisan.

Qodobka u danbeeya ee sheegaya xisaabaadka ku jira Xeer No 12, ee uu leeyahay waan laalay, anigu waxaan qabaa in gudiga arimaha maaliyadu oo qodbkaas 55aad hoos imanayo, ay soo diyaariyaan oo dib u habay ay ku sameeyaan xeer No: 12, kaas oo ah ka ugu musuqa badan, sababtoo ah dadkan aynu doonayno in wax loo qaybiyo Xeerka ay qaarna wax ku waayeen qaarna wax siiyey waa xeerkaas, si markaa kaa loo soxo, waa in gudida maaliyada loo saaro, lasoo soxo oo galaha lasoo hordhigo oo cashuuraha iyo ta'riifadaha ku jira dib loo soxo, lamana laali karo ilaa iyo laysku soxo qodobkaas, waxan soo jeedinayaa ugu danbayntii ***"in qodobkaas gudi gaar ah loo saaro si laysugu soxo xeerkii hore ee ismaamulka gobolada iyo degmooyinka Xeer No:12 ee ta'riifadaha ka hadlaya iyo kan aynu hada ka doodney si laysugu guro, in gudi gaara loo saaro, lays waafajiyo xeerkaasna aan la laali Karin iyadoo xeerkaasu uu yahay xeer muhiim ah oo dadka iyo dalkaba wax u taraya"*****................**ASAALAMU CALAYKUM WARAXMA TULAAHI WA BARAKAATU.

**Md. Prof Maxamed Cumar Aaden (Jiir)** **"15min 19sec"** Waxaan taageerayaa qolooyinkii hore u yidhi shariciga inta tan le'eg waxa laga yabaa inay ka fiicnaan lahayd in aynu mudo doora haysano.

Waxaan yar xasuusnahay, barri aynu barlamaanadaa kale ee dunidda wax ka yara akhrisan jirnay, ayaan yar xasuusnahay, sharciyo sanado iyo sanado masalan la yeelay barlamaanka ingiriiska oo kale. Inagu ma nihin, iskuna danno ma nihin laakin anigu waxan uga jeedaa waxa weeye, hubsiina meesha ku jirta, in wixii la hubsadaana waa daruuri.

Intaanan dhexgalin hadalkayga guud, anigu guud baan wax ka akhriyey, waxyabahaasna khaladaad badan baa xagayga iiga muuqday, kolkaas waxan is idhi inaad ta guud ka hadashaa baa la qaatay.

Kolka ugu Horaysa, hanaan baynu inagu lahaan jirnay, muddo sanado ah, ugu yaraan 7 ilaa 8 sano waxaad moodaysay in wax-badal inagudhacay, sharciyana ma xasuusni maraynu xeer-hosaadkeeni soo dhignay oo aynu nidhi aynu wax ka badalno.

Waxaa ka mid ahaa, wax allah wixii nayloo keenaba ee cusub in aan loo dhiibin jirin Guddi kolka horeba, laakin gole-waynaha la keeni jiray, qolada waddaa sharaxaad ka bixin jirtay (presentation), la dhagaysan jiray, la arki jiray, hadii qof doonayo su'aalo sharax ah uu waydiin jiray, dabadeed wixii ka dambeeya la odhan jiray bal soo akhriya qolada Gudidda.

Iminka waxaad modaa inay gudidiiba iyadu haday doonto iska haysanayo bahalkii, dabadeedna iyagoo wax ku soo daray, hadda kii rasmiga ahaa maad arag ama ciddi Kama doodin, iyagoo wax ku soo daray oo iyagu waxyaabo ay kala yimadeen ilayn waa bila aadame iyagu fikrahooda ku soo darsaday ayey la yimadaan. Waxa igala wanaagsan in aynu nidaamkeenii hore ku noqonaa, afkaartu halkan ka wada baxdaa, dabeeto ay iyagu noqdaan qaar isku gaynaya waxyaabahaas, wixii la yidhaahdo soo waydiiya qolada ay khusayso ee cadaymo ah ay halkan ka qataan laakin kolka hore inagu in aynu noqono dad soo jeeda waxa ka socoda meesha waxay tahay la ogaano, taas waxan u malaynayaa cidda kaliye ee aan ku arkaa iminka ilaa iminka ee inoo keentaa inay tahay qolada wasaarada Maaliyada, ayuun baan anigu ku arkaa oo waraqeheeda ina siiya, dabeed wasiirka u yeedhanaa ka dibna uu inoo sharaxaa, laakin inta kale way inaga luntay. Kolkaa waxaan jeclaan lahaa in aynu ku yar noqonaa nidaamkaas.

Waxaan doonayey inaan ka yara hadlo dalacsiinta gobolada marka la doonayo in meel laga kaxeeyo, wax waa loo qor qoray halka kan ay ka mid tahay tirada dadka ku nool iyo muxuu ahaa ilaha dhaqaale iyo, kuwaas waa saxoo waa waafaqsanahay laakin waxaa shaki iga jiraa in loo baahanyahay oo aan isleeyahay waa loo bahanyahay. Godobladeenu degaan ahaan waa kala jaad, Galbeedku waa ka roob badanyahay badanaaba bariga, dabadeed waxa dhacda in dadkii isu yimi oo ururay. Ma badna roobabka ka da'aa bariga ma garatay, kolkaa dadku naq-raac bay sameyaan, waa tii halka kan ilaa dhulkan galbeedka barigii dhawayd yimadeen. Kolkaa waxaa wanaagsan in la eego oo lagu daro, maxaa markaynu u jeedno dadka meesha ku nool intay leegyhiin waa in aynaan eegin sidii madaxwaynu ayaantii dhawayd sheegayey boqolkii 20% dalka in aynaan eegin, dadbaa kala baahsan, codayn aan ka qayb-galin, waxba samayn. Dawlada hoose waxay masuul ka yihiin, kuwaas ayey masuul ka yihiin. Waa in la egaa markaa oo la yidhaahdaa Tuuladatan maxaa dad daba jooga? Maxaa ka yimaada? Maxaa biyaha ka caba? Su'aalo nocaas ah waa in la tixgaliyaa oo la eegaa marka wax la sheegayo ama dhaqaale ha noqoto ama tirada dadka ku nool ha noqoto. Si kastaba ha noqotee waa in waxyaabahas la tixgaliyo ayaan anigu arkayaa.

Waxa ii yar muuqata tirada la leeyahay waa la dhimay, ma wada eegin aniguye, waa ila khalad. Waxaynu rabnaa in tuulo walba iyo meel walba wadanka cidi matashaa, cidi joogtaa oo wakiil ka noqotaa. Anigu waxanba ka yara fakeraayey maa la yara badiyo, maaha in la yareeyo.

**Halkan la leeyahay xasaanada maxaa loo siinayaa waa 800 oo qofe? 800da boqol ee qof dee waa wadanka oo dhan oo isku tagay, gobolaa loo qaybiyey, gobol baa 15 qof ah ama 14 qof ah ama 12ba tusaale intuu ahaa ma xusuusniye. Hargeisa ayaa ugu badanoo waa 25, Hargeysa iyada** waa guduheedii waaba macquul in la yidhaahdo intaas ama tiro la qaato oo la yidhahdo intaaba laakin in dadka laga yaabo inay markay soo biyo doonanayaana in tuulo waliba dadka buuxiyo marka ayna soo biyo doonanayna aad moodo tuuladii in laga maqanyahay ee aan cidiba joogin, hadaan roob ka da'in waliba.

Bari baan waxaan maray Sool iyo hadaan is-idhaahdo ha kula yara wadageen taarikhda e; barri baa waxan maray kormeer waxbarashada ah anigoo la socda ayaan gobolada maraayey Laas-canood iyo Burco iyo kuwaas. Waxaan arkay dhulal dugsiyo marka la eego diwaankooda 50, 40 arday ku qornayeen laakin waqtiga aan anigu u tagay roobkii baa da'ay, roobkii wuu seejiyey, tuulo walba waxa jooga laba saddex qof oo ardaygii deem eel uu wax ka cuno ma haysto intaanay quudinta hay'adaha UN ka iyo ku tabarucaan aanay bilaabin. Kolkaa, dhacdadaa owgeed lama odhan karo mar hadii dadka degaankoodii ka duwan yahay kan waa in la tixgaliyaa ee lama odhan karo waa cidla iyo meesha tani waa caynkaas.

Markaan anigu dawladaha hoose ka hadlaayo, waxaan arkaayey dawladii Siilaanyo waxaan aad u hambalyeeyey qodob baa jiray, qodobkaasi wuxuu ahaa in dadka ay ku beertay wax ah yididiilo oo tuulo walba gaar ahaan bariga sidaan u ogahay, tuulo waliba intay kaceen ama badmaxoodii lacag hawsoo diro ama dawlada ha waydiistaan oo ha la doodeen inay wax-qabsadaan inay ku kaceen. Waxa daruuri ah markaa in laga faidaysto taas oo kale, oo aan dawlada dhexe ha siiso khibradii haday doonayso, khubaradii haw dirto, dawladaha-hoose wax ha la baro, dad ha ururiyeen, dawlada rag badan geeyey meesha ha laysugu geeyo laakin waxa illa khalad ah in dawlada dhexe oo hawlo badani u yaalin inay iyadu culays badan iska saarto. Waa in dadka la jiheyaa oo cid walba wax la baraa madaama dadkii la yimadeen fikrad ah inay wax-qabsadaan ay doonayaan waa in laga faaidaystaa fikradaas oo hore loo mariyaa.

Yaanay noqonin dad (xildhibaanada dawladaha-hoose) aan haysan ama meesha wakiil ka ahayn, ilayn waxay haystaan xildhibanada Golaha degaanku marka laysku wada geeyo dadkii gobolkaas ku noola oo dhan ayey kalsoonidoodii haystaane. Kolkaas in laga dhigo wax yar oo muxu ahaa, waxa loo bahanyahay inay ku xidhmaan hay'adaha dawlada oo dhan, Maayarka waa inay ku xidhmaan. Badhasaabku ha noqdo wixii heer qaran ah ama wixii amniya inuu aad u ilaasho isagu, laakin yaanu isagu hogaaminin oo waxwalba isagu fadhiisanayn oo aanay ku dhicin yaraani dadkii meshaas ka tirsanaa.

dadkaasi waa inay ku fakaraan oo fikradas hore laga faaidaystaan inay wax qabtaan oo wax isku darsadaan mashaaric badan ayey iagau iskood u qabsadeen iyadoon cidna u qaban, iskuulada badana ka dhisan oo dhan intaan anigu ogahay, qaar badano aan ogahay gidigood dadkii debedaha joogay iyo kuwii gudaha joogay baa dhisay oo wada bixiyey lacagta. Waan ogahay tulooyin iminka iyagu dadka caadiga ah iyagu isku daraan oo bixiyaan mushaharaadka macalimeentoda, oo u kordhiya.

Kolkaa dadkii hadii hiigsigaa yeeshay, waxaynu u baahanahay in laga faaidaystaa kaa oo hore loo mariyaa ee uma baahnin in kii hoos loo dhigo oo uu ba'bo. Dadkaa isku imanaya ee wax-wada qabsanaya waa dhiranaan dhacday oo samaysantahay oo aad muhimad wayn u leh, waxanan filayaa anigu inay aad iyo aad inoogu wanaagsantahay taasi.

Kolkaa waxan ku fakarayey dawlada dhexe inay khibrada siisaa, siyaabo badan ayay u ilaalinkartaa, waxa aniga ii muuqda masalan, haday Standers samayso oo ay tidhaahdo qorshihiina Nuqul na siiya oo ay u soo diraan dawladaha hoose. Mana hubo iminka inay u soo diraan iyo inkale oo dawladu ka war hayso runtii; Inay ku soo diraan oo loo keeno oo dabeeto kaas racaan, maxaa ay qabsadeen? Maxay qabsan wayday? Maxay ugu fashilmeen? Dawaladaha hoosena waa lagu ilaalin lahaa marka dawladii dhexe ka war hasyo qorshohooda sanadkaa, ilayn qorshihii waxaa ka mida maxaa ku baxaaya? Xagay ka imanaysaa? Waxyaabo caynkas ah oo farabadan. Taas qudheeda waxaad modaa inay yar keenayso in dhaqaalahooda wax laga siiyo oo dawlada dhexe wada qaadan. Hadii ay leedahay meelaha intery points mooji ee debeda cidi ka imanayso ee laga soo galaayo ama debeda laga qabanaayo waxba ma leh ee dawlada dhexe ha qaadato, dunida inbadan bay taasi way jirta oo wixi debeda u baxaya ama ka soo galaya dawalada dhexe ayaa qaadata laakin dawlada hoose xagay wax ka keentaa ayey su'aashu tahay?

Burco kale ayan u war hayaayoo, adhigay dabaqaad ku dhufan jireen mooji shilin iyo waxay ka qaadan jirineen. Iminka muddo dhawr iyo toban sanadood ah waa laga wareejiyey oo laga qaaday, xagay wax ka keenayaan? Ilayn musuliyaad ayaa laga rabaa oo waxa la rabaa inay wax qabtaan oo gobolkii ka shaqeyaan laakin dadka bariga oo dhan marka la eego iyo tulooyinka waxay wax ka helayeen waa adhigaa yar iyo wixii kolba meshaa laga diraayo ama xabag ha noqoto ama saaca ha noqotee.

Kolkaa waxan filayaa waxa daruuri ah inaynu xeerkan debu eegis ku samayno, ku noqonaa. Anigu waxan taagerayaa qoladii dhawr jeer hore u tidhi waa in bahalkan dibu eegis lagu samayaa, gudi ha loo sameeyo dhexdhexaad ah, ad-hoc gudi ha loo sameeyo, kuwaasi ha hayeen, baryo ha ka soo baradageen haday donaan bil dambe ha haysteen.

Degdeg waa in aynaan waxwalba u samayn, hadaynu waxwalba u samayno runtii waxaynu noqonaynaa dad aan, halkan inaga waxa naylugu kenaa waxan u arkayaa "partially" inay tahay wax qarsoontahay laakin waxad ka eegtaan waxaynu inagu nahay mujtamac dood sameeya, mujtamaceenaa dooda sameeyana waxaa laga rabaa inuu araa

wanaagsan oo wax dhisaysa dawlada siiyo, odhanba mayno waa diidnay waxkan, qofkii donaa xag buu u leeyahay laakin waxas waxa igala wanaagsan waxa waa in aynu samayn karnaa. Taasi ceebna cidna kuma aha dhibaatana kuma aha laakin waa in aynu waxakan oo kale ilayn waynu ognahay caalamka baarlamanadoodu maaha mid "overnight" waxaas laguma sameeyo laba ayaamood, saddex ayamood iyo afar ayaamodna bahalkan boqolka page ah mooyi wuxu yahaye, dee dadbaan wada akhriyi Karin oo jaanis u heli karinba intaa.

Intan yar ee aan ku dhamaynayaa waxa weeye, runtii kolkii hore ayaan isku khaldaye waa in qorshayaashaas la baraa dawladaha hoose, waa inay noqotaa hanaan hubineeed "checking mechanism"baarlamaanka maaha laakin waa inay u noqotaa dawlada dhexe inay egaan oo ku badhaan maxay qabsadeen.

Dawladaha hoose qudhooda waxaan odhan lahaa walina ma hubo in aynu ku xidhno shardi ah inay waxbarasho leeyihiin, ugu yaraan inay dugsi sare ka baxeen oo kolkaas ay noqon karto in dadkii noqon karo dad wax akhriyi kara, qorshe samaysan kara wuxuun uun tari kara dee laakin hadii ay noqdaan dad badankoodu dad aan waxba kari ahayn oo wax contribution aan samayn kara ahayn dee ummaddu hore u mari mayso, waxaynu ka fakaraynaa umadda oo dhami inay horumarto in aynu gobol iyo laba maskaxdeena subjective (doorosho) ku noqoto, waa in aynu "subjectivity" eegnaa waxaan filayaa in qof waliba ila fahansanyahay "subjectivity iyo objectivity" waa in aynu eegnaa maxaa jira meesha iyo maxaa loo bahanyahay iyo maxaa sharcigu yahay oo aynu ku soconaa laakin waa in aynaan odhan aniga waxaas bay ila tahay, waanu lumaynaa hadaynu taas nidhaahno, qof waliba fikraduu doonu qaadan donaa , reerkoodii buu ku noqon donaa, ficiis bay noqon dontaa, waligeed markaa umad kala joogta ayey noqon donaa.

Taas in aynu inagu baabi'ino barlamaan ahaan ayeynu u baahanahay, uma baahnin markaynu hadlayno in aynu meelo gooni ah u muuqano sidii wax dafacaaya; intaas bay iga dhantahay wanad mahadsantihiin.

**Md. Xassan Muuse Hufane:- (4min)** Waxan halkan ka salaamayaa Shir-gudoonka, Xildhibaanada, Saxaafada. Gudoomiye, ugu horayn waxaan ka bilaabi lahaa **Qodobka 22aad** ee ka hadlaaya Xubnaha Golayaasha Deegaanka, hadaba anigu waxaan tageerayaa Degmada Hargeysa I7 Xildhibaan, waxaan soo jeedinayaa halkaas Xildhibaan in loo bedelo ***Xubin***

**Qodobka 23aad Faqardiisa 2aad** oo u dhigan Golayaasha Deegaanku waxa ay ku iman karaan tartanka doorashooyinka oo ah sadexda Xisbi, hadaba anigu waxaan ku soo kordhiyey ama ururo.

**Qodobka 27aad** oo u qoran in Xeerhoosaadkooda in ay diyaariyaan Golaha Deegaanku, hadaba waxaan soo jeedin lahaa waa in ay diyaariyaan xeerhoosaadkooda fadhiga ugu horeeya ee ay yeeshaan.

**Qodobka 28aad** ee ka hadlaya dhowrsanaanta golaha deegaanka, mar hadii ay Xubnaha Golaha Deegaanku ku yimaadeen Doorashooyin waa in loo daayo Xasaanada

**Qodobka 67aad** ee ka hadlaya Doorashada Gudoomiyaha iyo ku xigeenkiisa **farqada 2aad** wax ayaa ka dhimane dib ha luugu noqdo.

**Qodobka 70aad** ee ah xilka qaadista Duqa iyo ku xigeenkiisa waxaan soo jeedin lahaa in xilka lagaga qaado kala badh iyo hal dheeri, Gudoomiye waxaa kaloo jirta in mararka qaarkood ee xilka laga qaadayo Gudoomiyaha ina la isku qabto gudoomiyuhu cod maleeyahay mise maleh, taas oo Boorame ka dhacdey beri dhoweyd, hadaba waxaan soo jeedinayaa in xeerkan lagu cadeeyo imika na horyaala kumana cada.

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasimaha waaxda H/Qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSl** |
| ________________________________ | ____________________________ |